IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 5aad FAAFIN RASMI AH L. 1 r 11 ee 20 NOFEMBER 1976

*Laanta Faaf. Rasmiga ah ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda*

**FAAFIN BIL SOO BAX** **جريدة شهرية**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

### BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 19 ee 27 Luuliyo 1974, Xeerka Habka Madaniga.

SHARCI Lam. 19 taariikh 27 Luulyo 1974.

XEERKA HABKA MADANIGA

## GUDDOMIYAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKKAY: Xaashida koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka;
ISAGOO TIXGELINAYA: oggolaanshihii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan golaha Xoghayayaasha Dawladda;

ISAGOO DHEGEYSTAY: Talaadii uu soo jeediyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta;

WUXUU SOO SAARAYAA XEERKAAN

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday Xeerka Habka Madaniga Soomaaliyeed ee la xiriira Dekeretadaan. wuxuuna nidaaminayaa habka dacwooyinka madaniga ah loo qaado.

Sidoo kale wuxuu nidaaminayaa habka dacwooyinka ku saabsan arrimaha xeerka Qoyska (Axwaalu Shakhsiya), intii ka suurtoobi karta in lagu dabbaqo.

Qodobka 2aad

Waxaa asal u ah Xeerkaan nuqulka ku qoran afka Talyaaniga ee uu saxiixay Guddoomiyaha Golaha Sare ee kacaanka iyo Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

Nuqulkaas Asalka ah waxaa la dhigayaa Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda.

Qodobka 3aad

Wuxuu dhaqan gelayaa xeerka habka madaniga Soomaaliyeed markii laga billaabo 21 Oktoobar 1974, isla taariikhdaas waxaa la baab'iyey in lagaga camalfalo Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya xeerarka soo socda:

1. Xeerka Habka Madaniga ee Talyaaniga;
2. Dekereto Lamb. 5, soona baxday 2.2.1956;

3. Dekereto Lam. 28, soona baxday 24.2.1956;
4. Dekereto Lam. 29, soona baxday 24.2.1956;
5. Dekereto Lam. 30, soona baxday 24.2.1956;
6. Sharciyada habka ah ee laga helo nidaamka Garsooridda, Lam. 3 soona baxay 12.6.1962,
7. Xeerka habka madaniga ee Hindiya, soona baxay 1960;
8. Nidaamka Habka Madaniga;
9. Xeerka caddaynta ee Hindiya soona baxay 1872;
10. Nidaamka caddaynta ee Hindiya;
11. Xeerka fulinta Go'aannada ku saabsan lacagta;
12. Xeerkasta oo aan la socon karin qodobada xeerkaan.

Muqdisho, 27kii Luulyo 1974.

*GUDOOMIYAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA*

*(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

*Jaalle Dr. Cabdisalaam Sheekh Xuseen*

XOGHAYAHA DAWLADDA

WASAARADDA GARSOORKA IYO ARRIMAHA DIINTA

# XEERKA HABKA MADANIGA

## BUUGGA KOOWAAD

### *QODOBBADA GUUD*

### *BAABKA KOOWAAD*

### *HAY'AADKA GARSOORIDDA*

### *MADAXA KOOWAAD*

### GARSOORAHA

### QAYBTA KOOWAAD

### *WILAAYADDA GARSOORKA IYO AWOODDA*

*Qodobka 1aad*

*Wilaayadda Maxkamadaha Caadiga ah*

Maxkamadaha caadiga ahi waxay leeyihiin wilaayadda Garsooridda Madaniga ah sida waafaqsan qodobbada Xeerkaan haddii aan lagu sheegin xeer gaar ah si taas ka duwan.

Qodobka 2aad

Heshiis laguma beddeli karo Wilaayadda Garsooridda Soomaaliaa

Ma bannaana in laga tago wilaayadda Garsooridda Soomaaliyeed iyadoo la qaadanayo Garsoorid shisheeye ama heshiisyaal (arbitri) dibadda lagu gaaray haddii ayna dacwaddu ku saabsanayn xilal (Obligazioni) ka dhexeeya dad shisheeye ah ama qof shisheeye ah iyo mid muwaadin ah (cittadino) oo aan degganeyn, aanna ku nooleyn Soomaaliya.

Qodobka 3aad

Dacwad ka oogan Maxkamad shisheeye horteed

Lagama tagi karo wilaayadda Garsooridda Soomaaliyeed markii laga oogo isla dacwadaas ama dacwad kale oo iyada ku xiran Maxkamad shisheeye horteed.

### Qodobka 4aad

### Maxkamadda awoodda u leh Garsooridda Shisheeyaha

Wey suurtoobi kartaa in qof shisheeye ah laga dacweeyo Maxkamad Soomaaliya horteed.

1. Haddii uu deggen yahay ama ku nool yahay Soomaaliya ama uu ku leeyahay wakiil loo oggolaaaay in uu dacwoodo.
2. Haddii dacwaddu ku saabsan tahay xoolo laga helo Soomaaliay ama dhaxal qof Soomaali ah ama xoola dhaxal ah ee dacwaddooda laga furay Soomaaliya ama xilaal (obbligazione) ka dhashay ama ay waajib tahay in laga fuliyo Soomaaliya.
3. Haddii dacwaddu ku xiran tahay mid kale oo ka taagan Maxkamad Soomaaliya horteed.
4. Haddii Garsooraha Dawladda uu ka mid yahay qofka shesheeyaha ah uu awood u leeyahay in uu galo dacwooyin la mid ah kuwa lagu oogey qof Soomaali ah.

### Qodobka 5aad

### Waqtiga lagu goynayo awoodda Garsooridda

Wilaayadda Garsooridda iyo awooddaba waxaa lagu goynayaa xaaladaha joogta markii la oogay dacwadda mana saameynayaan isbeddelaad ka dib dhaca.

### Qodobka 6aad

### Heshiis laguma beddeli karo awoodda

Uma bannaana dhinacyada inay ku heshiiyaan inay ka tagaan awoodda, haddii uu Sharcigu sidaa caddeynayn.

## QAYBTA LABAAD

## AWOODDA XAGGA MAWDUUCA, QIIMAHA IYO DALKA

### Qodobka 7aad

### Awoodda Maxkamadda Degmada

Maxkamadda Degmada waxay awood u leedahay dacwadaha qiimahoodu ka badnayn 3000 Sh. SO. iyo arrimaha oo idil ee la xiriira qoyska, ayadoo aan la fiirin qiimaha. Awoodda Maxkamadda Degmada waxay ku egtahay inta degmadu ku fadhido.

Qodobka 8aad

Awoodda Maxkamadda Gobolka

Maxkamadda Gobolka waxay awood u leedahay dacwadaha qiima-hooda ka badan yahay 3000 Sh. SO. dhammaantood iyo kuwa aan qiima-hooda la xadayn. waxay kale oo awood u leedahay Dacwadaha shaqada dacwadaha Dawladdu dhinac ka tahay iyo dacwad kasta oo xeerar gaar ahi awood u siiyaan.

Maxkamadda Gobolka waxay awooddeedu ku egtahay inta Gobolku ku fadhiyo.

Qodobka 9aad

Awoodda Maxkamadda Rafcaanka

Maxkamadda Rafcaanka waxay awood u leedahay inay gasho xu-kunnada Racfaanka laga soo qaato dhammaantood oo ka yimaada Max-kamadda Degmada ama Maxkamadda Gobolka. Waxay kale oo awood u leedahay inay kala saarto dacwadaha ku saabsan wilaayadda garsoorid-da iyo awoodaba ee ka dhex dhasha Maxkamadaha Degmooyinka ee raacsan iyo kuwaas iyo Maxkamadda Gobolka.

Sidoo kale waxay awood u leedahay keli ahaanteed arrimaha ku lug leh fulinta Xukunnada Shisheeyaha ah.

Awoodda Maxkamadda Rafcaanku waxay ku eg tahay dal ahaan in-ta Gobolku ku fadhiyo.

Qodobka 10aad

Awoodda Maxkamadda Sare

Awoodda Maxkamadda Sare waxay saamaysaa Jamhuuriyadda dhammaanteed, waxayna awood u leedahay:-

1. Dhammaan Racfaannada laga soo qaato xukunnada ka soo ba-xay Maxkamadaha darajada Labaad iyo kuwa ka soo baxa Maxkamadaha darajada koowaad ee eyna bannaaneyn in Max-kamadaha dhexe rafcaan looga qaato.

1. Dhammaan dacwadaha idaariga ah.

3. Dacwadaha ku saabsan arjiyada lagu warsanayo dib ugu no-qoshada Xukunnada iyada ka soo baxa.

4. Dhammaan arrimaha kale ee qaanuunku awood u siinayo.

5. Kala saaridda nidaamka Garsooridda iyo awooddaba ee ka dhexdhaca Maxkamadaha caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn, iyo kuwa gaarka ah iyadoo laga reebayo inta uu sheegay qodobka 9aad.

### Qodobka 11aad

### Qaddaridda Qiimaha Dacwadda

Qaddaridda qiimaha dacwadda xagga awoodda waxa saldhig u ah arjiga Maxkamadda la keensanayo.

## QAYBTA SADDEXAAD

## AWOODDA XAGGA DALKA

### Qodobka 12aad

### Xaddididda awoodda Maxkamadda xagga dalka

Awoodda xagga dalka ee Maxkamada waxaa xaddidaya meesha uu ku nool yahay ama uu deggan yahay qofka dacwadda loo haysto (dacweysanaha), hadduusan xeer kale sidaas si ka duwan sheegin.

Haddii dacweysanuhu uusan degganayn ama ku noolayn Soomaaliya ama aan la aqoon meesha uu deggan yahay ama uu ku nool yahay waxa awoodda iska leh Maxkamadda ku taal meesha uu deggan yahay Dacwooduhu.

### Qodobka 13aad

Maxkamadda Awoodda u leh dacwadaha ku saabsan xuquuqda caynta ah (Reali) iyo dacwadaha ku lug leh lahaanshaha maguurtada.

Dacwadaha ku saabsan xuquuqda ceynta ah ama maguurtada ah iyo dacwadaha ku lug leh lahaanshaha maguurtada waxaa awood u leh Maxkamadda ku taal meesha laga helo xoolaha maguurtada ah.

### Qodobka 14aad

Maxkamadda awoodda u leh dacwadaha ku saabsan Xilalka

Waxaa bannaan ikhtiyaar ahaan in dacwadda ku saabsan xilalka laga hor oogo Maxkamadda ku taal meesha xilku ka dhashay ama waajib tahay in laga fuliyo.

### Qodobka 15aad

### Maxkamadda awoodda u leh dacwadaha dhaxalka

Waxa awood u leh dacwadaha dhaxalka Maxkamadda ku taal meesha xoolaha laga dhintay lagu dhaxlayo.

Qodobka 16aad

Maxkamadda awoodda u leh fulitaanka khasabka ah ee ku saabsan guurtada iyo maguurtada

Waxaa awood u leh fulitaanka khasabka ah ee ku saabsan maguurtada iyo guurtada Maxkamadda ku taal meesha laga helo guurtada iyo maguurtada, isla Maxkamaddaas ayaa awood u leh inay fiiriso ka hortagga fulinta.

Qodbka 17aad

Bannaanaanta beddelidda awoodda xagga dalka

Waa u bannaan tahay dhinacyda dacwadda iney heshiis cad ku beddelaan awoodda xagga dalka haddii ayna taasi ka horimaaneyn qodob xeereed oo amar ah.

Qodobka 18aad

Meesha Degnaashaha loo doortay

Qofkii degnaasha u doortay meel sida ku qoran qodobka 40 iyo kuwa la xiriira ee ka mid ah xeerka Madaniga waa bannaan tahay in lagu dacweeyo Maxkamadda ku taal meesha uu doortay.

QAYBTA AFRAAD

BEDELAADDA AWOODDA

Qodobka 19aad

Dacwadaha faraca ah

Waa bannaan tahay in dacwadaha faraca ah laga hor oogo Maxkamadda awoodda u leh tan asalka ah xagga dalka iyadoo aan la fiirineyn awoodda xagga mawduuca ama qiimahaba.

Qodobka 20aad

Dacweysanayaasha badan

Waa bannaan tahay in laga hor oogo dacwado isku xiran oo lagu oogay hal dacweysane ka badan Maxkamado badan hortood, Maxkamadda ku taal meesha uu deggan yahay ama ku nool yahay dacweysanayaasha midkood.

### Qodobka 21aad

### Dacwadaha ka hor keenidda ah

Maxkamadda awoodda u leh dacwadda asalka ah ayaa awoodna u leh arjiyada dacwadaha ka horkeenidda ah.

## QAYBTA SHANAAD

## MAQNAASHAHA WILAAYADDA GARSOORIDDA IYO AWOODDA

### Qodobka 22aad

### Maqnaashaha Wilaayadda Garsooridda

Waa bannaan tahay in la soo jeediyo maqnaashaha wilaayadda Garsooridda, xataa dhinaca Maxkamadda goor kasta ama daraja kasta oo ay dacwddu socoto.

### Qodobka 23aad

### Maqnaashaha Awoodda

Waa bannaan tahay in la soo jeediyo maqnaashaha awoodda xagga mawduuca iyo qiimaha xataa dhinaca Maxkamadda goor kasta iyo daraja kasta oo ay dacwaddu socoto.

Maqnaashaha awoodda xagga dalka waxaa la soo jeedin karaa darajada koowaad oo keliya.

Haddii ay dhinacyadu oggolaadaan soo jeedinta maqnaashaha awoodda lana magacaabo Maxkamadda awoodda iska leh, waa u bannaan tahay Garsooraha dacwadda loo soo bandhigay inuu u wareejiyo Maxkamadda awoodda u leh isagoo u qabanaya muddo aan ka badneyn saddex bilood oo ay waajib tahay in la dhaqaajiyo dacwadda muddadaas dhexdeeda.

Haddii aan muddadaas dhexdeeda la dhaqaajin dacwadda waxaa laga tirtirayaa buugga dacwadaha.

### Qodobka 24aad

### Celcelinta dacwadda

Haddii hal dacwo laga oogo Maxkamada badan hortooda wuxuu soo saaraya Garsooraha ugu dambeystii laga hor oogay go'aan caddeeynaya in dacwaddu hortaal Maxkamado badan (Litispendenza) waana ka tirtirayaa buugga dacwadaha. dacwadduna waxay ka hor soconaysaa Garsoodihii markii ugu horreysay laga hor oogay.

### Qodobka 25aad

### Dacwadaha isku xiran

Haddii dacwada badan laga hor oogo dhawr Maxkamadood ayna suurtoobi karto in dacwad ahaan keliyah loo qaado, Garsooruhu wuxuu amrayaa in loo wareejiyo Garsooraha awoodda u leh dacwadda asalka ah ama Garsoorihii markii ugu horreysay laga hor furay.

## QAYBTA LIXAAD

## HABKA WILAAYADA GARSOORIDDA IYO AWOODDA

### Qodobka 26aad

### Habka wilaayadda Garsooridda iyo awoodda

Waa u bannaan tahay dhinac kasta oo dacwadda ka mid ah inuu warsado in go'aan laga gaadho arrinta ku saabsan wilaayadda Garsooridda iyo awooddaba, haddii ayna Maxkamadda darajada koowaad go'aan ka gaadhin mawduuca dacwadda.

Warsashada waxaa la geynayaa Maxkamadda Sare, ama Maxkamadda Rafcaanka ee awoodda u leh sida waafaqsan qodobka 9aad, haddii ay isku qabtaan awoodda Maxkamadaha Degmooyinka ee Gobolka ama Maxkamad Degmo iyo tan Gobolka.

Waa bannaan tahay in laga hor duro Maxkamadda Sare xukunnada ay Maxkamadda Rafcaanku ka soo saarto mawduuca isku qabashada wilaayadda Garsooridda ama awoodda haddii ayna isku qabashadaasi ku saabsanayn awoodda xagga dalka kaasoo ay Maxkamadda Rafcaanku go'aan kama dambeys ay ka gaareyso.

### Qodobka 27aad

### Soo jeedinta Maxkamaddu leedahay xagga isku qabashada awoodda

Waa u bannaan tahay Maxkamadda dacwadda loogu soo wareejiyay Maxkamad kale ee go'aan ka gaartay wilaayadda Garsooridda iyo awoodda inay warsato kala saaridda wilaayadda ama awoodda.

### Qodobka 28aad

### Joojinta Qaadista Dacwadda inta ay socoto kala saaridda wilaayadda Garsooridda iyo awoodda

Duritaanka ku saabsan kala saaridda habka wilaayadda garsooridda iyo awoodda wuxuu joojinayaa qaadista dacwadda.

Hase yeeshee waa u bannaan tahay Maxkamadda inay amarto in la qaado tallaabooyin deg-deg ah ee loo baahan yahay.

# QAYBTA TODDOBAAD

## KA JOOGSASHADA DURRIDDA IYO MAS'ULIYADDA GARSOORAYAASHA

### Qodobka 29aad

### ka joogsashada Garsooraha

Waa ku waajib Garsooraha inuu ka joogsado gelidda dacwadda:
1. Haddii uu dan gaar ah ku leeyahay dacwadda.

2. Haddii isaga ama Xaaskiisa ama qof qaraabadiisa dhinacyada ka mid ah uu leeyahay midkood ama qareennada xiriir qaraabannimo oo gaaraya darajada afraad.

3. Haddii ay ka dhexeeyso isaga ama qof ka mid ah qoyskiisa iyo dhinacyada midkood ama qareennada colaad adag ama xiriir deyn ama amaah.

4. Haddii talo ama ra'yi uu ka dhiibtay mawduuca dacwadda ama dacwadda hore uu u arkay isagoo gudanaaya shaqadiisa Gorsooridda ah.

5. Haddii u ahaa wali (Tutore) ama shaqo bixiye ama maamule dhinacyada midkood.

Waxaa kale oo uu dacwadda ka joogsanayaa markasta oo ay jiraan sababo culus oo keenaya joogsashada.

### Qodobka 30aad

### Duridda Garsooraha

Haddii la helo waxyaabaha lagu sheegay qodobka hore waa u bannaan tahay dhinac kasta inuu duro Garsooraha isagoo u qoraaya arji Guddoomiyaha Maxkamadda kuna caddeynaya asbaabaha duridda iyo siyaabaha sugidda.

Arjiga duridda Garsooraha wuxuu joojinayaa wadidda dacwadda

### Qodobka 31aad

### Maxkamadda awoodda u leh go'aan ka gaaridda duridda

Haddii Guddoomiyaha Maxkamadda arjiga duridda loo soo qortay uuna awoodi karin in uu go'aan ka gaadho duridda, ama isagaba loo soo jeed.yey duridda, waxaa arjiga duridda loo dirayaa Maxkamadda ka sareysa xagga darajada.

Qodobka 32aad

Talaabooyinka ku saabsan ogolaashaha duridda

Haddii Maxkamaddu oggolaato duridda, waxay haddana go'aankeeda ku saabsan oggolaashaha ku qabanaysaa Garsooraha waajibkiisa ay tahay inuu beddelo kii la duray.

Qodobka 33aad

Mas'uuliyadda Garsooraha ee madaniga ah

Waa bannaan tahay in la dacweeyo Garsooraha xagga Madaniga:

1. Haddii uu khiyaamo ama isdhaafin, ama laaluusha ku sameeyo shaqadiisa.
2. Haddii uu diido ama ka tago ama gadaal uu ugu dhigo shaqo ka mid ah shaqooyinkiisa sabab aan la garwaaqsan karin daraadeed.

Qodobka 34aad

Oggolaashaha xoghayaha Dawaladda

Ma bannaana in dacwad lagu oogo nin Garsoore ah haddii uusan ka hor oggolaan xaghayaha dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

MADAXA LABAAD

KAALIYAYAASHA IYO GAARSIIYAYAASHA

Qodobka 35aad

Hawsha Kaaliyaha

Wuxuu Kaaliyuhu qorayaa wax allaale wixii tallaabooyin ah ee uu qaadayo Garsooruhu ama isagu ama dhinacyadu goor kasta iyo qaabab kasta oo xeerku caddaynayo, wuxuuna ka gargaarayaa Garsooraha diyaarinta qoraalka dacwadda.

Wuxuu Kaaliyuhu saxiixayaa warqadaha garsooruhu saxiixayo, wuxuu kaloo ku kacayaa wax allaale wixii awooda ah ee xeerku si cad u siinayo.

Qodobka 36aad

Hawsha Gaarsiiyaha

Gaarsiiyuhu wuxuu ka kaalmaynayaa Garsooraha xagga fadhiga Maxkamadda, wuxuuna fulinayaa awaamiirta Garsooraha, wuxuuna ku kacayaa gaarsiinta warqadaha iyo dhammaan wixii mas'uuliyad ah ee xeerku amrayo.

### Qodobka 37aad

### Mas'uuliyadda Kaaliyayaasha iyo Gaarsiiyayaasha

waa la dacweynayaa kaaliyayaasha iyo Gaarsiiyayaasha madani ahaan:

1. Haddii ay diidaan, ama ka tagaan ama gadaal u dhigaan gudashada waajibaadkooda.

2. Haddii ay ku kacaan tallaabo baadil ah kas ahaan ama si gef culus ah.

## MADAXA SADDEXAAD

## KHABIIRKA TEKNIKADA AH IYO ILAALIYAHA IYO KAALIYAYAASHA GARSOORAHA

### Qodobka 38aad

### Khabiirka Teknikada ah

Waa u bannaan tahay Garsooraha marka loo baahdo in uu kaalmaytso hal ama ka badan oo khubaro ah oo leh khibrad teknika ah oo gaar ah.

### Qodobka 39aad

### tallaabooyinka uu qaadayo khabiirku

wuxuu ku kacayaa khabiirku baaritaanka looga baahdo, ra'yi buuna ka dhiibanayaa wuxuuna u gudbinayaa Garsooraha macluumaadka uu ku gaaro khibraddiisa gaarka ah.

### Qodobka 40aad

### waajibaadka khabiirka iyo duritaankiisa

Waa ku waajib khabiir lagu doortay khibradda gaarka ah inuu guto waajibaadkiisa haddii aan la helin asbaab caqliga gasha oo taas ka horjoogsanaysa.

waa u bannaan tahay dhinacyada dacwadda inay ku duraan khabiirka teknikada ah asbaabta ku soo aroortay qodobka 29.

Waxaa duritaanka khabiirka go'aan ka gaaraya Garsooraha magacaabay.

### Qodobka 41aad

### Mas'uuliyadda Khabiirka

Waa la warsanayaa khabiirka khasaarooyinka uu u soo jiido dhinacyada kas ahaan ama si gef culus ah.

Markaasna iyadoo lagu waajibinayo in uu bixiyo magdhow, haddana waxaa u bannaan Garsoorihii magacaabay in uu saaro ciqaab ganaax ah.

Qodobka 42aad

Ilaaliyaha

Waxaa loo xilsaarayaa ilaalinta iyo maamulidda xoolaha la qabto (sequestrato) ama Maxkamaddii amartay in la hayo ilaaliye uu magacaabayo Garsooruhu, wuxuu u goynayaa Abaalgudkuu mutaysan lahaa. Waana suurtoobi kartaa in uu ilaaliyuhu noqdo dhinacyada midkood ama dad kale.

Qodobka 43aad

Beddelaadda Ilaaliyaha

Waa u bannaan tahay Garsooraha goor kasta in uu beddelo Ilaaliyaha markii uu warsado dhinacyada midkood ama markuu isagu doono.

Qodobka 44aad

Mas'uuliyadda Ilaaliyaha

Waxaa ku waajib ah ilaaliyaha in uu magdhow ka dhiibo dhibaatooyinka uu geysto haddii uusan waajibkiisa ku gudan dadaal iyo foojignaan caadi ah.

Waxaa kaloo u bannaan Garsooraha in uu ilaaliyaha lacag ku ganaaxo.

Qodobka 45aad

Kaaliyayaasha kale

Waa u bannaan tahay Garsooraha, Kaaliyaha iyo Gaarsiiyaha haddii loo baahdo taas in ay kaalmaystaan khubaro ama turjibaanno ama kaaliyayaal kale.

Waa u bannaan tahay Garsooraha had iyo jeer in uu kaalmo weydiisto Cidammada Booliska.

BAABKA LABAAD

XEER ILAALINTA GUUD

Qodobka 46aad

Dacwadaha madaniga ah ee laga oogayo Xafiiska Xeer Ilaaliyaha

Xeer Ilaaliyuhu wuxuu oogi karaa dacwadda madaniga ah goorarka Xeerku caddaynayo

Qodabka 47aad

Soo dhexgelidda dacwadaha Madaniga ah ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud.

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu soo dhexgeli karaa dacwadaha Madaniga ah mararka uu caddaynayo xeerku, iyo goor kasta oo kale ee ay u muuqato in ay taabanayso danta guud.

Qodobka 48aad

Gaarsiinta Xafiiska Xeer Ilaaliyaha warqadaha dacwadda

Waxaa waajib ku ah Garsooraha laga hor oogay dacwad ka mid ah dacwadaha lagu tilmaamay qodobka hore in uu gaarsiiyo warqadaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud si ay ugu suurtowdo dhexgeliddu

Qodobka 49aad

Joogsashada Xubin ka mid ah Xafiiska xeer Ilaaliyaha Guud

Waa u bannaan tahay xubin ka mid ah xafiiska xeer ilaaliyaha Guud in uu ka joogsado ka qaybgalka dacwooyinka madaniga ah sabab ka mid ah asbaabaha lagu xusay Qodobka 29 daraadeed, hase yeeshee ma bannaana duriddiisu.

Qodobka 50aad

Mas'uuliyadda xubin ka mid ah xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud

Waxaa lagu dhaqayaa Xeer Ilaaliyaha Guud qodobka ku saabsan dacweynta Garsooraha Madani ahaan ee lagu xusay Qodobka 33.

BAABKA SAADDEXAAD

MADAXA KOOWAAD

DHINACYADA IYO WAKIILADA

Qodobka 51aad

Dhinacyada iyo Wakiillada Awoodda dacweynta

Waxaa wax dacweyn kara dadka awoodda u leh maamulidda xaqa ay ku doodayaan.

Uma bannaana dadka aan awoodda lahayn in ay wax dacweeyaan

haddii ayna lahayn qof kaalmeeya ama wakiil ka ah sida waafaqsan qoaobbada nidaaminaya awoodda.

Dacwadda ku saabsan qofka leh shakhsiyadda qaanuuneed waxaa wadaya qofka wakiilka ka ah sharci ahaan.

Qodobka 52aad

Daneeyaha Gaarka ah

Haddii uusan lahayn qofka aan dhammayn ama qofka leh shakhsiyad qaanuuneed qof xaq u leh inuu u doodo waxaa u bannaan Garsooraha in uu u magacaabo daneeye gaar ah gooraha degdegga ah.

Qodobka 53aad

U doodid Xaqa dad kale

Uma bannaana qofna in uu u doodo naf ahaantiisa xaq dad kale.

MADAXA LABAAD

QAREENNADA

Qodobka 54aad

Difaaca

Waa u bannaan tahay dhinacyada in ay iyagu wataan dacwadahooda Maxkamadaha darajada koowaad iyo darajada labaad hortooda iyagoo aan kaalmaysan qareen.

Hase yeeshee Maxkamadda Sare horteeda waxaa ku waajib ah inay kaalmaystaan qareen.

Qodobka 55aad

Wakiillada Dacwadda

Haddii dhinacu leeyahay qareen ka kaalmaynaya dacwadda waxaa waajib ah in uu leeyahay qareenku wakaalad sidaas caddaynaysa.

Samaynta Wakaaladda waxay ku egtahay hal darajo oo ka mid ah darajooyinka dacwadda, mana u bannaana wakiilka in uu ka heshiiyo ama ka noqdo dacwadda haddii aan si cad loogu sheegin Wakaaladda wax ka duwan sidaas.

Qodobka 56aad

Awoodaha Qareenka

Waxaa u bannaan Qareenka Wakaaladda haysta in uu ku koco wax allaale wixii tallaabooyin ah oo aan si cad xeerku ku koobayn dhinaca.

Goor kastaba uma bannaana Qareenka in uu ku kaco shaqo keeneysa in uu maamulo xaq la isku haysto haddii uusan idan cad u haysan sidaas.

### Qodobka 57aad

### Ka noqoshada ama ka tanaasulidda Wakaaladda

Haddii qareenku ka noqdo ama ka tanasulo wakaaladda taasi ma saamaynayso dhinaca kale haddii aan qareen kale beddelin ama uusan isu taagin mawakiilku in uu isagu is difaaco.

Haddii aan qareen kale la qaban ama uusan muwakiilku isu taagin in uu isagu is difiico waxaa Garsooraha waajib ku ah in uu ku camal falo qodobbada ku saabsan waajibaadka dhinacyada iyo maqnaanshahooda.

### Qodobka 58aad

### Kaalmeysiga khabiirka Teknikada ah

Waa u bannaan tahay dhinac kasta in uu kaalmeysto khabiir teknika ah siday ugu bannaan tahay in uu kaalmaysto qareen.

## MADAXA SADDEXAAD

## WAAJIBAADKA DHINACYADA IYO QAREENKA

### Qodobka 59aad

### Waajibaadka Ikhlaaska

Waxaa waajib ku ah dhinacyada iyo qareennadooda in ay dacwadda ku maamulaan si ikhlaas ah. Haddii ayna qareennadu iyo dhinacyadu ilaalin waajibkaas waxaa waajib ku ah Garsooraha in uu isagu u gudbiyo madaxda awoodda u leh edbintooda.

### Qodobka 60aad

### Hadallada aan habbooneyn iyo kuwa xumaanta leh

Ma bannaana in la isticmaalo Garsooraha hortiisa hadallo ama qoraal xumaan leh; haddii la isticmaalana wuxuu awood u leeyahay in uu amro tirtiridda hadalladaas.

## MADAXA AFRAAD

## KHARAJKA DACWADDA IYO MAS'UULIYADDA DHIBAATOOYINKA KA DHASHA

### Qodobka 61aad
### culeyska sugidda kharajka

Waxaa ku waajib ah dhinac kasta in uu dusha u dhigto kharajka tallaabooyinka uu ku kaco ama uu warsado, waana in uu aedejiyaa kharajka tillaabooyinka kale ee lagama maarmaanka ah ee uu amrayo xeerka ama garsooruhu in la dedejiyo.

### Qodobka 62aad

### Go'aanka kharajka

Garsooruhu isla xukunka uu ku dhammaynayo dacwada ayuu ku xukumayaa dhinaca aan ku guuleysan in uu soo celiyo kharajka dhinaca kale, wuxuuna xaddidayaa intay tahay iyadoo ay la socoto xushmada Qareennimada.

### Qodobka 63aad

### Kharajka xad dhaafka ah iyo isku gudidda

Waxaa u bannaan Garsooraha markuu x u k u m a a y o kharajka sida loogu soo sheegay qodobka hore in uu ka leexdo kharajka xad gudubka ah ama dheeraadka ah.

Waa u bannaan tahay Garsooraha inuu ka dhigo kharajka isku gudid dhammaantiis ama qaarkiis haddii labada dhinacba ku hoogaan dacwadda ama la helo asbaab kale oo la garaysan karo.

Haddii dacwaddu ku dhammaato heshiisiin labada dhinac, kharajka dhexdooda yaal waa la isku gudayaa.

### Qodobka 64aad
### Kharajka fulinta

Waxaa qaadaya kharajka ka soo gaara deynlaha fulinta dacwadda daraadeed deynqabaha lagu fulinayo.

### Qodobka 65aad
### Mas'uuliyadda la adkeeyey

Haddii ay sugnaato in dhinaca aan ku guuleysan dacwadda uu ku kacay maamul ama isku taagid qaadidda dacwadda si niyo-xumo ah, gef culus ah waxaa u bannaan Garsooraha in uu ku xukumo markuu warsado dhinaca kale magdhow dhibaataduu keenay daraadeed isagoo ku xaddidaya xukunka intuu le'egyahay magdhowgu.

### Qodobka 66aad
### kharajka marka dad badan wax la xukumay

Haddii ay hal ka badan yihiin kuwa aan ku guuleysan dacwadda waxaa kuwaajib ah Garsooraha in uu ku xukumo kharajka mid walba inta dantiisu ka le'eg tahay dacwadda.

Haddii aan Garsooruhu u kala saarin dadka wax lagu xukumay kharajka waxaa loogu qaybinayaa si is le'eg.

### Qodobka 67aad

### Damaanadda Kharajka

Waxaa u bannaan Garsooraha markuu warsado dacweysanuhu in uu amro in uu keeno dacwooduhu damiin ku filan in uu soo celiyo kharajka haddii laga cabsi qabo in ayna suurtoobi karin in la gudo.

## BAABKA ARFAAD

## OOGIDDA DACWADDA

### Qodobka 68aad

### Xaqa oogidda dacwadda iyo danta dacwadda

Waxaa ku waajib ah qofka ku doodaya xaq in uu dacwadda ka oogo Maxkamadda awood u leh horteeda.

Waxaa lagama maarmaan ah in dani ku jirto oogidda dacwadda iyo iska celinteeda.

### Qodobka 69aad

### mabda'a iska horkeeniada dhinacyada

Wixii ka baxsan habka qaadista dacwadaha maqnaanshaha, uma bannaana Garsooraha in uu go'aan ka gaaro dacwo kasta oo loo keeno haddii uusan uga yeerin uusana imaan.

### Qodobka 70aad

### Soo dhexgelinta waajibka ah

Haddii ay lagama maarmaan tahay in xukunku ku soo baxo dhinacyo badan waxaa waajib ah in dhammaantood looga horyeero Maxkamadda. Haddii aan loo yeerinna waxay amraysaa Maxkamaddu in la soo dhexgeliyo dhinacyada maqan dacwadda iyadoo loo qabanaayo waqti go'an.

### Qodobka 71aad

### Soo dhexgelidda ikhtiyaarka ah

Waxaa u bannaan qofkasta oo ku doodaya xaq in uu soo dhexgalo dacwadda ka dhex socota dhinacyo kale. Sidoo kale waxaa u bannaan in uu dhinac ka mid ah la safto si uu u difaaco dantiisa gaar ahaaneed.

Qodobka 72aad

Soo dhexgelidda dhinac warsado

Waxaa u bannaan dhinaca in uu soo dhexgeliyo dacwadda qofkii uu u rumeysan yahay in uu lug ku leeyahay sababta dacwadda ama sheeganaya in uu yahay dammiin.

Qodobka 73aad

Soo dhexgelidda Maxkamadaa amarto

Waa u bannaan tahay Garsooraha in uu amro in uu soo dhaxgeliyo qofkii lug ku leh sababta dacwadda, goorkasta iyo daraja kasta ee dacwaddu socoto.

Qodobka 74aad

Waqtiga soo dhexgelidda

Dhexgelidda ha ahaato ikhtiyaar ama warsasho dhinacyada midkood ah waxay ku eg tahay darajada koowaad ama tan rafcaanka sida waafaqsan qodobka 234.

Qodobka 75aad

Ka saaridda dhinaca la damiintay

Waa bannaan tahay in dacwadda laga saaro qofka la damiintay haddii uu yimaado kan wax damiintay, uuna oggolaado in uu isagu la wareego dacwadda, dhinaca kalena uusan sidaas ka hor imaan.

Qodibka 76aad

Iska dhaxalka dacwadda

Haddii xaqa la isku haysto dacwadda dhexdeeda uu ugu guuro qof kale sabab aan geeri ahayn, dacwaddu wey u soconaysaa dhinacyada asalka ah.

Haddii sababta guuritaanka xaqa ay tahay geeri darteed dadka dhaxlaaya ayey dacwadda u soconeysaa ama iyaga ayey ku soconeysaa.

## BAABKA SHANAAD

## AWOODAHA GARSOORAHA

### Qodobka 77aad

### Is waafijinta waxa la weydiinayo iyo waxa lagu dhawaaqayo

Garsooruhu waa inuu ka jawaabaa dalabaadka dacwadda oo dhan, mana aha inuu xuduuddeeda dhaafo. Hase yeeshee waxaa u bannaan inuu go'aan ka gaadho arrimo ayna dhinacyadu soo jeedin, haddii danta guud sidaa keento.

### Qodobka 78aad

### Xukun raacsan qaynuunka iyo cadaaladda guud

Markuu ku dhawaaqayo xukunka, Garsooruhu waa inuu raacaa sharciyada Dawladda. Haddii uu waayo qodob sharci ah oo u dabbaqo waa inuu raacaa mabaadii'da sharciga Islaamka, haddii kuwaasna uu waayo waa inuu raacaa mabaadi'da caddaaladda ijtimaaciga ama cadaaladda guud.

### Qodobka 79aad

### La soo bixidda sugidda

Garsooraha waa inuu go'aanka sal uga dhigaa caddeynta ay soo Bandhiggaan dhinacyada. Haddiise ay noqoto lagama maarmaan, waa u bannaan tahay inuu raadiyo caddeyn kasta oo waxtar u leh soo saariddda go'aanka.

### Qodobka 80aad

### Qiimeynta sugidda

Haddii uuna sharcigu sheegin si kale Garsooraha waxaa waajib ku ah inuu u qiimeeyo sugidda si taxaddar ku jiro. Waxaa u bannaan inuu sugidda ka soo baxo weydiinta furan ee loo jeediyey dhinacyada, baarista qofka ama alaabta ama wax allaale wixii ah xaqiijin.

### Qodobka 81aad

### Faafinta xukunka

Haddii faafinta xukunka ay waxtar u leedahay kabidda dhibka, Garsooraha waxaa u bannaan in uu amro in xukunka lagu faafiyo wargeysyada ama sidii kale ee wax loo faafiyo.

# BAABKA LIXAAD

## MADAXA KOOWAAD

## TILLAABOOYINKA DACWADDA

## QAYBTA KOOWAAD

## QAABKA TALLAABOOYINKA

### Qodobka 82aad

### Ku xiritaan la'aanta qaabka

Haddii sharciga si kale uusan sheegin, tillaabooyinka dacwadda waxaa loo sameyn karaa qaabka ku habboon ee lagu gaari karo danta laga leeyahay.

### Qodobka 83aad

### Isticmaalka afka Soomaaliga

Afka lagu isticmaalayo tillaabooyinka dacwadda oo dhan waa af Soomaaliga, Garsooraha waxaa u bannaan inuu magacaabo turjubaan mararka loo baahdo.

### Qodobka 84aad

### Weydiinta loo jeedinayo dhagoolka ama hadallaawaha

Haddii ay waajib tahay in la dhegeysto qof dhagala hadallaawa ah ama labadaba ah waxaa bannaan in weydiinta iyo jawaabaheeda lagu sameeyo qoraal ama uu ka turjubaano qof awood u leh af garashada dadka noocaas ah.

### Qodobka 85aad

### Waxyaabaha laga helo tallaabooyinka dacwadda iyo saxiixa dhinacyada

Waxaa waajib ah in laga helo warqadaha dacwad furidda tilmaanta Maxkamadda ay u jeedaan, dhinacyada, mawduuca dacwadda, asbaabteeda iyo dalabaatka kama dambeysta ah.

Waxaana waajib ah inuu saxiixo dhinaca ama qareenka wakiilka ah.

Qodobka 86aad

Qoraalka Dacwadda

Waxyaabaha loo baahan yahay in laga helo qoraalka dacwadda waa in lagu tilmaamaa dadka ka soo qayb galay, meesha iyo waqtiga lagu sameeyey warqadaha iyo dhammaan tillaabooyinka la qaaday.

Qoraalka dacwadda waa inay wada saxiixaan Kaaliyaha iyo Garsooraha, haddii kale wuxuu noqonayaa wax kama jiraan.

QAYBTA LABAAD

FADHIGA

Qodobka 87aad

Maamulka qaadidda dacwadda

Dacwadda qaadiddeeda waxaa maamulaya Garsooraha Maqaxa ka ah Hay'adda garsooridda kaasoo mas'uul ka ah habsamida fadhiga iyo nidaamkiisa.

Qodobka 88aad

Fdhiga furan

Fadhigu waa inuu furnaadaa haddii kale waa waxba kama jiraan, hase yeeshee waxaa Garsooraha u bannaan inuu amro in fadhigu ahaado qarsoodi, haddii ay jiraan asbaabo xagga nabadgelyada, nidaamka guud ama anshax-wanaagga.

Qodobka 89aad

Waajibaadka qofka ka qayb galaya ama dhegeysanaya fadhiga

Qofka ka qayb galaya fadhiga waa inuu dhawraa aadaabta wanaagsan, mana haysan karo hub ama ul.

Qodobka 90aad

Diyaarinta qoraalka dacwadda

Fadhi kasta waa in loo sameeyaa qoraal dacwadeed.

QAYBTA SADDEXAAD

XUKUNKA

Qodobka 91aad

Qaabka tillaabooyinka guud ahaan.

Haddii sharcigu si kale uusan amrin, tillaabooyinka garsooraha waxay lahaan karaan qaab alla qaabkii ku habboon ee lagu gaari karo danta laga leeyahay.

### Qodobka 92aad

### Ku dhawaaqiddda xukunka iyo waxyaabaha laga helayo

Xukunnada waxay ku soo baxayaan magaca dadweynaha Soomaaliyeed, waana in laga helaa:

1. Magaca Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.
2. Tilmaanta Maxkamadda.
3. Tilmaanta dhinacyada iyo qareennadooda.
4. Dalabaatka gabagabeynta ee dhinacyada.
5. Qaadidda dacwadda oo gaaban iyo sababaha xukunka.
6. Go'aanka, taariikhda iyo saxiixa garsooraha.

Haddii mid ka mid ah Garsoorayaasha ka qayb galay Maxkamadda ay u suurtoobi weydo inuu saxiixo xukunka, geeri darteed, ama sabab kale oo ka hor joogsatay awgeed, waxaa lagu kaaftoomaayaa saxiixa xubnaha kale, ayadoo la xusaayo sababta ka hor joogsatay saxiixa kii maqan.

### Qodobka 93aad

### Faafinta xukunka iyo gaarsiintiisa

Xukunka waxaa lagu faafinaayaa ayadoo la dhigo Xafiiska Kaaliyaha. Kaaliyaha wuxuu caddeynaayaa kenidda xukunka, wuxuuna gaarsiinaayaa dhinacyada ka qayb galay dacwadda.

## QAYBTA AFRAAD

## GAARSIIN

### Qodobka 94aad

### Ogeysiis (Comunicazione)

Waxaa sameynaaya Kaaliyaha, isagoo siinaya warqad qofka gaarsiinta ay u socoto, kaasoo laga reebayo nuqul laga saxiixay ama waxaa lagu dirayaa Boostada rakomandaatada ah ama waxaa loogu dhiibayaa gaarsiiyaha Maxkamadda.

### Qodibka 95aad

### Gaarsiinta (Notifiche)

Waxaa sameynaaya gaarsiiyaha isagoo u dhiibaya qofka ay u socoto gaarsiintu nuqul la mid ah ka asalka ah ee dokumentiga la gaarsiinayo.

## Qodobka 96aad

### Gaarsiinta gacan ka saaridda ah

Gaarsiiyuhu isagoo fulinaya Gaarsiinta waa inuu nuqulka lagu xusay Qodobka hore, gacanta ka saaraa qofka ay u socoto Gaarsiintu meel kasta ha joogee. Hadduu diido qofka ay u socoto gaarsiintu in uu qaato nuqulka, gaarsiiyuhu wuxuu taas ku caddaynayaa warqadda gaarsiinta, waxaana loo qaadanayaa in gaarsiintii la fuliyey.

## Qodobka 97aad

### Ku gaarsiinta meesha degganaashaha, guriga ama negaanshaha

Haddii la waayo qofka gaarsiintu u socoto, waxaa bannaan in loo dhiibo nuqulka warqadaha gaarsiinta qof ka mid ah Qoyskiisa ama qof kula nool guriga ama Xafiiska kala shaqeeya. Waxaana shardi ah in qofka loo dhiibaayo sannadkiisu ka yaraan 15, uusanna ahayn qof garaad la'aantiisu caddahay.

## Qodobka 98aad

### Ku gaarsiinta jidka Boostada

Haddii ay suurtoobi waydo fulinta gaarsiintu sida lagu tilmaamay Qodobbada hore, gaarsiiyuhu wuxuu ku dhejinayaa nuqulka gaarsiinta Looxa ogeysiiska ee Maxkamadda horteeda ee Dacwaddu ka socoto, wuxuuna sidaas ku ogeysiinayaa qofka gaarsiintu ay u socoto Boostada Rekomandaatada ah iyadoo ay la socoto hubsasho helitaan.

## Qodobka 99aad

### Ku gaarsiinta meesha negaanshaha la doortay

Haddii qofku doorto meel negaasha u ah sida waafaqsan Xeerka Madaniga waa bannaan tahay in lagu gaarsiiyo halkaas Negaanshaha u ah.

## Qodobka 100aad

### Gaarsiinta qofka aan degganayn guri iyo negaanshana aan ku lahayn Jamhuuriyadda

Haddii qofka gaarsiintu u socoto uusan degganayn ama ku negayn Dalka Soomaaliya, uusanna ku lahayn Wakiil, waxaa lagu gaarsiinayaa in lagu dhejiyo Nuqul ka mid ah warqadaha gaarsiinta looxa ogeysiiska Maxkamadda horteeda dacwaddu ka socoto nuqul kalana waxaa loogu dirayaa Boostada Rekomandaatada ah.

Waxaa loo dhiibayaa Nuqul saddexaad Xeer ilaaliyaha Guud, kaasoo ay waajib ku tahay in uu u diro qofka Gaarsiintu u socoto isagoo marsiinaya Jidka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Jidka Diblomaasiyada.

Qodobka 101aad

Gaarsiinta qofka degmadiisa iyo gurigiisa aan la aqoon

Haddii aan la aqoon qofka gaarsiintu u socoto meeshii degmadiisa ama gurigiisa ugu dambaysey gaarsiintu waxay ku sugnaanaysaa iyadoo lagu dhejiyo Maxkamadda horteeda ay dacwadau ka socoto, Nuqul ka mid ah Dokumentiga Gaarsiinta. nuqul kalena waxaa loo dhiibayaa Xeer Ilaaliyaha Guud, Xaaladaha lagu xusay qodobkaan iyo qodobka horeba gaarsiintu waxaa loo qaadanayaa inay ku dhammaaneyso maalinta 30aad, laga billaabo markii la dhammeeyey «Formaalitada» Shuruudaha la doonaayo.

Haddii gaarsiinta lagu sameeyo sida waafaqsan qodobkan iyo kii ka horreeyey, waxaa loo qaadanayaa in gaarsiinta la fuliyey maalinta 30aad laga billaabo markii la dhammeeyey tillaabooyinka loo baahan yahay.

Qodobka 102aad

Gaarsiinta u socota Maamulka Dawladda

Gaarsiinta u jeedda maamulka dawladda, waxaa la geynayaa Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, haddii ayna jirin qodobbo gaar ah.

Qodobka 103aad

Gaarsiinta qofka shakhsiyad qaanuuneed leh (persone Guridiche)

Gaarsiinta qofka shakhsiyad qaanuun leh waxaa la geynayaa Xafiiskiisa iyadoo loo dhiibayo qofka Wakiilka u ah ama qof kasta oo Xafiiskaas ka shaqeeya.

Qodobka 104aad

Gaarsiinta Askarta ka tirsan Ciidammada Qalabka Sida

Haddii Gaarsiintu ay u socoto askari shaqa haya, ayna suurtoobaynin in isaga gacanta laga saaro, gaarsiinta waxaa loo dirayaa Xeer Ilaaliyaha Guud, kaasoo ay waajib ku tahay inuu u diro Taliyaha Ururka uu ka mid yahay Askarigaasi.

Qodobka 105aad

Waqtiga fulinta gaarsiinta

Gaarsiinta gacan ka saarka ah, waxaa loo samayn karaa oo keli ah, Saacadaha u dhexeeya 7 Subaxnimo iyo 7 Fiidnimo.

Qodobka 106aad

Caddaynta Gaarsiinta

Gaarsiiyaha Maxkamaddu wuxuu dhammaadka dokumentiga asal-ka ah iyo nuqulka gaarsiinta ku caddeynayaa inuu fuliyey gaarsiinta isagoo dhigaya qoraal taariikh leh, hoostana ka saxiixan.

Qoraalka waa in loogu tilmaamaa si cad qofka loo dhiibay gaar-siinta iyo magaca qofka wax la gaarsiinayo.

Qodobka 107aad

Gaarsiinta Jidka Boostada

Marka Gaarsiinta lagu sameeyo jidka Boostada Rekomandaatada ah, qoraalka waa in lagu dhigaa asalka dokumentiga iyo nuqulkaba, iyadoo la raacinayo baraarujinta ku saabsan helitaanka Dokumentiga asalka ah.

Qodobka 108aad

Ku gaarsiinta ogeysiisyada guud ama jidadka kale

Haddii ay jiraan dhibaatooyin hor istaagaya Gaarsiinta sababtoo ah inay badan yihiin dadka gaarsiintu u socoto, ama ay u baahan ta-hay degdeg aad ah ama asbaab kale oo la garwaaqsan karo, waxaa u bannaan Garsooraha inuu amro in lagu sameeyo Gaarsiinta Jidad ka duwan kuwa lagu caddeeyey qodobbada hore.

MADAXA LABAAD

MUDDOYINKA

Qodobka 109aad

Mummooyinka Sharciga ah iyo Maxkamadaha

Sharciga ama Garsooraha ayaa goynaya mudooyinka lagu qaada-nayo tallaabooyinka haddii uusan jirin qodob gaar ahaaneed oo ka mid ah Xeerka.

Waxaa loo qaadanayaa inay muddooyinku caadi yihiin haddii uusan Xeerku ku caddayn inay khasab yihiin.

Waa bannaan tahay in la dheereeyo muddooyinka caadiga ah, hase yeeshee ma bannaana in la dheereeyo kuwa khasabka ah, xataa haddii ay isku raacaan dhinacyada.

Qodobka 110aad

Xisaabidda Muddooyinka

Haddii muddadu ku xisaaban tahay maalmo iyo saacado la tirin maayo maalinta ama saacadda muddadu ka billaabanto.

Muddooyinka ku xaddidan bilaha ama sanooyinka waxaa lagu xisaabayaa kalandaariyaha caadiga ah.

Maalmaha ciidda ahi waxay ka tirsan yihiin muddada.

Maalinta muddada ugu dambaysa haddii ay noqoto fasax waxaa loo dheeraynayaa maalinta shaqada ee ka dambaysa fasaxa.

MADAXA SADDEXAAD

BURRINTA TALLAABOOYINKA

Qodobka 111aad

Ku dhawaaqidda burrinta

Laguma dhawaaqi karo dhowrid la'aanta qaabka daraadeed, haddii uusan xeerka si cad u sheegin wax taas ka duwan.

Hase yeeshee, waa bannaan tahay ku dhawaaqidda burrinta haddii la waayo shardi ka mid shuruudaha qaabka oo lagama maarmaan u ah gaaridda danta laga leeyahay tillaabada.

Haddiise la gaaro danta laga leeyahay tallaabada marna ma bannaana in lagu dhawaaqo burrinta tillaabada.

Qodobka 112aad

Ku doodidda duridda iyo saxiddeeda

Ma bannaana ku dhawaaqidda burrinta uusan dhinac ku doodin, haddii uuna sharcigu u oggolayn Maxkamadda inay ku dhawaaqdo burrinta.

Waxaa ku doodi kara burritaanka qofka dantu ugu jirto oo keliya.

Burritaanka kuma uu doodi karo qofka sababay ama ka tanaasulay.

Qodobka 113aad

Burritaanka ku saabsan dhismaha Maxkamadda iyo ka qaybgalka Xeer Ilaaliyaha

Ma bannaana saxidda burritaanka ku saabsan dhismaha Maxkamadda iyo ka qaybgalka Xafiiska Xeer—Ilaaliyaha; waxaana Maxkamadda waajib ku ah inay ayadu soo jeediso.

Qodobka 114aad

Ballaarinta burritaanka

Haddii la caddeeyo burritaanka tillaabo, waxaa ka dhalanaya inay buraan tillaabooyinka ka dib la qaadanayo ee la xiriira tillaabada la burriyey.

Qodobka 115aad

Burrinta Gaarsiinta

Gaarsiinta wax kama jiraan haddii ay jirto garasho la'aan dhan oo ku saabsan qofka gaarsiinta u socoto, ama taariikhda.

Qodobka 116aad

Cusboonaynsiinta warqadda la burriyey

Garsooraha ku dhawaaqa burrinta waa inuu amraa haddii ay suurtowdo cusboonaynta warqadaha la burriyey.

Isla go'aankaas garsooruhu wuxuu kor saarayaa qofka mas'uulka ka ah burritaanka kharajka cusboonaynta warqadaha.

BUUGGA LABAAD

OOGIDDA DACWADDA

BAABKA KOOWAAD

QAADISTA DACWADAHA DARAJADA KOOWAAD

MADAXA KOOWAAD

OOGIDDA DACWADDA

QAYBTA KOOWAAD

ARJIGA DACWADDA IYO U YEERIDDA

Qodobka 117aad

Sida loo Oogayo Dacwadda

Dacwadda waxaa lagu furayaa Arji u yeeid ah oo la geynayo Maxkamadda darajada koowaad ee awood u leh, taasoo u qabanaysa dhinacyada fadhi ay isugu yimaadaan, amraysana in la gaarsiiyo iyadoo tixgelinaysa meesha ay waajibka tahay in lagu fuliyo gaarsiinta.

Waxaa waajib ku ah dhinacyada in ay yimaadaan fadhiga ugu horreeya taasoo Garsooruhu isku deyayo in uu heshiis ku dhammeeyo Dacwadda.

Haddii dhinacyada midna ka imaan fadhiga hore, amase uusan imaan dacwoodaha, dacweysanuhuna uusan weydiisan in dacwadda hore loo wado, xataa isagoo maqan (Dacwoodaha) dacwadda wey dhacaysaa.

Haddii uu maqnaado dacweysanaha, Garsooraha isagoo qiimeynana joogistiisa, wuxuu amri karayaa in la keeno Maxkamadda.

Qodobka 118aad

Xukunka caddaaladda ku dhisan (secondo equità)

Haddii dacwadda ay ku saabsan tahay xuquuq laga tanasuli karo dhinacyada waxaa u bannaan inay ku heshiiyaan in xukunka Garsooruhu ku dhisnaado Caddaaladda.

### Qodobka 119aad

### Waxyaabaha la doonayo in laga helo arjiga dacwadda

Arjiga dacwadda ee lagu xusay Qoddobka 117 waa in laga helaa waxyaabahaan:

1 — Tilmaanta Maxkamadda horteeda dacwadda la geeyey.

2 — Magaca oo dhan iyo meesha uu deggan yahay Dacwoodaha, magaca oo dhan iyo meesha uu deggan yahay Dacweysanuhu iyo dadka iyaga ku kaalmaynaya Maxkamadda horteeda.

Haddii dacwoodaha ama dacweysanaha uu yahay qof leh shakhsiyad Qaanuuneed (xeereed) dacwadda waa inay koobtaa magaceeda iyo tilmaanta xubinta ama xafiiska ka qaba wakaalo.

3 — Xaddidaad dulucda Dacwadda.

4 — In la sheego falka iyo mabaadi'da Xeerka saldhigga u ah dacwadda oo ay la socdaan gebengebaynta Dacwadda.

5 — Tilmaanta qodobka sugidda ee uu dacwooduhu doonayo inuu ku isticmaalo iyo Dukumentooyinka uu soo bandhigayo.

6 — Magaca Wakiilka iyo tilmaanta Wakaaladda, haddii wakaalasho ay jirto.

7 — Tilmaanta Taariikhda fadhiga ee Garsooruhu uu u qabtay imatinka dhinacyada, marka ugu horeysa iyo wacidda dacweysanaha in uu yimaado fadhiga loo soo tilmaamay. Asalka dacwadda ee ay la socdaan waxyaalaha la soo sheegay waa in uu dacwooduhu gaarsiiyaa dacweysanaha.

### Qodobka 120aad

### ku dhigidda dacwadda diiwaanka Guud, furidda galka xafiiska iyo dhex gelinta xusuusinta dhigidda galka

Markuu helo dacwadda lagu soo sheegay Qodobka aan soo marnay Kaaliyaha Maxkamadda ee hortaada dacwaddu taal, wuxuu Dacwadda ku qorayaa diiwaanka Guud, wuxuuna furayaa galka Xafiiska isagoo ku dhexridaya xusuus qoridda diiwaanka iyo nuqul ka mid ah arjiga dacwadda. Galka xafiiska markaas wixii ka dambeeya waxaa lagu ridayaa warqadaha dhammaantood, hawshaasna waxay saaran tahay Kaaliyaha.

### Qodobka 121aad

### Muddada Imaatinka

Taariikhda gaarsiinta u yeeridda iyo imaatinka, waa inay u dhexeeyaan ugu yaraan muddooyinka soo socda:

15 beri, haddii meesha gaarsiinta ay ku taalo inta Maxkamaddu awoodda u leedahay.

30 Beri, haddii meesha gaarsiinta laga helo meel ka baxsan awoodda Maxkamadda, laakiinse gobolkaas ayna ka baxsanayn.

40 Beri, haddii meesha gaarsiinta ay ka baxsan tahay Gobolka.

80 beri, haddii meesha gaarsiintu laga helo dhul shisheeye ah oo aan ka baxsanayn Qaaradda Afrika.

160 beri, haddii meesha gaarsiintu ay tahay Qaaradaha kale. Garsooraha dacwadda ay hor taal waxaa u bannaan haddii sidaas uu weydiiyo dacwoodaha, ayna jiraan sababo gaar ah ee keenaya degdeg, inuu ku gaabiyo Dekereeto sababeysan ilaa saddex meelood meel muddooyinka kor lagu soo sheegay.

## Qodobka 122aad

## Burrinta arjiga dacwadda

Arjiga dacwadda waa baaba'a haddii uu ka maqan yahay ama dhammaan aan la hubin shuruudda lagu xusay Qodobka 119 amase la siiyey muddo ka yar tan lagu tilmaamay qodobka 121.

Baabi'intaas waxaa lagu daaweyn karaa imanshaha dacweysanaha, ayadoo la dhowrayo xuquuqdii uu horay u yeeshay.

## Qodobka 123aad

## Immaanshada dhinacyada

Haddii ay wada yimaadaan Maxkamadda, dacwoodaha iyo dacweysanaha, dacweysanaha hadal ama qoraal ahaan buu u jeedinayaa difaaciisa, haddii ay jiraan dacwooyin is hortaag iyo tilmaanta qalabka sugidda ee uu doonayo inuu ku isticmaalo.

Haddii uu doonayo inuu waco qof saddexaad, dacweysanuhu waa inuu ku caddeeyaa fadhiga ugu horeeya ee Maxkamadda.

## Qodobka 124aad

## Gaarsiin iyo ogeysiin dacwadda dhexdeeda

Dhismaha Maxkamadda kaddib, dhammaan gaarsiinta iyo ogeysiinta waxaa loo dirayaa wakiilka, dhinaca ama haddii uusan jirin wakiil, waxaa loo dirayaa meesha ay dhinacyadu tilmaanteen.

Qodobka 125aad

Daahidda imaansha dhinacyada

Ayadoo ayna ku jirin inta lagu sheegay Qodobka 123, Garsooruhu waa siin karaa dhinacyada muddo cusub oo ay isku dhisaan, haddii mid ka mid ah dhinacyada uusan isku dhisin muddada cusub, waxaa la caddeynayaa inuu maqan yahay, dacwaddiina asagoo maqan ayaa la wadayaa.

Qodobka 126

Lama beddeli karo garsooraha la magacaabay

Garsooraha loo magacaabay inuu dacwadda galo lama beddeli karo ilaa go'aanka, haddiise wax ka reebaya uu jiro mooyee, ama sabab shaqo culus, ama ay jiraan sababo durid, ka joogsasho ama dacweyn.

MADAXA LABAAD

DIYAARINTA DACWADDA

( QAYBTA KOOWAAD

AWOODAHA GARSOORAHA

Qodobka 127aad

Wadidda dacwadda

Garsooraha wuxuu u leeyahay awood buuxda wadidda dacwadda si ay ugu dhammaato si degdeg ah iyo hufnaan.

Isagaana qabanaya fadhiyada iyo muddooyinka ay dhinacyada waajib ku tahay in ay ku dhammeeyaan warqadaha dacwadda.

Qodobka 128aad

Qaabka Go'aanadda Garsooraha

Go'aanada Garsooraha heerka diyaarinta Dacwadaha waa inay lahaadaan qaabka amarka (ordinanza), haddii lagu dhawaaqo go'aannada fadhiga dhexdiisa waxaa loo qaadanayaa in ay ogyihiin dhinacyada jooga

Haddii dhinacyada qaarkood ayna joogin, ama looga dhawaaqo meel ka baxsan fadhiga, Kaaliyaha Maxkamadda waa inuu siiyaa dhinacyada ogeysiis saddex beri gudohood.

### Qodobka 129aad

Waxyaabaha ka dhalanaya go'aannada iyo ka noqoshada.

Maxkamadda markii ay xukun ka soo saarayso Dacwadda kuma xirxirmayso Go'aanadii soo baxay markii la diyaarinayey, waxaana u bannaan Garsoorihii soo saaray amaradaas in uu wax ka badalo ama ka noqdo.

Ma bannaana in la beddelo amarada Sharcigu si cad u sheegay in aan la duri karin ama Maxkamaddu ku soo saartay heshiiska dhinacyada kuna saabsan xuquuq ay ku tasarufi karaan, haddii ayna markaas kadib ku heshiin badelidda ama ka noqoshada.

### Qodobka 130aad

Amar ku saabsan ciqaab lacageed

Ciqaab lacageedka sharcigani sheegayo, wuxuu ku soo baxayaa si amar ama Go'aan ah. Dhinacyada waxay uga dacwoon karaan amarkaas Garsooraha soo saaray laftiisa saddex beri gudahood.

Garsooraha dacwaddaas wuxuu ka gaarayaa cabashada go'aan aan la duri karin. Amarada lagu xusay qodobkan waxay leeyihiin xoogga fulinta.

## QAYBTA LABAAD

## QAADISTA DACWADDA

### Qodobka 131aad

Qaabka dacwo qaadista

Qaadista dacwadda waxay noqon kartaa af ahaan garsooraha hortiisa, Garsoorahana waxaa u bannaan inuu idmo kala isdhaafsashada qoraallada asagoo dib u dhigaya qaadista dacwadda.

Qaadista dacwadda waa in laga sameeyaa qoraal «verbale) oo la gelinayo weydiinta dhinacyada ee gebengabenta ah iyo go'aannada Garsooraha.

### Qodobka 132aad

Xaqiijinta ansaxidda oogidda dacwadda

Garsooruhu wuxuu iskiisa u xaqiiqsanayaa, hagaagsanaanta dhismaha dacwadda, haddii loo baahdana wuxuu ka codsanayaa dhinacyada inay hagaajiyaan dhamaystiraanna, Dukumentooyinka ay sugidda u qaddimeen.

Haddii ay u muuqato ceeb ku saabsan wakaaladda ama kaalmada wuxuu siin karaa waqti si uu isku oogo qofka leh wakaaladda ama kaalmada, taasoo ayna ku jirin mararka ay Dacwadu dhacday.

Qodobka 133aad

Fadhiga koowaad ee qaadista dacwadda

Fadhiga koowaad ee dacwadda dhinacyada waxaa ugu bannaan inay beddelaan arjiyadooda iyo xujo celintooda (le ecezione) iyo gebegebeyntooda.

Garsooraha wuxuu weydiinayaa dhinacyada meelaha caddaynta u baahan, wuxuuna u tilmaamayaa arrimaha uu arkayo in ay u baahan yihiin falaqayn.

Iyadoo ayna ku jirin waxa lagu gooyey qaybta Koowaad ee qodobkaan way bannaan tahay beddelaadda arjiyada, xujo celinta iyo weydiisyada gabagabeynta ah xataa dacwadda dhexdeeda haddii aan horey xukun loo dirin.

Qodobka 134aad

Diyaarinta TiLaabooyinka baarista ee Garsooraha

Garsoorahu fadhiga dhexdiisa ayuu soo saarayaa Go'aannada Diyaarinta ee loo baahan yahay, wuxuuna awood u leeyahay in uu taxafudo si uu ugu dhawaaqo fadhiga dibadiisa shan beri ee fadhiga ku xigta dhexdooda.

Qodobka 135aad

Xukun u diridda dacwadda

Garsooraha haddii ay la noqoto in Dacwaddu ay u bislaatay Go'aan una baahnayn inla keeno qalab sugid ee kale dhinacyada wuxuu ka codsanayaa inay soo qadimaan (formulare) gebengebeyntii ugu dambeeysay, Dacwaddana wuxuu u dirayaa Xukun.

Haddiise ay la tahay in loo baahan yahay in la keeno qalab sugid, sidaas buu go'aan ku gaarayaa asagoo u qabanayo waqti lagu keeno sugiddaas.

QAYBTA SADDEXAAD

DIYAARINTA KU SAABSAN SUGIDDA

Qodobka 136aad

Magacaabidda khabiirka

Garsooraha mararka ay la noqoto lagama maarmaan inuu ka faa'iidaysto aqoon khabiir, wuxuu magacaabayaa hal ama ka badan oo Khabiir ah, wuxuuna u qabanayaa fadhiga ay waajibka tahay inay ka soo qaybgalaan.

Qodobka 137aad

Dhaarinta Khabiirka

Fadhiga loo qabtay ayuu Garsooraha kaddib markuu u digo, una sheego hawsha loogu yeeray inuu guto, una sheego su'aalaha la doonayo inuu ka jawaabo ku dhaarinayaa khariirka inuu u guto si aaminnima ah hawsha loo xil saaray.

Qodobka 138aad

Hawsha laga doonayo Khabiirka

Khabiirku wuxuu ka qaybgelayaa fadhiga Garsooruhu u waco, wuxuuna samaynayaa dhammaan baarista loo baahan yahay, wuxuu ururinayaa war bixinta dhinacyada, ama dad saddexaad, ugu dambeystii wuxuu keenayaa war bixin dhigan, asagoo caddaynaya ra'yigiisa, kana jawaabaya su'aalaha.

Hawshaas khabiirka waxaa joogi kara dhinacyada iyo Qareennadooda iyo khubaradooda.

Qodobka 139aad

Qoraalka Garmaqalka (Processi Verbali).

Dhammaan hawsha Khabiirku qabanayo waa in lagu qoraa qoraalka Garmaqalka (Processo Verbale).

Qodobka 140aad

Cusboonaynta baarista beddelaadda khabiirka

Haddii ay la habboonaato Garsooraha waxaa u bannaan goorkasta inuu amro cusbooneynta hawsha uu qabtay khabiirku iyo haddii loo baahdo inuu beddelo Khabiirka laftiisa.

Qodobka 141aad

Ka qaybgalka fadhiga (Udienza) iyo khabiirka dhinacyada

Dhinacyadu waxay u madax bannaan yihiin inay magacawdaan Khabiir u gaar ah ee jooga hawsha Khabiirka Maxkamadda, laakiin awood uma laha inay dhex galaan, ama ay la sheekaystaan khabiirka Maxkamadda. Ayadoo ay la socodaan ra'yigooda gabagabeyntiisa, dhinacyada waxay keensan karaan qoraallada iyo warbixinta khabiiradooda.

## Qodobka 142aad

### Waqtiga, meesha iyo habka aqbalka sugidda

Haddii Maxkamadda la keeno qalab sugid ah, Garsooruhu wuxuu qabanaaya fadhi (Udienza), meesha iyo habka lagu aqbalayo.

Haddii aqbalidda (Assunzione) ay ku dhammaan weydo fadhiga loo qabtay waxaa la wadi karaa maalin kale oo dhow.

## Qodobka 143aad

### Aqbalid ka baxsan Awoodda Maxkamadda ee xagga Dalka

Haddii qalabka sugidda ee la doonayo in la aqbalo uu ka baxsan yahay awoodda Maxkamadda xagga Dalka Garsooraha wuxuu u wakiilan karaa aqbalidda Garsooraha meesha jooga, ama wuxuu amri karaa in xafiiskiisu tago meesha aqbalidda. Amarka wakaalashada gudihiisa wuxuu ku qabanaayaa waqtiga dhexdiisa lagu aqbalayo sugidda iyo fadhiga ay dhinacyadu Garsooraha hortiisa ku imaanayaan si loo wado Dacwadda.

## Qodobka 144aad

### Garsooraha loo wakiishay Aqbalka sugidda

Garsooraha la wakiishay, ama asagoo ka haysta arji dhinacyada ay Dacwaddu khusayso, ama Xafiis ahaanba, wuxuu hore u wadayaa aqbalidda qalabka suggidda, wuxuuna u dirayaa Qoraalka Garmaqalka Garsooraha wakiishay waqtiga loo qabtay gudihiisa, ama mar kastaba ka hor fadhiga loo qabtay dacwadda in lagu wado.

Waqtiga kor lagu sheegay waa uu dheereyn karaa gorsooraha wax wakiishay, sidaas haddii ay weydiistaan dhinacyadu.

## Qodobka 145aad

### wakaalashada dibedda ee Maxkamad Soomaaliyeed

Wakaalashada Maxkamadda Soomaaliyeed ee ay u direyso talis shesheeye, si loo fuliyo tillaabooyinka baarista ah, waxaa la marinayaa jidka Dibloomaasiga ah.

Haddii wakaalashadu ku saabsan tahay qof deggan dibedda, Qunsullada ee awoodda leh ayuu Garsooruhu wakiilanayaa.

## Qodobka 146aad

### Tillaabooyinka Garsooraha la wakiishay

Garsooraha wada dacwadda ku saabsan sugidda, xataa haddii loo wakiishay, wuxuu soo saarayaa amar ku saabsan dhammaan arrimaha ka dhexdhasha Dacwadda.

Qodobka 147aad

Joogidaa dhinacyaca meesha aqbalidda sugidda

Dhinacyada waa u bannaan tahay inay naf ahaantooda u yimaadaan meesha lagu aqbalaayo qalabka sugidda.

Qodobka 148aad

Qoraalka ku saabsan aqbalidda sugidda

Aqbalidda qalabka sugidda waxaa laga dhigaaya qoraal. Caddeynta dhinacyada iyo maragta waxaa lagu sameynayaa sida qofka hadlaaya, kaddib markii la sugo tilmaamaha qofka caddeynta bixiyey, loona akhriyo ayaa laga saxiixayaa.

Qodobka 149aad

Dhicidda xaqa aqbalidda sugidda

Haddii dhinacyada aynan imaan maalinta loo qabtay si loo billaabo ama loo wado aqbalidda sugidda, Garsooraha wuxuu cddeynayaa inuu dhacay xaqa aqbalidda sugidda.

Sidaas oo kale ayuu go'aan ku gaarayaa, haddii uu soo weydiisto dhinaca yimid, uuna maqnaado dhinicii soo weydiistay aqbalidda sugidda.

Dhinaca maslaxadda ku leh, waa u bannaan tahay, in uu fadhiga ku xiga ku weydiisto ka noqoshada amarka lagu caddeeyey dhicidda sugidda, Garsoorahana wuu ka noqon karaa, haddii uu garto in maqnaashada ay keentay sababo cul-culus.

Qodobka 150aad

Xiridda aqbalidda sugidda

Markii ay dhammaato aqbalidda, ama la caddeeyo dhiciddeeda sida uu qabo qoddobka ina soo dhaafay, ama marka garsooraha uu qabo inayna faa'iido ku jirin sii wadidda aqbalidda sugidda, wuxuu amrayaa xiridda aqbalidda sugidda.

Qodobka 151aad

*Amarka wax keenidda ee u jeedda dhinacyada ama qof saddexaad*

Garsooraha wuxuu amar ku bixin karaa baarid ama keenid shey ay haystaan dhinacyada ama qof saddexaad; sidoo kale wuxuu amri karaa in la hor keeno Dokumentooyinka loo dhiibey qof saddexaad markii ay u noqoto lagama maarmaan wadidda Dacwadda.

Haddii uu amro wax keenidda, Garsooruhu wuxuu qabanayaa waqtiga, meesha iyo habka keenidda.

Qodobka 152aad

Dhawridda Xuquuqda Qofka saddexaad

Qofka saddexaad ee amarka lagu siiyay inuu wax keeno, waa u bannaan tahay inuu is hor taago, asagoo ka qayb galayo Dacwadda, ka hor waqtiga loo qabtay keenidda

Qodobka 153aad

Xogwareysiga Maamulka Guud

Markii ay la noqoto lagama maarmaan, Garsooraha waa u bannaan tahay inuu weydiiyo Maamulka Guud war qoraal ah ee ku saabsan waraaqaha (atti) iyo Dokumentooyinka ku saabsan Maamulka laftiisa.

Qodobka 154aad

Diididda qoraalka gaarka ah.

Qofkii lidkiisa loogu isticmaalaayo qoraal isaga loo nisbeynayo haddii uu doonayo inuusan aqoonsanin, waxaa waajib ku ah inuu si cad u diido qoraalkiisa ama saxiixiisa.

Qodobka 155aad

Aqoonsiga aan caddeyn (tacito) ee qoraalka gaarka ah

Qoraalka la hor keenay Maxakamadda waxaa loo qaadanayaa mid la aqoonsaday haddii dhinaca loo nisbeynayo uu maqan yahay (contumace) ama uu yimid hase yeeshee uusan u diidin si cad fadhiga koowaad ee keenidda.

Qodobka 156aad

Weydiin xaqiijin

Dhinac doonayo inuu ka faa'iideysto qoraal aan la aqoonsan, wuxuu weydiisan karaa xaqiijin, asagoo soo jeedinaya qalab sugidda ama tilmaamaya qoraallada lagu isticmaali karo isku dayidda (comparazione).

Garsooraha wuxuu amrayaa in la xafdiyo Dokumantiga iyo in la keeno (acquisizione) qoraallo kale ee jiri kara xagga isku eegidda, wuxuu amri karaa dhinaca diiday qoraalka, inuu qoro yeeris xataa iyada oo uu joogo khabiirka teknikada ah.

Haddii dhinacu diido ama uusan imaanin, qoraalku waxaa loo qaadanayaa mid uu aqoonsaday

Qodobka 157aad

Habka loo oogayo Dacwadda beeninta ah

Xaalad kasta iyo daraja kasta ee Dacwaddu marayso waa la soo jeedin karaa dacwad beenin ah ee la xiriirta Dokumento lagu isticmaalay Maxkamadda horteed.

Qodobka 158aad

Waxyaabaha la doonayo in laga helo Dacwadda beeninta ah

Dacwadda beeninta waa in laga helaa, si ayna u noqon Dacwaddu baaba', tilmaanta xubnaha iyo qalabka sugidda beenta, waana inuu soo jeediyaa qof ahaan dhinaca laftiisu ama wakiilkiisa qaba Wakaalasho gaar ah ee oogi kara Dacwaddaas.

Qodobka 159aad

Weydiinta u jeedda dhinaca keensaday qoraalka

Garsooraha laga hor oogay Dacwadda beeninta ah wuxuu weydiinayaa dhinaca ay lidka ku tahay, haddii uu ku adkaysto inuu doonaayo inuu ku isticmaalo Dokumentiga Garsooruhu wuxuu amrayaa qalabka baarista si loo xaqiijiyo.

Xaaladdaas waa waajib inuu ka qayb galo Dacwadda Xeer Ilaaliyaha Guud.

Haddii dhinaca la weydiiyey uu ka tanasulo inuu ku isticmaalo Dokumentiga, ma bannaana marnaba in loogu isticmaalo Dokumentigaas Dacwad.

Qodobka 160aad

Qabashada Dokumentiga.

Inta aan la billaabin xaqiijinta Dacwadda beeninta ah, Garsooraha wuxuu amrayaa in la qabto Dokumentiga iyo wax allaale wixii tallaabooyin ah ee lagama maarmaanka ah si loo sugo helitaanka Dokumentiga Dacwadda dhexdeeda.

Qodobka 161aad

Joojinta dacwadda laga dhex furay dacwadda beeninta ah.

Dacwadda laga dhex furay Dacwadda beeninta ah waa joogsanaysaa ilaa uu ka soo baxo xukun dhammaad ah ee ku saabsan dacwadda beeninta ah. Hase yeeshee Garsooraha haddii ay la habboonaato ama haddii labada dhinac ay weydiistaan, waa uu dhammayn karaa Dacwaddii hore (merito) iyo tan beeninta ah isku mar.

### Qodobka 162aad

### Soo jeedinta Dacwadda beeninta ah Maxkamadda Rafcaanka ama Maxkamadda Sare horteed

Haddii Dacwadda beeninta ah la hor keeno Maxkamadda Racfaanka ama Maxkamadda Sare horteed, lana dhowray shuruudaha lagu sheegay qodobka 158, Dacwadda waa in la joojiyaa, loona celiyaa Garsooraha darajada koowaad si loo xaqiijiyo beeninta.

### Qodobka 163aad

### Qirashada Maxkamadda dhexdeeda

Qirashada maxkamadeedka waxay noqon kartaa mid ikhtiyaar ah ama mid ku timid su'aal.

### Qodobka 164aad

### Qirashada ikhtiyaarka ah

Qirashada ikhtiyaarka ah waxaa laga heli karaa warqad kasta ee ah kuwa dacwadda oo ay saxiixeen dhinacyada shakhsi ahaan, ama lagu bixiyey waraysi aan rasmi ahayn kaasoo Garsooraha uu amray heer kasta iyo daraja kasta ee Dacwadda marayso.

### Qodobka 165aad

### Waraysiga rasmiga ah.

Weydiinta rasmiga ah waa in ay xaddidan tahay qodob-qodobna ahaataa. Lama weydiin karo su'aal ka baxsan qodobbada la oggolaaday, dhinacyadoo sidaas ku heeshiiya mooyee.

### Qodobka 166aad

### Jawaab

Dhinaca wax la weydiinayo waa in uu qof ahaan u jawaabaa, asagoon aan isticmaalayn qoraallo hore loo diyaariyey, laakin Garsooraha waa uu u rukhsayn karaa inuu kaalmaysto xusuusin ama qoraallo markii arrintu sidaas keenayso.

### Qodobka 167aad

### Diidmada Jawaabta

Haddii dhinacu maqnaado ama uu diido jawaabta, sabab la'aan, waxaa loo qaadan karaa in waxyaabaha la weydiiyey uu oggolaaday.

### Qodobka 168aad

### Ujeedinta dhaarta Dacwad dhammaynta ah

Dhinac kasta wuxuu u jeedin karaa dhinaca kale dhaar si dacwadda loo gooyo.

Dhaarta waxaa lagu soo jeedin karaa qoraal uu saxiixay dhinaca, kana kooban qodobo soocan oo si cad u xaddidan.

### *Qodobka 169aad*

### Celinta Dhaarta

ka hor intii uusan caddaynin diyaar inuu u yahay dhaaarta dhinaca dhaarta loo jeediyey wuxuu u celin karaa dhinaca kale iyadoo aan laga bixin xudduudeeda.

### Qodobka 170aad

### Ka noqosho la'aanta dhaarta

Qofkii jeediyey ama celiyey dhaarta kama noqon karo marka dhinaca ka soo horjeeda uu caddeeyo inuu diyaar u yahay dhaarta.

### Qodobka 171aad

### Qaabka Dhaarta.

Xaaladaha lagu xusay qodobbada aan kor ku soo marnay, qaabka dhaarta marna lama beddeli karo.

### Qodobka 172aad

### Gudashada Dhaarta

Dhinacu dhaarta wuxuu u gudanayaa shakhsi ahaan, Garsooraha hortiisa si qaab rasmi ah leh, waafaqsan diinta uu aaminsan yahay dhinaca dhaaranaya.

### Qodobka 173aad

### Gudasha la'aanta dhaarta

Dhinaca dhaarta loo jeediyey ama loo celiyey diido dhaarta sababmacquul ahna ayna jirin, wuu waayayaa mowduuca dhaartu saamayneyso.

### Qodobka 174aad

### U jeedinta dhaarta dhammaystirka ah

Garsooraha wuxuu dhinac kasta u jeedin karaa dhaar ku saabsan arrin kasta oo la isku haysto.

Dhaarta uu Garsooraha hal dhinac u jeediyey isla dhinacaasi uma celin karo dhinaca kale.

### Qodobka 175aad

### U noqoshada qodobbada ku saabsan dhaarta goynta ah

Ayadoo la dhowrayo inta lagu sheegay qodobka hore, waxaa lagu dhaqayaa dhaarta uu jeedinayo Garsooruhu qodobbada dhaarta u jeediyo dhinacyada midkood.

### Qodobka 176aad

### Qaabka weydiinta iyo amarka oggolaanshaha sugidda maragta ah

Haddii sugiddu tahay marag waxaa waajib ku ah dhinaca doonaya in uu tilmaamo dadka iyo waxyaabaha dhacay ee mid kasta ee ayaga ka mid ah wax laga weydiinaayo.

Dhinaca ay lidku ku tahay sugidda waa ishortaagi karaa ama wuxuuna tilmaami karaa, markiisa dad wax laga weydiiyo. Garsooruhu waa inuu oggolaadaa ama diidaa sugidda, wuxuuna tilmaamayaa xaaladda hore, liiska maragta loo oggolaaday dhinac kasta.

Isla amarka oggolaanshaha, Garsooraha wuxuu qabanayaa fadhiga iyo qaabka dhegeysashada.

### Qodobka 177aad

### Marag gelid la'aanta

Ma bannaana in loo oggolaado maragfurka dadka ay suurtowdo in ay ka qayb galaan Maxkamadda iyagoo dhowraya danahooda.

### Qodobka 178aad

### Ka rebidda marag furidda

Uma bannaana labada dhinac midkoodna in uu u keensado marag kan ay isqabaan ama xigtadiis ama xidiidkiis ilaa darajada arfaad haddii ayna dacwaddu ku saabsanayn arrimo lagu nidaamiyey xeerarka Qoyska.

## Qodobka 179aad

### Dhegeysiga Maragfuridda dadka da'doodu ka hoosayso 15sano

Way bannaan tahay markii ay noqoto lagama maarmaan in la dhegeysto maragfuridda dadka da'doodu ka hoosayso 15 Sano mase gudanayaan dhaar.

## Qodobka 180aad

### Dhaarista Markhaatiyaasha iyo digniintooda

Garsooraha wuxuu dhegeysanayaa markhaatiyaasha iyagoo la kala dheereeyey, wuxuuna mid kasta u akhrinayaa siiqadda lagu dhaarto inta uusan dhaaran, kaddibna markhaatigu wuu dhaaranayaa isagoo ku soo celinaya siiqadda dhaarta.

Waxaa waajib ah in la tixgeliyo diinta uu haysto qofka markhaatiga ah, haddii uusan lahayn diin waxaa loo sheegayaa in uu ku dhaarto siiqadda sharafta ah.

## Qodobka 181aad

### Tilmaamidda Markhaatiyaasha

Waa in qofka maragga ah marka hore lagu tilmaamaa magaciisa iyo dhammaan wixii astaama ah oo kale ee lagu aqoonsan karo.

Waxaa Garsooraha u Bannaan inuu ku xiqiiqsado runta maragga qalab kasta oo la soo gudboonaada.

## Qodobka 182aad

### Su'aalaadka loo jeedinaayo maragga iyo jawaabihiisa

Garsooraha wuxuu wax ka weydiinayaa maragga inuu ka jawaabo arrimihii loo wacay, hase yeeshee Garsooraha waa u bannaan tahay inuu u jeediyo maragga su'aal kasta oo uu arkaayo inay waxtar leedahay ama isaga laf ahaantiisa ha u jeediyo ama dhinacyada ha weydiisteene.

Uma bannaana dhinacyada iyo Xeer Ilaaliyaha Guud, haddii uu ka soo qayb galo, inay wax warsadaan maragga toos ahaan.

Waa u bannaan tahay inuu iska hor keeno laba marag haddii marag furkoodu wax iskhilaaf ihi ka muuqdo.

### Qodobka 183aad

### Imaatin la'aanta maragga

Waa bannaan tahay in lagu ciqaabo maragga la wacay wicitaan hagaagsan oo aan imaan, ciqaab ganaax u dhaxaysa 20 ilaa 200 Shilin Soomaali ah.

Waa u bannaan tahay isla garsooraha soo saaray ganaaxa in uu ka noqdo haddii uu yimaado maraggu mar dambe uuna keeno asbaab macquul ah oo jideyneysa maqnaanshihiisa.

### Qodobka 184aad

### Diididda maragfurka iyo been ka sheegiddeeda

Haddii uu diido markhaatigu sabab la'aan inuu maragfuro, ama uu ka aamuso, ama been cad uu ka sheego, Garsooraha waxaa u bannaan inuu gaarsiiyo xafiiskaXeer—Ilaaliyaha Guud.

Waxaana u bannaan in uu amro in la xiro maragga mararka ay arrintu intaa ka culus tahay.

### Qodobka 185aad

### Awoodda Garsooraha inta ay socoto baarista

Waa u bannaan tahay Garsooraha inta ay socoto baarista sugidda inuu fatasho meelaha iyo alaabta guurtada ah iyo maguurtadaba iyo dadka intaba.

Waxaa kaleetoo u bannaan inuu kaalmeesto khabiir farsamayaqaan ah, inuu wax weydiiyo markhaatiyaal iyo inuu ku kaco wax alla wixii toosan u ah in baaristaasi ku dhammaato si wacan.

## QAYBTA ARFAAD

## SOO DHEXGALKA DHINACA SADDEXAAD IYO MIDAYNTA DACWADDA

### Qodobka 186aad

### Imaanshaha dhinaca saddexaad ee soo dhexgelaaya

Waxaa waajib ku ah dadka saddexaad ee doonaayaan inay soo dhexgalaan dacwadda, in ay yimaadaan fadhiga, soona dhigaan Xafiiska Kaaliyaha warqad caddaynaysa soo dhexgalka iyo nuqullada dhinacyada, Dokumentayaalka iyo Wakaaladda.

Haddii soo dhexgalku uu yimaado Xafiiska kaaliyaha, kaaliyaha waxaa korkiisa ah inuu gaarsiiyo dhinacyada kale ee hore Dacwadda u oogay.

### Qodobka 187aad

### Soo Dhexgalka ka dambeeya fadhiga koowaad

Waa imaan karaa soo dhexgalka dhinaca saddexaad ilaa inta dacwadda loogu diraayo xukun.

Laakiinse, haddii ay timaado kaddib fadhiga hore, dhinaca saddexaad ma samayn karo waraaqooyin aan loo oggolayn dhinacyada kale.

### Qodobka 188aad

### U yeeridda dhinaca Saddexaad

Dhinaca doonaya inuu soo dhexgeliyo dad saddexaad waxaa waajib ku ah inuu ugu yeero fadhiga koowaad, ayadoo la tixgelinaayo waqtiyada lagu sheegay qodobka 121.

Garsooraha waa u bannaan tahay, haddii la weydiisto inuu siiyo waqti lagu soo geliyo dhinaca saddexaad isagoo u qabanaaya fadhi cusub.

### Qodobka 189aad

### U yeeridda dhinaca saddeexaad ee Garsooraha

Waa u bannaan tahay Garsooraha inuu u waco Dacwadda goor kasta dhinaca saddexaad, asagoo amraaya dhinacyada inay u yeeraan si uu uga qaybgalo fadhiga uu u qabtay Dacwaddaas.

Haddii dhinacyadu midkood uu sameynin yeeridda Garsooraha wuxuu amar ku gaarayaa tirtiridda Dacwadda.

### Qodobka 190aad

### Imaansha dadka saddexaad ee la wacay

Dhinaca saddexaad ee loo wacay Dacwadda, wuxuu ku imaan karaa asagoo yimaada ama keena warqad Dacwad ka qaybgalka ah.

### Qodobka 191aad

### Midaynta qaadidda garmaqalada ku saabsan hal Dacwo ama Dacwadaha isku xiran

Haddii laga oogo Maxkamad keli ah horteed Dacwooyin badan oo isku mid ah, Maxkamadda ayaa amraysa in la mideeyo.

Midaynta waxaa amraaya Guddoomiyaha Maxkamadda haddii dacwadahaas ay ka hor oogan yihiin Garsoorayaal kala duwan ee ka mid ah Maxkamaddaas.

Isla sidaas waxaa lagu dhaqayaa dacwooyinka isku xiran iyo kuwa iska farcama, sida ay sheegayaan Qodobada 19 iyo 20.

## MADAXA SADDEXAAD

## DHAMEYNTA DACWADDA

### Qodobka 192aad

### Doodda dacwadda

Kaddib markii Garsooruhu ka dhegeysto doodda ladaba dhinac fadhiga ugu dambeeya dacwo qaadista wuxuu dacwadda u dirayaa go'aan.

### Qodobka 193aad

### Qaadashada Go'aanka

Go'aanka waxaa lagu qaadanayaa ka tashiga, haddii Garsoorayaal badan ka qayb galaan dacwa qaadista waa inay Go'aanka ka qaybgalaan.

Xeerka ayaa xaddidaya gooraha garsooraha keligiis uu doodda qaadayo, go'aankana uu soo saarayo Guddi garsoor ah ee loo magacaabo.

Haddii go'aanku ka soo fulay Guddi waxaa go'aanka lagu qaadanayaa aqlabiyaadda codka, ugu dambeysta waxaa codka bixinaya Guddoomiyaha Guddiga.

Dulucda go'aanka waa in lagu xusaa xukunka lagu dhawaaqayo, waxaana waajib ah in la qoro asbaabta go'aanka intaan la faafin xukunka.

### Qodobka 194aad

### Go'aan ka gaaridda weydiisyada iyo wax ka qabiddooda

Gorsooruhu waa in uu go'aan kaga gaaraa xukunka uu ku dhamaynayo Dacwadda, dhammaan wixii weydiisyo ah iyo wax ka qabiddooda.

### Qodobka 195aad

### Saaridda xil xaddidan oo ku meel gaar ah.

Haddii la hubo jirista xaqa, hase yeeshee khilaaf ka taagan yahay inta uu le'eg yahay xaqa la mutaystay, waxaa u bannaan Garsooraha haddii dhinacyada midkood weydiisto in uu ku ekaado xukun guud ee gudid ah isagoo amraya in ay dacwaddu socoto si loo xaddido inta uu le'eg yahay xaqu.

Waxaa markaas u bannaan Garsooraha isagoo cuskanaya dadaalkiisa xilkaska ah markii dhinacyada midkood weydiisto in uu ku laasimiyo deynqabaha in uu dhiibo qaddar lacag ah ku meel gaar ahaan.

Qodobka 196aad

Habka go'aannada Garsooraha ee aan dhammaynayn Dacwadda.

Mararka uu Garsooruhu awoodi waayo in uu Dacwad loo diray xukun ka soo saaro go'aan dhammeeya Dacwadda, wuxuu soo saarayaa amar ku habboon in dacwadda la sii socodsiiyo ama la keeno sugid cusub ama shey kasta oo uu arkahayo in uu yahay lagama maarmaan.

Qodobka 197aad

Amarrada ka soo baxa Dacwadda dhexdeeda

Amarrada sidaa ku soo baxa ma hor joogsanayaan dhammaynta Dacwadda, goorkastana waxaa wax ka beddeli kara ama ka noqon kara isla Garsoorihii soo saaray, kaasoo awood u leh dhammaan wax allaale wixii ku saabsan sii qaadista Dacwadda.

## MADAXA AFRAAD

## FULINTA XUKUMADA IYO GAARSIINTOODA

Qodobka 198aad

Fulinta ku meel gaarka ah

Waa bannaan tahay in la fuliyo xukumada laga qaatay racfaanka fulitaan meel ku gaar ah, dhammaan ama dhammaan la'aan haddii sidaas uu weydiisto dhinacyada midkood, dacwadduna ay ku dhisan tahay qoraallo rasmi ah ama la aqoonsan yahay ama xukun horey u dhammaaday (sentenza passata in giudicata) ama dib u dhigidda fulinta ay ka dhalanayso dhibaato culus.

Waa in la amraa fulinta ku meel gaarka ah ee xukumada ku saabsan dhiibista ku meel gaarka ah iyo bixinta masruufka, haddii dhinacyada midkood sidaas soo warsado.

Qodobka 199aad

Amarka ama ka noqoshada fulinta ku meel gaarka ah ee Maxkamadda Rafcaanka

Haddii ay ka aamusto Maxkamadda hoose weydiinta fulinta ku meel gaarka ah ama ay diido, waxaa u bannaan dhinaca dantu ugu jirto in uu ku weydiisto sidaas Maxkamadda Rafcaanka, rafcaan asli ah ama mid ka hortag ah.

Waa u bannaan tahay dhinaca kale in uu sidoo kale weydiisto Maxkamadda Rafcaanka in ay ka noqoto amarka fulinta ku meel gaarka ah ama ay joojiso fulinta ay billowday.

### Qodobka 200aad

### Qaabka Gaarsiinta Xukumada

Xukumada la doonayo in uu u billowdo waqtiga racfaanku waxaa lagu gaarsiinayaa wakiilka Dacwadda ama dhinaca sida lagu soo caddeeyey qodobka 124.

## MADAXA SHANAAD

## SAXIDDA XUKUNNADA IYO AMARADA

### Qodobka 201aad

### Mararka Saxidda

Waa u bannaan tahay had iyo jeer Garsooraha soo saaray Xukunka ama amarka haddii sidaas ay warsadaan dhinacyada midkood ama naftiisaba inuu saxo gafafka maadiga ah ama kuwa ku saabsan xisaabta ee uu ku dhacay markii uu qorayey Xukunnada.

### Qodobka 202aad

### Tillaabada Saxidda

Garsooruhu wuxuu ku gaarayaa amar saxidda lagu sheegay qodobka hore haddii uu jiro heshiis dhinacyada ee ku saabsan saxidda, haddii kale wuxuu soo saarayaa amar kaddib markuu dhegeysto dhinacyada. Waxaana waajib ku ah Garsooraha inuu ku tilmaamo go'aanka uu gaaray geesta xukunka asalka ah ee uu saxay.

## MADAXA LIXAAD

## QAADIDDA DACWADDA DHINACYADEEDU MAQAN YIHIIN

### Qodobka 203aad

### Maqnaanshaha Dacwoodaha

Haddii Dacwooduhu imaan waayo Maxkamadda, waa uu bannaan tahay Garsooraha inuu amro in Dacwadda laga tirtiro buugga Dacwadaha, una caddeeyo in dacwaddii ay dhacday.

Haddiise uu yimaado dacweysanaha uuna weydiisto in in dacwaddii la wado dacwoodaha oo maqan; Gorsooraha wuxuu go'aan ku gaarayaa maqnaanshaha dacwoodaha wuxuuna amrayaa wadidda Dacwadda.

## Qodobka 204aad

### Maqnaashaha dacweysanaha

Haddii uu maqnaado dacweysanaha, Maxkamadduna soo jeediso ceeb ku lug leh gaarsiinta wadidda, Maxkamadda waxay u qabanaysaa dacwadaha waqti go'an ee uu ku cusbooneysiiyo wacidda, cusboonaynta waciddu waxay baajinaysaa dhicidda dacwadda. Haddii uu dacweysanaha iman waayo fadhiga cusub, Garsoorahu marka laga reebo qaybta lagu sheegay qaybta ugu dambaysta ee Qodobka 117, wuxuu caddaynayaa maqnaanshihiisa, wuxuuna amrayaa wadidda dacwadda.

Haddii dacwooduhu fulinwaayo amarka cusboonaynta gaarsiinta wacidda, Garsooruhu wuxuu amrayaa in dacwadda laga tirtiro Buugga Dacwadaha, dacwadduna sidaas ayey ku dhacaysaa.

## Qodobka 205aad

### Gaarsiinta iyo ogeysiinta waraaqaha dhinaca maqan

Go'aannada amraaya baarista, weydiinta cusub, ka hor-tagga ama dacwooyin cusub waxaa la gaarsiinayaa dhinaca maqan naftiisa qof ahaan.

Waraaqooyinka kale oo dhan waxaa loo qaadanayaa in ogeysiintooda ku dhammaato marka la dhigo Xafiiska Kaaliyaha.

Xukunnada waxaa la gaarsiinayaa dhinaca naftiisa.

## Qodobka 206aad

### Wacidda dhinaca maqan

Waa u bannaan tahay dhinaca la caddeeyey maqnaanshihiisa inuu yimaado goor kasta, asagoo dhigaayo jawaab celinta dacwadda xafiiska Kaaliyaha, ama yimaado fadhiga dacwadda, ilaa inta dacwadda aan loo dirin xukun.

Waa u bannaan tahay inuu weydiisto Garsooraha, markuu yimaado kaddib, in la siiyo waqti uu ku diyaariyo difaaca horey uga reebnaa.

Garsooraha markuu miisaamo sababaha keenay maqnaanshaha iyo inay habbon tahay in la oggolaado weydiinta kor lagu soo sheegay, go'aan ayuu ka gaarayaa wuxuuna soo saarayaa amar.

# MADAXA TOODOBAAD

## JOOJINTA DACWADDA KALA GO'IDDA IYO DHICIDDEEDA

## QAYBTA KOOWAAD

## JOOJINTA DACWADDA

### Qodobka 207aad

### Joojinta khasabka ah

Wuxuu amrayaa garsooruhu joojinta qaadista dacwadda madaniga ah marka lagu sheegay qodobka 272 ee ka mid ah xeerka habka ciqaabta iyo markasta oo kale ee go'aanka dacwaddu ku xiran yahay kala—bixina dacwad kale ee madani ama idaari ah.

### Qodobka 208aad

### Joojinta ay weydiistaan dhinacyadu

Waa u bannaan tahay Maxkamadda haddii ay dhinacyadu heshiis ku yihiin ay amarto in la joojiyo qaadista dacwadda muddo aan ka badnayn saddex bilood.

### Qodobka 209aad

### Qabasho fadhi cusub joojinta kaddib

Haddii ayna Maxkamaddu ku qaban amarkeedii joojinta taariikhda ay waajibka tahay in la qaado dacwadda waxaa waajib ku ah dhinacyada inay weydiistaan in taas loo qabto waqti go'an oo muddadiisu tahay afar bilood oo ka billaabanaysa waqtigii ay dhammaato sababtii keentay joojinta.

Weydiisiga waxaa loo keenayaa Garsoorihii billaabay qaadista Dacwadda ama Goddoomiyaha Maxkamadda toban beri ka hor ugu yaraan waqtiga dhammaanshaha muddada la soo sheegay.

### Qodobka 210aad

### Waxyaabaha ka dhalanaya joojinta

Ma bannaana in lagu kaco tillaabo ka mid ah tillaabooyinka qaadista dacwadda mar haddii la joojiyey dacwadda. Wixii muddoyin horey u socdeyna wey joogsanayaan oo waxay dib uga billaabanaysaa taariikhda fadhiga loo qabto in lagu wado Dacwadda.

## QAYBTA LABAAD

## KALA GO'IDDA QAADISTA DACWADDA

### Qodobka 211aad

Dhimashada ama waayidda dhinaca awoodda ka hor intuusan dacwadda ka qaybgelin.

Dacwaddu way kala go'aysaa haddii ay geeri ku timaado dhinacyada midkood ama wakiilkiisa sharciga ah ama uu waayo awodda, ama ay dhacdo wilaayadu, inta uusan Dacwadda ka soo qaybgelin, haddii uusan iskiisa u imaan qofka xaqa u leh dacwadda wadiddeeda ama uusan dhinaca kale u yeerin.

### Qodobka 212aad

Dhismaha ama waayidda awooda dhinaca ka soo qaybgalka Dacwadda kaddib

Dacwadda sidoo kale way kala go'aysaa haddii la helo wax ka-mid ah waxyaabaha lagu soo sheegay qodobka hore inta qaadista dacwadda la diyaarinaayo.

Haddii la helo sabab ka mid ah kuwa kor lagu sheegay, kaddib markii dacwadda loo diray xukun, taasi ma saamaynayso go'aanka

### Qodobka 213aad

Dhimashada Wakiilka ama wax reeba ka qaybgalka

Dacwaddu way kala go'aysaa, haddii uu dhinto Wakiilka Sharciga ah, ama laga tirtiro diiwaanka wakiillada ama laga joojiyo, kala go'idduna way soconaysaa ilaa dhinaca laftiisa ka yimaado ama wakiil magacawdo.

Ka noqoshada Wakaaladda ama ka tanasulkeeda ma keenaayo kala go'idda dacwadda.

### Qodobka 214aad

Dhaqaajinta Dacwadda

Waa bannaan tahay dhaqaajinta dacwadda ku kala go'day sabab ka mid ah sababaha lagu sheegay qodobka hore, haddii uu weydiisto dhinacyada midkood saddex bilood dhexdood oo laga soo billaabayo markii kala go'a la helay.

### Qodobka 215aad

Waxyaabaha ka dhalanaayo kala go'idda

Kala go'idda waxaa lagu dhaqayaa Qodobka 210. Haddii aan Dacwadda lawadin, ama aan la dhaqaajin muddoyinka lagu caddeeyey qodobbada hore lagu sheegay, way dhacaysaa Dacwaddu.

## QAYBTA SADDEXAAD

## DHIGIDDA DACWADDA

### Qodobka 216aad

### Ka tanaasulidda Dacwadda

Dacwaddu waa dhacaysaa haddii dhinacyada oo dhan ay ka tanasulaan tallaabooyinka ku saabsan Dacwadda iyaga oon ku xirin wax ka qabid ama shuruud.

Garsooruhu wuxuu go'aan racfaan la'aan ah ka soo saarayaa qaddiraadda kharajka haddii sidaas dhinacyadu ku heshiiyaan ama iskiiba.

### Qodobka 217aad

### Dhicidda Dacwadda ee foojig la'aanta dhinacyada ka dhalatay

Dacwaddu wax kale oo ay ku dhacaysaa foojig la'aanta dhinacyada haddii midkoodba ka soo qayb geli waayo, ama asagoo ka soo qayb galay laakiinse aan imaan fadhiga hore iyo kan dambeeya ee Garsooruhu qabtay.

Sidoo kale dacwaddu way dhacaysaa haddii la joojiyey, dhinacyaduna ayna dhowrin muddoyinka lagu dhaqaajiyo Dacwadda.

Dhicidda waxaa amar ama xukun ku caddaynaya Garsooraha, waxayna leedahay camalfal qaanuuneed.

### Qodobka 218aad

### Ogeysiiska iyo duridda amarka

Waxaa la gaarsiinayaa dhinacyada go'aanka caddaynaaya dhicidda Dacwadda, waana la oggol—yahay in looga cawdo Garsooraha soo saaray naftiisa kaasoo ay u bannaan tahay inuu ka noqdo go'aanka.

### Qodobka 219aad

### Ka Maqnaanshaha Fadhiga

Haddii dacwadda oo socoto dhinacyada oo dhan ka maqnaadaan fadhiga, Garsooruhu wuxuu u qabanayaa fadhi cusub si ay u yimaadaan, haddiisa ay fadhigaa labaadna ka soo qayb geli waayaan Dacwaddu way dhacaysaa.

Qodobka 220aad

Waxyaalaha ka dhalanaya dhicidda dacwadda

Dhic dda Dacwadda ma riddo xaqa, laakiin la tixgelinmaayo tillaabooyinkii la qaaday, waa u bannaan tahay Garsooraha Dacwadda mar labaad la hor keenayo in uu miisaamo qiimaha qalabka sugidda loo keenay isagoo cuskanaaya dadaalkiisa Foojigan.

Kharajka Dacwadda dhacday waxaa xambaaraya dhinacyada horey u keenay.

BAABKA LABAAD

DURIDDA

MADAXA KOOWAAD

JIDADKA DURIDDA

Qodobka 221aad

Jidadka Duridda

Jidadka xukumada la duro waxay yihiin:

Rafcaan, u cabashada Maxkamadda Sare, weydiisashada ka noqoshada iyo ka hortagga fulinta.

Qodobka 222aad

Xukunka dhammaystay Jidadka duridda

Xukunka dhammaystay jidadka duridda waa kan aynan bannaanayn in lagu duro jid ka duwan kan weydiisashada ka noqoshada.

Qodobka 223aad

Muddada Duridda

Muddada duridda waa 30 beri oo go'an, kana billaabaneysa taariikhda la gaarsiiyey Xukunka. Ayadoo aan la tixgelinaynin gaarsiinta, ma bannaana in lagu duro jidadka duridda xukunka ay ka soo wareegto faafintiisa hal Sano sida waafaqsan Qodobka 93.

Qodobka 224aad

Meesha gaarsiinta duridda

Waxaa waajib ah in dhinaca kale lagu gaarsiiyo duridda meesha degganaanshihiisa uu ku tilmaamay warqadda dacwadda ama tan jawaab-celinta ee Maxkamadda hoose, marka laga reebo inta lagu caddeeyey Qodobka 200.

Qodobka 225aad

U wicidda iska hor keenidda

Haddii xukunka lagu dhawaaqay oo ka dhexeeyo dhinacyo badan, laga duro dhinacyada qaarkood, Garsooraha haddii loo baahdo, wuxuu amri karayaa inuu u waco iska hor keenid, muddana u qabto si loo gaarsiiyo duridda dhinacyada kale.

Qodobka 226aad

Duridda Ka hor tagga ah

Waa u bannaan tahay qofka racfaanka laga qaatay iyo kuwa lagu soo sheegay qodobka hore in ay soo hor dhigaan isla dacwadda dhexdeeda duritaan ka hortag ah oo lid ku ah xukunka.

Waxay ka billaabanaysaa muddada duridda ka hortagga ah, oo ah soddon beri taariikhda gaarsiinta duridda asliga ah.

Qodobka 227aad

Midaynta duridyaalka kala duwan

Waxaa waajib ah in dacwad keliya la isugu keeno duridyaalka kala geddisan oo lid ku ah xukun keliya.

Qodobka 228aad

Joojinta fulinta

Racfaanku wuxuu joojinayaa fulinta xukumada haddii aan la amrin fulintooda ku meel gaarka ah, jidadka kale ee duridda ma joojinayaan fulinta haddii laga reebo gooraha xeerku si cad u sheegayo.

Qodobka 229aad

Waxyaalaha ka dhasha dhicidda duridda

Haddii dacwadda duriddu dhacdo, xukunka la duray wuxuu noqonayaa dhammaad.

# MADAXA LABAAD

## RACFAANKA

### Qodobka 230aad

### Racfaan qaadashada

Waxaa bannaan in laga qaato racfaan xukunnada darajada koowaad ee kasoo baxa Maxkamadaha Degmooyinka iyo Gobollada haddii qaynuunka uusan reebin ama dhinacyadu ku heshiin.

### Qodobka 231aad

### Maxkamadda Rafcaanka

Waxaa racfaan looga qaadan karaa xukunnada Maxkamadaha Degmooyinka iyo Gobollada Maxkamadda Rafcaanka ee ku taal meesha ay ku taal Maxkamadda xukunka soo saartay.

### Qodobka 232aad

### Qaabka Racfaanka

Racfaanka waxaa lagu soo qaadanayaa warqadda u yeeridda ah ee koobaysa waxyaabaha dhacay iyo asbaabta duridda, waxaana loo geynayaa Maxkamadda soo saartay go'aanka la duray, taasoo u gudbineysa daah la'aan galka oo uu la socdo xukunka la duray Maxkamadda Rafcaanka.

### Qodobka 233aad

### Qaabka keenista racfaanka ka hortagga ah

Racfaanka ka hor tagga ah waxaa lagu keenayaa warqad jawaab celin ah ee lagaga hortagaayo duridda asalka ah.

### Qodobka 234aad

### Soo dhex galka racfaanka

Waxaa loo oggol yahay dhinaca saddexaad oo ay u bannaan tahay inuu ka hortago fulinta xukunka, asagoo ilaalinaayo xaqiisa inuu soo dhex galo racfaanka.

### Qodobka 235aad

### Weydiisyaha iyo wax ka qabidda cusub

Ma bannaana in la keeno Maxkamadda Rafcaanka weydiisyo cusub, haddii la keenana waa in ay iyadu diidaa; waxaase bannaan in la keeno wax qabid iyo Dokumentooyin cusub, iyo tilmaamid jidad Sugid ee aan la keenin darajada koowaad.

Waa bannaan tahay in la weydiisto faa'iidooyinka, miraha iyo miraha bislaaday markii duridda xukunka kaddib iyo magdhowga dhibaata ee dhalatay xukunka ka dib.

Qodobka 236aad

dhicidda weydiinta iyo wax ka qabidda aan la cusboonaysiin

waxaa loo qaadanayaa in laga tanaasulay weydiinta iyo wax ka qabidda ee ayna Maxkamadda darajada koowaad xukunkeeda ku oggolaan, haddii aan si cad loogu cusbooneysiin Rafcaanka.

Qodobka 237aad

Qaabka looga qayb gelaayo Racfaanka iyo muddadiisa

Ka qayb galka rafcaan wuxuu ku imaanayaa qaabka iyo habka loogu dhaqmo Maxkamadda darajada koowaad.

Qodobka 238aad

Oggolaansho la'aanta wadidda Racfaanka

Haddii racfaanluhu ka qayb geli waayo fadhiga hore, Maxkamaddu waxay dacwadda dib ugu dhigaysaa fadhiga soo socda, taasoo kaaliyuhu uu gaarsiinayo racfaanlaha, haddii racfaanluhu misna ka qayb geli waayo fadhiga cusub, Maxkamadda waxay caddeyneysaa oggolaansho la'aanta Wadidda Rafcaanka.

Qodobka 239aad

Tillaabooyinka diyaarinta ee Maxkamadda Rafcaanka

Fadhiga ugu horreeya ee Garsooraha Racfaanka u qabto dacwadda wuxuu hubsanayaa toosanaanta ka qayb galka dhinacyada, wuxuu amrayaa haddii loo baahdo, wicidda iska hor—keenidda dhinacyada iyo gaarsiinta dhinacyada kale, haddii ay jiraan, sida uu dhigayo Qodobka 70.

Haddii ay jirto arrinta lagu sheegay Qodobka hore, wuxuu caddeynayaa oggolaansho la'aanta wadidda Racfaanka, sidoo kale wuxuu caddaynayaa maqnaashaha rafcaansanaha haddii uu imaan waayo, wuxuuna amar ku soo saarayaa dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee ku saabsan wadidda Dacwadda.

Goor kasta Garsooruhu isagoo amraaya imaanshaha dhinacyada haddii loo baahdo, waa inuu isku dayaa heshiisiinta dhinacyada dooddu ka dhexeyso.

Qodobka 249aad

Muddada Cabashada lagu samayn karo

Cabashada waxaa lagu samayn karaa muddo 30 Beri ah ka billaabata Taariikhda Gaarsiinta cabashada. Ma bannaana duriddu haddii faafinta xukunka ay ka soo wareegtay hal sano.

Qodobka 250aad

Saxiixa Cabashada iyo waxa ay ka kooban tahay

Waxaa waajib ah in uu saxiixo cabashada qareen ama Wakiil ku qoran Diiwaanka; u cabashada Maxkamadda Sare waa inay ka kooban tahay::

1.) Tilmaanta Magacyada iyo Degmooyinka dhinacyada oo dhan.

2.) Lambarka iyo Taariikhda xukunka.

3.) Bandhigid kooban oo ku saabsan arrimaha Dacwadda.

4.) Asbaabta cabashada oo ay la socoto tilmaanta Qodobbada xeerka ay ku dhisan tahay cabashadu.

5. Tilmaanta wakaalashada haddii lagu sameeyey warqad gaar ah.

Dhawris la'aanta waxyaabaha kor lagu soo sheegay waxay keenaysaa aqbalid la'aanta cabashada.

Qodobka 251aad

Doorashada degitaanka

Dhinaca wax durayaa wuxuu degitaan u dooranayaa Xafiiska Qareenkiisa ama wakiilkiisa; gaarsiinta waxaa loogu hagaajinayaa degitaankaas. Haddii ay taasi suuroobi weydo waxay gaarsiintu ku dhammaaneysaa Xafiiska Kaaliyaha Maxkamadda.

Qodobka 252aad

Gaarsiinta Cabashada

Waxaa waajib ku ah dhinaca wax duraaya inuu gaarsiiyo cabashada dhinaca ama dhinacyada kale oo ay cabashadu lid ku tahay.

Qodobka 253aad

Dhigidda Cabashada

Waxaa waajib ah in la dhigo cabashada xafiiska Kaaliyaha Maxkamadda soo saartay xukunka la duraayo, haddii kalese duridda lama wadi karo. Waxaana waajib ah in lagu soo lifaaqo cabashada nuqul asal ah ee xukunka la duraayo iyo Wakaaladaa Qareenka iyo rasiid caddeynaya in la bixiyey ajuurada waajibka ah ama cafiskeeda.

Qodobka 254aad

Diridda galka

Waxaa waajib ku ah Kaaliyaha Maxkamadda qabatay warqadda cabashada iyo Dokumentiyaalka ku tilmaaman Qodobka hore, inuu degdeg iskii ugu diro galka Kaaliyaha Maxkamadda Sare.

Qodobka 255aad

Ka Jawaabidda Cabashada

Waa u bannaan tahay dhinaca la duray inuu jawaabtiisa ku celiyo warqadda ay waajib tahay in la gaarsiiyo dhinaca wax cabtay toban maalmood dhexdood markii la soo gaarsiiyey cabashada hore.

Waxaa loogu dhaqmayaa ka jawaab celinta cabashada axkaanta Qodobka 250, waxaana waajib ah in la dhigo Xafiiska kaaliyaha toban maalmood dhexdood oo laga billaabo dhammaadka gaarsiinta. uma bannaana dhinaca aan ka soo jawaabin cabashada waxaan ahayn ka qayb gelidda doodda afka ah ee Maxkamadda.

Qodobka 256aad

Joojinta fulinta Xukunnada

duridda loo qaatay Maxkamadda Sare ma joojinayso fulinta xukunnada. Haddiise ay jirto asbaab caqli gasha waa u bannaan tahay Maxkamadda Sare iyo Maxkamadda xukunka soo saartay inay joojiyaan haddii ay jiraan asbaab caqliga gasha fulinta xukunka ku meel gaar ahaan, kaddib markay dhageystaan dhinacyada, ayna amraan haddii loo baahdo in la dhiibo dammaanad.

## Qodobka 257aad

### Cabashada fadhiga doodda iyo ogeysiinta dhinacyada

Guddoomiyaha Maxkamadda wuxuu qabanayaa fadhi lagaga doodo cabashada, Kaaliyaha Maxkamaddana wuxuu ogeysiinayaa dhinacyada 10 maalmood ka hor ugu yaraan.

## Qodobka 258aad

### Akhrinta Dacwadda iyo Dooddeeda

Garsooraha uu magacaabay Guddomiyaha ayaa fadhiga loo qaatay Dacwadda kaga sheekeynaaya kaddibna Guddomiyaha ayaa u oggolaanayo dhinacyada inay caddeestaan asbaabta cabashada iyo difaacooda.

Markii ay dooddu dhammaato, Maxkamaddu waxay go'aankeeda ku gaareysaa qolka tashiga, haddii ay la habboonaan Guddomiyaha inuu dib ugu dhigo fadhi kale.

## Qodobka 259aad

### Go'aanka Maxkamadda Sare

Haddii la helo asbaabta cabashada ee Sharcigu sheegayo Maxkamadda waxay caddeynaysaa oggolaasha la'aanta ama socodsiin la'aanta cabashada waxayna amreysaa in lala wareego dammaanaddii tiil, waxayna xukumeysaa kharajka.

Mana bannaana in la soo celiyo cabashadii Maxkamaddu horey u caddaysay in aan la oggolaan ama la socodsiin xataa haddii ayna muddada duriddu dhammaan.

Haddii ay Maxkamaddu garato in ayna bannaanayn in la oogo Dacwadda ama la sii wado waxay go'aan ku gaareysaa tirtiridda xukunka la soo duray.

Haddiise ay Maxkamaddu diido cabashada waxay ku xukumaysaa dhinaca wax duray inuu waayo dammaanadda iyo kharajka haddii ayna la noqon in dhinac kasta qaado kharajkiisa.

Haddiise ay oggolaato cabashada waxay burineysaa xukunka la soo duray, waxayna si kama dambays ah u dhammeyneysaa dulucda Dacwadda markii ay caddahay in diyaarinta Dacwadu ay buuxdo, haddii kalase waxaa u bannaan in ay baadho arrimaha Dacwadda ama amarto qalab baarid oo kale ama u celiso Maxkamadda xukunka soo saartay haddii ay jirto dan aad u culus iyadoo amreysa in uu galo Garsoore aan ahayn kii horey u galay.

Qodobka 260aad

Dhigidda xukun & gaarsiintiisa

Xukunka waxaa la dhigayaa Xafiiska Kaaliyaha Maxkamadda; Kaaliyuhuna wuxuu gaarsiinaya dhinacyada danta ku leh; wuxuuna u celinayaa galka oo ay ku jiraan warqadaha oo idil iyo nuqul ka mid ah dhawaaqa xukunka Maxkamaddii soo saartay xukunka la duray taasoo ay waajib ku tahay in ay ku tilmaanto geeska xukunka la soo duray dhawaaqa xukunka Maxkamadda Sare.

Qodobbada 261aad.

Ka noqoshada cabashada

Waxaa u bannaan dhinac kasta in uu ka tanaasulo cabashada ama jawaab celinteeda inta aan la billaabin akhrinta Dacwadda ee lagu sheegay Qodobka 258.

Qodobka 262aad

Dhaqaajinta Dacwadda

Haddii ay Maxkamadda Sare u wareejiso Dacwadda Maxkamad kale waxaa u bannaan dhinac kasta in uu Dacwadda ka hor wado Maxkamadda loo wareejiyey sannad dhexdiis laga billaabo markii la faafiyey xukunka Maxkamadda Sare.

Xukunka Maxkamadda Sare wuxuu lahaanayaa xooggiisa laasimka ah xataa haddii ay dacwaddu dhacdo.

Qodobka 263aad

Qaadidda Dacwadda la celiyey

Dhinacyadu dacwadda la wareejiyey waxay ka hor lahaanayaan Maxkamadda dacwadda loo wareejiyey sifooyinkii ay ka hor lahaayeen Maxkamaddii hore.

Qodobka 264aad

Xoogga Qaanuunka ah ee Go'aanka Maxkamadda Sare

Waxaa waajib ku ah Maxkamadda Dacwadda loo wareejiyey in ay raacdo arrimaha qaanuuniga ah ee Maxkamadda Sare wax ka goysay.

Qodobka 265aad

Nidaamka Wilaayadda Garsoorka iyo Awoodda

Waxaa lagu dhaqayaa nidaamka wilaayadda Garsoorka iyo awoodda isla habka lagu soo sheegay Qodobbada hore.

## MADAXA AFRAAD

## ARJIGA KU NOQOSHADA

Qodobka 266aad

Xaalaadka ku noqoshada

Waa bannaan tahay in lagu duro xukunnada kama dambeysta ah arjiga ku noqoshada xaalaadka soo socda:

1.) Haddii sabab u ahayd xukunka soo saariddiisa khatal uu la yimid dhinac ka mid ah Dacwadda oo dhibaato gaarsiisey dhinaca kale.

2.) Haddii la caddeeyo xukunka kadidb in sugitaankii laga dhisay xukunka uu been ahaa.

3.) Haddii dhinaca arjiga soo qortay uu helo kaddib markii xukunka soo baxay warqado si cad wax uga sheegaya Dacwadda ayna u suurtoobi weyday in uu markii hore keeno iyadoo ay sabab u ahayd arrima uusan waxba ka qabankarayn ama gaf uu lahaa dhinaca kale.

4.) Haddii xukunka soo saariddiisa ay sabab u ahayd gaf ku saabsan arrin ku cad warqadaha Dacwadda iyo Dokumentooyinkeeda.

5) Haddii ay ku sugnaato xukun leh xoog kama dambeys ah in uu xukunku ku soo baxay khiyaanada Garsooraha.

Qodobka 267aad

Arjiga ku noqoshada ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud

Mararka ay waajib ku tahay Xakiiska Xeer Ilaaliyaha Guud inuu ka qayb galo dacwadaha waxaa u bannaan inuu ku duro xukunka arjiga ku noqoshada gooraha soo socda:

1.) Haddii uusan ka qayb gelin dacwadda.

2.) Haddii ay caddahay in dhinacyada ku heshiiyeen inay khiyaameeyaan Xeerka.

### Qodobka 268aad

### Keenidda arjiga

Arjiga ku noqoshada waxaa lagu samaynayaa warqadda u yeeridda ee la hor geeyo Maxkamadda soo saartay xukunka la duraayo.

Waxaana waajib ah in laga helo warqadda u yeeridda asbaabta arjiga ku noqoshada iyo sugidda caddayneysa inay jiraan arrimaha lagu sheegay Qodobka 266.

Waxaana waajib ah inuu saxiixo warqadda u yeeridda qareen haysta wakaalad gaar ah, taasoo uu la socdo rasiid tilmaamaya in la dhiibay ajuurada waajibka ah.

### Qodobka 269aad

### U celinta axkaanta dacwadaha darajada koowaad

Waxaa loogu dhaqmayaa arjiga ku noqoshada axkaanta u dhigan dacwadaha darajada koowaad, haddii ayna khilaafsanayn qodobka lagu dhaqo arjiga ku noqoshada.

### Qodobka 270aad

### Joojinta fulinta.

Waa u bannaan tahay Garsooraha fiirinaaya arjiga ku noqoshada ah inuu joojiyo fulinta xukunka lagu soo duray arjiga ku noqoshada, sida haddii uu warsado dhinacyada midkood asagoo dhegeystay dhinaca kale, kana qaaday dammaanad haddii loo baahdo.

Haddii Garsooruhu oggolaan waayo ama uu diido arjiga ku noqoshada, asbaabta uu ku dhisan yahay oo aan sal lahayn awgeed, wuxuu xukumayaa in Dacwooduhu waayo dammaanadda, wuxuuna saarayaa kharajka.

Haddiise Maxkamaddu oggolaato arjiga ku noqoshada waxay amreysa celinta dammaanadda waxayna wax ka goyneysaa dulucda Dacwadda, ayadoo tirtireysa waxyaalihii ka dhashay xukunka la soo duray.

### Qodobka 271aad

### Duridda xukunka lagu dhammeeyey arjiga ku noqoshada

Ma bannaana in lagu duro arji ku noqosha ah xukunka lagu dhammeeyey arji ku noqosha ah.

Hase yeeshee waa bannaan tahay in xukunkaas lagu duro jidadka kale ee duridda ah, haddii aysan dhammaan muddooyinka duridda.

# BUUGGA SADDEXAAD

## HABABKA GAARKA AH

## BAABKA KOOWAAD
## DACWOOYINKA GAABAN

### MADAXA KOOWAAD

### DACWOOYINKA LAGU FULINAAYO AMARKA

#### Qodobka 272aad

#### Warqadaha leh xooga fulinta

Haddii xaqu yahay mablaq lacag ah ee isla markaas la muteystey ama shey beddelkiisa la dhiib. karo, intuu yahayna xaddidan tahay ama shey guurto ah oo go'an oo la muteystey dhiibiddiisa waxaa u bannaan Maxkamadda awoodda leh markii uu soo warsado deynluhu in ay amarto bixinta ama dhiibista:

1.) Haddii xaqu ku dhisan yahay sugitaan qoran.

2. Haddii deyntu ku saabsan tahay xushmada qareennimada ama celinta kharajka soo gaara qareennada, wakiilada, kaalıyayaasha, gaarsiiyayaasha ama qof kasta oo kale ee gutey shaqo ku saabsan Dacwadda.

3. Haddii deyntu ku saabsan tahay abaalgud laga qaadanaayo shaqooyinka teknikada ah.

Ma bannaana in la amro bixinta haddii ay waajib tahay in lagu gaarsiiyo deynqabaha Jamhuuriyadda dibaddeeda.

#### Qodobka 273aad

#### Sugitaanka qoran

Waxaa ah sugitaan qoran ee toosan sida waafaqsan qodobka hore: warqadaha caymiska (polizze), ballanqaadyada dhinaca Kaaliyaha sameeyo, qoraalada warqadaha gaarka ah, xisaabaha Bangiyada iyo sidoo kale qoraallada xisaabaha ah ay waajib tahay in la aqoonsado laguna dhejiyo boollada.

#### Qodobka 274aad

#### sugitaanka qoran ee amaahda dawladda iyo Wakaaladaha Guud

Waxaa u ah sugitaan amaahda dawladda iyo Wakaaladaha Buugga iyo diiwaannada Maamulka guud haddii ay isku dubbarridan yihiin.

Sidoo kale waxaa sugitaan ah baaridda uu sameeyo Xafiiska shaqada.

Qodobka 275aad

Warqadda Kharajka

Waxaa waajib ah in weydiisashada la socoto warqad caddeeyneysa kharajka iyo shaqooyinka ku xusan lambarrada 2 iyo 3 qodobka 272.

Haddii Garsooruhu oggolaado weydiisashada waxaa waajib ku ah inuu hubiyo in warqadda kharajka ay waafaqsan tahay tariifada loo gooyey shaqooyinka teknikada.

Qodobka 276aad

Maxkamadda awooda leh

Maxkamadda u leh awoodda Dacwadda caadiga ah ayaa iska leh soo saaridda awaamiirta fulinta.

Qodobka 277aad

Waxyaalaha laga doonaya in laga helo arjga fulinta

Waxaa waajib ah in laga helo warqadda uu ku warsanayo dhinacu amarka fulinta shuruuddda lagu caddeeyey qodobka 119, waana in ay la socotaa xaqaas Dokumentiga adkeynaya.

Qodobka 278aad

Soo dhameynta sugitaanka

Haddii ay u muuqato Maxkamadda in sugitaanku uusan dhammeyn waxaa u bannaan in ay wacdo dacwaqabaha si uu u soo dhammeystiro. Sidoo kale waxaa u bannaan inay diido arjiga lagu warsanayo amarka fulinta.

Mana hor istaageyso diidistaasi in la soo billaabo Dacwadda ama lagu soo billaabo arji lagu warsanayo amar fulin ah ama si Dacwad caadi ah.

Qodobka 279aad

Amarka bixinta iyo mudadiisa

Haddii la helo shuruudda lagu caddeeyey qodobka 272, ayna sugidduna dhan tahay waxay Maxkamaddu soo saareysaa amar ay ku amreyso deynqabaha in uu bixiyo ama dhiibo waxaa la xukumey toban beri dhexdood iyadoo u sheegeysa in uu xaq u leeyahay in uu keeni karo ka hor imaansho is'a muddadooda, haddiise uusan ka hor imaan amarka waxaa lagu fulinayaa si xoog ah.

Maxkamadda waxaa u bannaan in ay muddada u yareyso ilaa nus haddii ay jiraan asbaabo culus waxayna kharajka Dacwadda ku xaddideysaa amarka fulinta ee ay ku amrayso bixinta.

Qodobaka 280

Amarka fulitaanka

Haddii deyntu ku dhisan tahay Kambiyaale, jeek bangiyeed ama warqad uu qoray Nootaayo, Garsooruhu wuxuu amraya deyn luhu inuu daahid la'aan bixiyo asagoo amrayo haddii taa la waayo fulitaan khasab ah muddana u qabanaaya si uu u dhegeysto ka hor tagga.

Deynluhu wuxuu gaarsiinayaa deynqabaha nuqul ka mid ah weydiisashada; iyo amarka fulinta ah, haddii ayna gaarsiintu ku dhammaan 30 beri dhexdooda, amarku wuxuu noqonayaa wax aan qiimo lahayn, waxaase bannaan in weydiisashada la soo cusbooneysiiyo.

Qodobka 281aad

Habka loo oogaayo ka hor-tagga

Waxaa ka hor tagga la hor geynayaa Garsooraha soo saaray, waxaana lagu sameeynaayaa warqad u yeerid ah, ayadoo la dhawraayo axkaanta ku saabsan Dacwad furidda. Dhinaca sameynaya Dacwadda ka hor tagga ah wuxuu noqonaayaa Dacwoode, dhinaca Dacwadda oogay lehna amarka fulinta wuxuu noqonaayaa Dacweysane.

Waxaa la dhawrayaa Xeerka u degsan Dacwadda caadiga ah hase yeeshee muddooyinka maanshaha ah waxaa laga dhimi karaa bar.

Qodobka 282aad

Ka hortegid la'aanta

Haddii aan lagu keenin ka hortagga muddada la qabtay dhexdeeda, ama haddii dhinaca ka hortagga sameeyey uusan imaanin fadhiga, Garsooruhu wuxuu caddeynayaa in la fulin karo amarka kaddib markuu hubsado hagaagsanaanta gaarsiinta.

Mar haddii la caddeeyo in la fulin karo amarka lama oggolaanayo ka hortag dambe.

Qodobka 283aad

Oggolaanshaha fulinta ku meel gaarka ah

Ayadoo laga reebaayo xaalaadka lagu caddeeyey Qodobka 280, Garsooraha waxaa u bannaan asagoo tixgelinaya dalabka dhinaca inuu fulin ku meel gaar ah amro dammaan ama damaan la'aan.

Sidoo kale, Garsooraha waxaa u bannaan asagoo tixgelinaayo dalabka dhinaca ka hor tagga keenay, in uu joojiyo fulinta kumeel gaarka ah.

Qodobka 284aad

Xoogga amarka fulinta uu yeelanayo

Haddii Maxkamaddu diiddo ka hor tagga waxay yeelanaysaa Dekereetada bixinta ee aan hore u lahayn fulinta xoogga fulitaanka ah.

Haddii Maxkamaddu oggolaato ka hor tagga qaar ahaan wuxuu xukunka ay dhammeysay Dacwadda u suubanayaa fulitaan.

Qodobka 285aad

Xoogga Dekereetada la xukumey in ay fulintaan u suubato

Waxay u suubaneysaa dekereetada la xukumay in ay leedahay fulitaan in lagu qaadan karo xaqa gooni ahaaneed ee ku saabsan maguurtada si waafaqsan xeerka madaniga.

MADAXA LABAAD

BANNAANSHAHA KA SAARIDDA

Qodobka 286aad

Digniinta ka saaridda ay keento la daahidda bixinta ijaarka

Haddii qofka wax ijaatay uusan dhiibin ijaarka muddada dhiibista dhammaadkeeda wuxuu qofka wax ijaartay uga digaayaa ka saaridda la daahidda ijaarka awgeed xataa haddii ayna dhammaan muddada ijaarku.

Qodobka 287aad

Gaarsiinta

Waxaa waajib ah in la gaarsiiyo isla qofkaas guriga ijaartay digniinta ka bixidda guriga ee daahid awgeed iyada oo loo raacinayo warqadda imaanshaha Maxkamadda horteeda.

Qodobka 288aad

Maxkamadda awoodda leh

Maxkamadda awoodda ku leh ijaarka aan la bixin waxay awooddeedu lagu xaddidayaa mablaqa ijaarka la mutaystay muddada ijaarka oo dhan.

Qodobka 289aad

Habka warqadda imaanshaha

Warqadda imaanshaha waa in lagu dhawraa hababka u qoran oogidda dacwadda ee Maxkamadda darajada koowaad horteeda.

Qodobka 290aad

Imaansha la'aanta Kireeyaha

Haddii kireeyuhu uusan imaan fadhiga Garsooruhu uu u qabtay imaanshaha, waxay noqoneysaa qiimo la'aan.

Haddii **qofka wax ijaartay** uu imaan waayo, ama asagoo yimid uusan ishor taagin Garsooraha wuxuu oggolaanayaa ka saaridda, wuxuuna go'aan amar ah ku soo saarayaa in geeska warqadda u yeeridda ah lagu qoro siiqadda fulinta; isla amarkaas, Garsooruhu asagoo tixgelinaaya arjiga weydiisashada kireeyaha wuxuu ku amrayaa bixinta ijaarka bislaaday.

Qodobka 291aad

Ka hortagga qofka wax ijaartay

Haddii uu yimaado qofka wax ijaarey, kagana hortago bixinta ijaarka wax la garaysan karo, Maxkamaddu waa ay ka dhowrsanaysaa arrinta ku saabsan digniinta ka saaridda, waxayna amraysaa in la wado garmaqalka lagu dhammaynayo dulucda Dacwadda si waafaqsan habka qaadista dacwadaha darajada koowaad.

Qodobka 292aad

Ku dhaqanka Xeerka u gaarka ah waxyaalaha la ijaaro

Waxaa loogu dhaqmayaa ka saaridda maguurtada ijaaran ee la isaga saaro si run ah digniin Maxkamadeed Xeerka u gaarka ah ijaarka.

MADAXA SADDEXAAD

HABABKA DHOWRISTA

QAYBTA KOOWAAD

QABASHA

**Qodobka 293**

Amarka qabashada ee Garsooraha

Waxaa u bannaan Garsooraha in uu ku soo saaro amarka qabashada:-

1.) Guurtada, Maguurtada iyo hey'aadka haddii la isku haysto lahaanshaheeda, ayna habboon tahay in la qabto ama loo dhiibo maamul idaari ah oo ku meel gaar ah.

2.) Buugagga Xisaabaadka diiwaannada, warqadaha qoraalka, wax-yaalaha tusaalooyinka ah iyo wax kasta oo kale ee u suubada sugidda xuquuqda la isku haysto haddii ay habboon tahay in si meel ku gaar ah loo qabto.

Qodobka 294aad

Qabashada dhawrista ah

Garsooraha waa u bannaan tahay haddii deynluhu soo warsado markii uu cabsanayo in ay jirto asbaabo la garaysan karo in uu waayo dammaanadda deyntiisa in uu amro qabashada dhawrista ah ee xoolaha guurtada iyo maguurtada ah ee deynqabuhu leeyahay iyo wixii lacag ah ee isagu dad kale ku leeyahay iyadoo la ilaalinayo xudduudda Shar-cigu u jeediyey qabashada.

Qodobka 295aad

Qabashada ka horreysa dacwadda iyo dacwadda dhexdeeda ah

Qabashada dhawrista ah waxaa la weydiisan karaa Dacwadda ka hor, sidoo kale qabashada waxaa la weydiisan karaa Dacwad billaabatay dhexdeeda.

Garsooraha xaaladda hore, haddii uu oggolaado dalabka dhinaca, wuxuu soo saarayaa amar, wuxuuna qabanayaa fadhi uu ku oggolaa-do amarka, asagoo amraaya imaanshaha weydiistaha iyo deynqabaha.

Qodobka 296aad

Dammaan

Waxaa u bannaan Maxkamadda in ay amarto in uu keeno wey-diistaha qabashada dammaan kaafi ah marka ay soo saarayso amarka qabashada ama ay ka raali noqonayso soo saariddiisa kaddib.

Isla markii waxay amraysaa Maxkamaddu ilaalinta xoolaha la soo qabtay.

Qodobka 297aad

Dhicidda xoogga amarka qabashada

Amarka qabashada ee Maxkamaddu soo saareyso yeelan maayo qiimo haddii aan lagu fulin soddon Beri dhexdood oo laga billaabayo maalinti uu soo baxay.

Qodobka 298aad

Tuuridda qabashada dhawrista ah

Waa u bannaan tahay deynqabaha in uu iska baabi'iyo hadii uu keeno wax geleya meesha xoolaha la qabtay si ay u noqdaan dammaan ku filan bixinta xaqa lagu leeyahay iyo kharajkiisa.

Qodobka 299aad

Gaddida waxyaalaha hallaabidoodu dhowdahay

Haddii waxyaalaha la qabtay ay yihiin kuwo hallaabiddoodu dhowdahay waxaa u bannaan Maxkamadda in ay amarto gadidda, qabashaduna waxay u gudbaysaa lacagta ka imaanaysa waxa la gaday.

QAYBTA LABAAD

BAARITAANKA ILAALISKA AH

Qodobka 300aad

Oggolaansha ilaalinta ah ee sugidda

Waa u bannaan tahay qof kasta ee qaba sabab aqliga gasha ee uu ugu malaynayo in uu waayo sugitaan lagama maarmaan u ah dacwad uu oogiddoono mustaqbalka in uu warsado Maxkamadda inay amarto Oggolaashaha sugitaankaas.

Qodobka 301aad

Weydiisasho

Weydiisasho waxaa la hor geynayaa Maxkamadda awoodda u lahaan lahayd qaadidda dacwadda la oogi lahaa, waxaa la raacayaa oggolaasha sugitaanka habka loo uruuriyo sugitaanka dacwadda dhexdeeda, waa lagu isticmaali karaa sugitaankaas markii la soo oogo dacwadda.

QAYBTA SADDEXAAD

HABABKA DEGDEGGA AH IYO LAHAANSHAHA

Qodobka 302aad

Qaraarrada degdegga ah

Waa u bannaan tahay qofka qaba sabab caqliga gasha ee uu uga baqayo, — haddii uu raaco jidka caadiga ah si uu xaqiisa u raadsado, in xaqiisu gelaya khatar aan laga kabsan karin, inuu weydiisto Maxkamadda dhammaan qaraarada degdegga ah. kuwaasoo si ku meel gaar ahaan u xaqiijinaaya natiijada ka dhalan lahayd go'aanka laga soo saari doono dulucda dacwadda.

### Qodobka 303aad

### Maxkamadda awoodda leh

Weydiisashada lagu xusay qodobka hore, waxaa loo jeedinayaa Maxkamadda awoodda u lahaan lahayd dulucda dacwadda.

Maxkamadda haddii ay jirto sabab asaas leh, ayaddoo la dhegeysanayo dhinaca kale, haddii loo baahdo, waxay oggolaaneysaa qaraarada la weydiistay ayadoo loo qabanayo waqti go'an ee ay tahay in gudihiisa lagu billaabo dulucda dacwadda. Haddii dacwadda aan lagu billaabin waqtiga loo qabtay, qaraaradii la soo saaray waxay noqonayaan xoog la'aan ama faa'iido la'aan.

### Qodobka 304aad

### Hababka lahaanshaha

Isla habka lagu xusay Qodobbada hore ayaa la raaci karaa wixii ku saabsan dacwadaha lahaanshaha ah ee ujeeddadoodu tahay soo ceshasada lahaanshaha ama xafididda lahaanshaha waxyaalaha maguurtada ah ama ishtakada ku saabsan dhismo cusub ee lagu xusay qodobka 770 ee X. M.

## MADAXA AFRAAD

## KA REEBIDDA IYO KA QAADIDDA TASARUUFKA

### Qodobka 305aad

### Weydiisashada ka reebidda iyo ka qaadidda tasaruufka

Dacwadda ku saabsan ka reebidda iyo ka qaadidda tasaruufka dadka aan caqligoodu dhammayn waxaa laga hor oogayaa Maxkamadda Gobolka qofkaasi uu deggan yahay.

### Qodobka 306aad

### Qaraarka Maxkamadda

Maxkamadda iyadoo uu ka qayb gelaayo Xeer Ilaaliyaha, waxay amraysaa baaritaan takhtareed waxay qaraarkeeda ku soo saaraysaa ayadoo qiimayneyso xaaladda maskaxda qofka laga reebaayo ama laga qaadayo tasarrufka.

### Qodobka 307aad

### Maamulka Xoolaha

Isla qaraarkaas Maxkamadda waxay magacaabeysaa ilaaliye (wasi) ama dhowre (curatore) waxayna qaadaneysaa tillaabooyinka habboon ee maamulidda Xoolaha qofkaas.

### Qodobka 308aad

Ka noqoshada ka reebidda iyo ka qaadidda tasarrufka

Isla hababkaasi aan soo marnay waxaa looga noqon karaa ka reebidda iyo ka qaadidda tasarrufka haddii la waayo asbaabihii keenay.

## MADAXA SHANAAD

## KAN LA WAAYEY IYO KAN LA XUKUMAY DHIMASHADOODU MAQNAANSHO IYO MALEYN DHIMASHO

### Qodobka 309aad

Caddaynta waayidda iyo dhimashada malaha ah

Haddii qof lagu waayo badda ama dagaal dhexdiisa, ama qarsoomo asagoon warna laga helin, Maxkamadda waxaa u bannaan, ayadoo raacaysa weydiinta dhinaca danta leh iyo Xeer Ilaalinta Guud, waxay go'aan ku gaareysaa waayidda iyo dhimashada malaha ah. Isla go'aankaas Maxkamadda waxay ku qaadanaysaa dhammaan tillaabooyinka ku saabsan Xoolaha qofka la xukumay waayiddiisa iyo dhimashadiisa malaha ah.

Xeerar gaar ah ayaa goynayo muddada ugu yar ee waayidda ee ka dib ay bannaan tahay weydiisashada soo saaridda go'aankaas.

### Qodobka 310aad

Ka noqoshada go'aanka waayidda iyo dhimashada malaha ah

Haddii la helo qofka la xukumay waayiddiisa ama dhimashadiisa malaha ah Maxkamadda way ka noqoneysaa go'aankii waayidda ama dhimashada malaha ah wixii tallaabooyin ka dhashayna waxba lagama soo qaadayo.

### Qodobka 311aad

Faafinta go'aanka waayidda iyo dhimashada malaha ah

Faafinta go'aanka waayidda iyo dhimashada malaha ah waxaa waajib ah in lagu faafiyo Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya iyo jidadka kale ee faafinta.

# BAABKA LABAAD

## XOOGGA XUKUNNADA DALALKA SHISHEEYAHA AH

## MADAXA KOOWAAD

## AQOONSI

### Qodobka 312aad

### Maxkamadda awoodda u leh Aqoonsiga

Qofkii doonaya in loo aqoonsado Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya dhexdeeda xukun shisheeye ah waa inuu arji u yeerid ah hor geeyaa Maxkamadda Racfaanka ee xukunka laga fulinaayo.

Go'aanka aqoonsiga waxaa xataa lagu weydiisan karaa jidka Dibloomaasiga. Dacwadda ka dambeysa waxaa waajib ah inuu ka qayb galo Xeer-Ilaaliyaha.

### Qodobka 313aad

### Shuruudda lagu aqoonsanayo xukunka shisheeyaha ah

Maxkamadda Racfaanka waa in ay hubisaa intayna aqoonsan xukunka shisheeyaha ah waxyaabaha soo socda:

1.) In Maxkamadda dacwadda horteeda lagu qaaday ay dhawrtay nidaamka Garsoorka ee lagu dhaqmo dalka Dacwadda lagu qaaday;

2.) In dhinacyada si sax ah uga qayb galeen Dacwadda ama la caddeyey maqnaasha sida waafaqsan Xeerka;

3.) In xukunka uu ahaado mid leh xoog awood fulin;

4.) In uu xukunkaas khilaafsaneyn xukun uu soo saaray Garsoore Soomaali ah;

5.) In ay hor iilin Garsoore Soomaali dacwad kale ee ku saabsan isla waxaa la isku dacweynayo iyo isla dhinacyada dacwadda ka hor inta uuna yeelan xukunka shisheeyaha xoog fulin;

6. In xukunka aan laga helin waxyaabo lid ku ah nidaamka caanka ah ee Soomaaliyeed.

### Qodobka 314aad

### Xoogga xukunnada shisheeyaha ah.

haddii, ayadoo la fiirinaayo shuruudda lagu tilmaamay qodobka hore, Maxkamaddu caddayso xoogga xukunka shisheeyaha, xukunkaas wuxuu yeelanayaa xoog «Documenti» fulinta Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya dhexeedda.

Qodobka 315aad

Oggolaashaha jidadka sugidda ee uu amray

Garsoore Shisheeye ah

Weydiisashada oggolaashaha jidadka sugidda ee ka timaada Garsoorayaasha shisheeyaha ah waa inay soo martaa Maxkamadda Rafcaanka ee meesha sugidda lagu oggolaanayo, Maxkamadda qaraarkeeda waxay ku soo saaraysaa amar ayadoo dhegeysatay Xeer Ilaaliyaha.

Qodobka 316aad

U yeerid madax Dawlad shisheeye hortooda

Gaarsiinta u yeeridda imaanshaha ah ee madax dawlad shisheeye ah hortooda ama warqadaha kale ee ka imaanaya Dawlad shisheeye ah waxaa amraya ee fulinayana Xeer Ilaaliyaha meesha gaarsiinta lagu sameynaayo.

BAABKA SEDDEXAAD

DHEXDHEXAADINTA

Qodobka 317aad

Shardiga dhexdhexaadinta

Waxaa u bannaan dhinacyada in ay u bandhigaan wixii ka dhexdhasha oo iskhilaaf ah dad dhexdhexaadiya haddii uusan khilaafku ku saabsaneyn xuquuq aan la maamulan karin, haddii ay ku heshiiyaan dhinacyadu in ay u bandhigaan khilaafkooda dad dhexdhexaadiya uma bannaana midoodna in uu u dacwoodo Maxkamadda ka hor inta aan la billaabin dhexdhexaadinta.

Qodobka 318aad

Habka shardiga dhexdhexaadinta

Waxaa waajib ah in uu qoran yahay heshiiska lagu heshiiyey in la hor dhigo khilaafka dhexdhexaadiyaal waana in dulucdiisu xaddiidan tahay.

Qodobka 319aad

ku heshiinta shardiga dhexdhexaadinta

Waa bannaan tahay in heshiiska lagu xusay qodobka hore ee ku saabsan shardiga dhexdhexaadinta la raaciyo si shardi ah heshiis ama is-afgarasho dambe si looga gaashaanto khilaafyada ay suurtowdo in ay ka dhashaan heshiiskaas. Ma bannaana in lagu daro shardigaas heshiisyada kooxda ah, sidoo kale ma bannaana in laga reebo awoodda Maxkamadda caadiga khilaafyada ku saabsan xuquuqda ay suurtoobi karin in la maamusho.

## Qodobka 320aad

### Dhexdhexaadiyaasha

Waa bannaan tahay in dhexdhexaadiyaashu yihiin hal qof ama ka badan waxaase shardi ah in ay yihiin tira dheeri ah.

Waxaa waajib ah in laga dhex helo dhexdhexaadinta ama shardiga ku saabsan ee la raacinayo heshiiska magacaabidda dhexdhexaadiyaasha, tiradooda iyo sida loo magacaabayo.

## Qodobka 321aad

### Magacaabidda dhexdhexaadiyaasha

Marka dhinacyadu magacaabayaan dhexdhexaadiyaasha sida uu qabo heshiiska dhinac kasta waxaa u bannaan inuu ku gaarsiiyo jidka gaarsiiyaha in uu magacaabay dhexdexaadiyihiisa.

Dhinaca helay gaarsiinta markiisa waa inuu gaarsiiyo dhinaca kale magaca dhexdhexaadiyehiisa toban maalmood dhexdooda.

Haddii taasi la waayo, dhinaca magacaabay dhexdhexaadiyahiisa wuxuu u dacwoon karaa Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka ee u leh awoodda xoogga Dalka, asagoo weydiisanaayo in dhinaca kale uu magacaabo dhexdhexaadiyihiisa.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka markuu dhegeysto dhinacyada arkana heshiiska wuxuu soo saarayaa qaraar amar ah ee aan la duri karin.

## Qodobka 322aad

### Beddelaad

Haddii, sababtu si kastaba ha noqotee, la waayo dhammaan ama qaar ka mid ah dhexdhexaadiyayaasha la magacaabay heshiiskana beddelaad sheegin, waxaa lagu camal falaa habka lagu sheegay qodobka hore,

## Qodobka 323aad

### Ahliyadda dhexdhexaadiyeyaasha (capacita)

Dhedhexaadiyeyaasha waa inay ahaadaan dad Soomaali, dhexdhexaadiyeyaal ma noqon karaan dadka aan qaan gaar ahayn, kuwa laga reebay ama laga qaaday tasaruufka, kuwa xoolo beelay iyo kuwa laga reebay shaqooyinka Dawladda.

Qodobka 324aad

Oggolaashaha iyo waajibaadka dhexdhexaadiyeyaasha

Oggolaashaha dhexdhexaadiyeyaasha waa inuu ahaadaa qoraal ama heshiiska lagu saxiixo. Dhexdhexaadiyeyaashu waa iney ku dhigaan xukunka dhexdhexaadinta muddada lagu xaddiday qodobka 331; haddii taasi la waayo ama haddii ay ka tanasulaan dhexdhexaadinta sabab caqliga gasha la'aan waxaa waajib ku ah iney bixiyaan magdhow.

Qodobka 325aad

Xuquuqda dhexdhexaadiyeyaasha

Dhexdhexaadiyeyaasha waxay xaq u leeyihiin in loo soo celiyo kharajka ka baxay iyo xushmada hawsha ay qabteen xadka lagu gooyey heshiiska aqbaleenna dhinacyada.

Qodobka 326aad

Duridda iyo ka joogsashada

Waxaa lagu dabaqayaa dhexdhexaadiyayaasha axkaanta ku saabsan duridda iyo ka joogsashada Garsoorayaasha caadiga ah, laakiin, dhinaca ma duri karo dhexdhexaadiyayaasha isagu magacaabay.

Qodobka 327aad

Habka dhexdhexaadinta

dhexdhexaadiyayaasha marka ay qaadayaan Dacwadda dhexdhexaadinta waxay leeyihiin isla awoodda ay leeyihiin Garsoorayaasha caadiga ah xagga su'aal u jeedinta dhinacyada, imtixaanka maragta iyo keenidda caddaynta, Marka ay gudanayaan hawshaas waa inay raacaan Habka Xeerka Madaniga inta ay suurtoobi karto inay ka raacaan.

Hase yeeshee, uma bannaana marnaba inay amraan qabashada ama tillaaba kasta oo ka mid ah tillaabooyinka dhawridda.

## Qodobka 328aad

### Go'aanka dhexdhexaadinta

Dhexdhexaadiyayaasha waxaa waajib ku ah inay go'aanka soo saaraan 90 beri dhexdood oo laga billaabaayo taariikhda magacaabiddooda; haddiise aan isku mar la magacaabin; waqtiga wuxuu ka billaabanayaa magacaabiddii ugu dambeysay. Waqtiga waa la dheerayn karaa ilaa laba jeer haddii ay sidaa ku heshiiyaan dhinacyada.

haddii dhexdhexaadiyayaasha ayna ku gaarin waqtigii la qabtay ama la dheereeyey go'aankooda, awooddooda way dhacaysaa, dhinacyadana waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay magacawdaan dhexdhexaadiyayaal kale ama ay u gudbistaan dacwaddooda Maxkamadda si ay go'aan uga gaarto.

## Qodobka 329aad

### Sababaynta go'aanka dhexdhexaadinta

Waa inay dhexdhexaadiyayaasha go'aankooda asbaab u yeelaan, si waafaqsan Sharciga ama mabaadi'da caddaaladda. Xataa haddii dhinacyadu ayna si caddaan u siinin awoodaasi.

Hase yeeshee waxaa waajib ah inuu go'aanku ku dhisnaado qodobka koowaad Lambar 2 ee Xeerka Madaniga.

## Qodobka 330aad

### Qaabka iyo waxyaalaha loo doonayo in laga helo xukunka dhexdhexaadinta

Waxaa waajib ah in laga helo go'aanka dhexdhexaadinta:

1.) Magacaabidda dhinacyada;

2.) Soo koobidda falalka iyo asbaabta;

3.) Saxiixa dhexdhexaadiyayaasha dhammaantood iyo magacaabidda mid kasta;

4.) Taariikhda iyo meesha go'aanka lagu soo saaray.

Qodobka 331aad

Dhigidda Xukunka

Waxaa waajib ku ah dhexdhexaadiyayaalka inay xukunka ku dhigaan Xafiiska Kaaliyaha ee Maxkamadda Gobolka ee meesha go'aanka lagu soo saaray 10 maalmood dhexdood oo laga billaabo maalinta uu soo baxay. Guddoomiyaha maxkamadda Gobolka markuu hubsado ansaxidda dhigidda, wuxuu ku siinayaa amarkiisa xoogga fulinta go'aanka dhexdhexaadinta; amarkaas waa inuu raacaa dhigidda go'aanka

Qodobka 332aad

Duridda

Waa bannaan tahay in lagu duro Maxkamadda racfaanka ee leh awoodda xagga dalka, go'aan dhexdhexaadinta, sababaha soo socda oo keli ah:

1.) Buritaan ka dhashay waayidda shardi ka mid ah shuruudda lagu tilmaamay Qodobka 330;

2.) Ilaalin la'aanta muddada lagu tilmaamay Qodobka 328;

3.) Ka noqoshada ka dhalanaysa sabab ka mid ah asbaabta lagu sheegay Qodobka 266.

Waxaa waajib ah in duridda lagu keeno 30 beri laga billaabo maalinta la dhigay go'aanka.

Waa u bannaan tahay Goddoomiyaha Maxkamadda racfaanka, haddii sidaa uu warsado dhinaca qadimay duridda, inuu joojiyo fulinta.

Qodobka 333aad

Heshiisyada ka baxsan Maxkamadaha

Warqadaha heshiisyada ah ee ku dhexmara dhinacyada Maxkamadaha dibaddooda, ama ayagu naftooda ha sameesteen ama ha u sameeyaan Xafiisyada Siyaasadda ee Magaalooyinka, Tuulooyinka iyo xaafadaha, waxay yeelanayaan xoog fulitaan ah haddii ay ka dhigan yihiin Xafiiska Maxkamadda Degmada ee soohinta heshiisku ku dhammaaday.

## BAABKA AFRAAD

## HABKA QOLKA TASHIGA

### Qodobka 334aad

### Qaabka weydiisashada iyo go'aanka

Haddii go'aannada aan khilaaf ka taagnayn, waxaa waajib ah in la weydiisto Maxkamadda awoodda leh, taasoo amarkeeda ku soo saaraysa qolka tashiga, amarkaasoo leh qaabka Dekereeto, haddii qaanuunka sidaa si khilaafsan sheegin.

### Qodobka 335aad

### Go'aan

Garsooruhu, kaddib markuu helo macluumaadka habboon, una dhegeesto Xeer Ilaaliyaha, hadaii dhegeysigiisa waajib tahay ayuu go'aanka ku qorayaa arjiga hoostiisa.

### Qodobka 336aad

### Ka hortagga iyo Cabashada

Amarka lagu soo sheegay qodobka hore, wuxuu leeyahay xoog fulitaan, haddii dhinacyada midkood ama Xeer Ilaaliyaha uusan ka hortag keenin ama ka caban 10 beri dhexdood ka billaabanaysa maalinta lagu faafiyey dhigidda Xafiiska kaaliyaha.

### Qodobka 337aad

### Ka noqoshada Go'aanka

Waa u bannaan tahay isla Garsooraha ku soo saaray go'aannada sida waafaqsan qodobbada madaxaan, inuu wax ka bedcelo go'aannadaas ama ka noqdo.

BUUGGA AFRAAD

HABKA FULINTA

BAABKA KOOWAAD

MADAXA KOOWAAD

WAXYAALAHA LA FULIN KARO

Qodobka 338aad

Waxyaalaha la fulin karo

Waxaa khasab lagu fulin karaa waxyaalaha leh xoogga fulitaanka ee ku saabsan xaq sugan, oo xaddidan oo isla markaas la weydiisan karo.

Waxyaalaha xoogga fulitaanka lihi waa kuwan:

b.) Xukunnada iyo go'aannada kale ee Garsooruhu soo saaro ooXeerka si cad u siinayo xoogga fulitaanka;

t.) Qoraalada heshiisiinta garsooridda iyo kuwo Xeerku si cad u siinaayo xoog fulitaan.

j.) Kambiyaalayaasha iyo warqadaha kale ee amaahda iyo waraqadaha uu Xeerku si cad u siinaayo awooddaas.

x.) Qoraalada uu sugo nootaayuhu ama sargaal guud ee Xeerku awood u siinayo, qoraaladaas oo ku saabsan xil mablaq lacageed.

Qodobka 339aad

Caddaynta fulinta

Waxaa ku waajib ah Kaaliyaha, Nootaayaha ama sargaalka guud in ay ku caddeeyaan xukunnada, go'aannada kale ee ka soo baxda hay'adda Garsooridda iyo qoraalada heshiisyada iyo warqadaha uu sugayo Nootaayuhu ama sargaalka guud si ay u lahaadaan fulitaan khasab ah isagoo ku kor qoraya hadalkaan soo socda «Warqaddani waxay leedahay xoog fulitaan».

Waa in lagu hubsadaa saxiixa qofka caddeynaya shabbadda Kaaliyaha, Nootaayaha ama sargaalka guud oo la saaro.

Nuqul ka mid ah caddayntaas waxaa la siin karaa oo keliya qofka wax loo xukumay ama dartiisa xilka loo sameeyey ama qofka dhaxalkiisa leh, waxaana waajib ah in nuqulka hoostiisa lagu tilmaamo qofka loo soo saaray.

Kaaliyaha, Nootaayaha ama sarkaalka guud waa inuu ku muujiyaa warqadda asalka ah nuqulka la baxshay.

Qodobka 340aad

Nuqullada leh qaabka fulitaanka

Ma bannaana in la siiyo dhinac keli ah wax ka badan hal nuqul oo leh xoog fulitaan haddii ayna jirin sabab caqliga gasha.

Dhinaca danta ku leh ayaa weydiisan kara nuqullada kale marar-ka lagu sheegay xarfaha b) iyo t) ee qodobka 338, waxayna weydiisan karaan madaxa xafiiska soo saaray go'aanka ama saxiixay qoraallada heshiiska, waxaana la warsan karaa xaaladda lagu sheegay xarafka x) ee isla qodobkaas, Maxkamadda qortay warqadda awoodda leh.

Tillaabooyinka ku saabsan weydiisashada waxaa lagu soo saara-yaa amar.

Madaxa xafiiska ama Garsooraha awoodda leh sida ay dhigayso qaybta labaad ee qodobkan, ayaa ku ciqaabayo kaaliyaha, Nootaayaha ama sarkaalka guud ee khilaafa axkaanta qodobkan — ganaax aan ka badnayn Sh. SO. 500 asagoo ku soo saaraya amar.

Amarkaas ganaaxa ah wuxuu leeyahay xoog fulitaan.

Qodobka 341aad

Warqadda xoogga fulitaanka leh oo lidka ku ah dhaxaltooyada

Warqadda xoogga fulitaanka leh ee lidka ku ah qofka dhintay waxay ku leedahay isla xooggaas lidka ah dadka dhaxlayo marka deynluhu soo gaarsiiyo.

Waxaa lagu gaarsiin karaa dadka dhaxalka leh iyagoo wada dhan oo aan la kala caddayn magacyadooda iyo sifaadkooda meeshii deg-siimo ugu dambeysay qofka ay dhaxlayaan sano gudaheed ee laga soo bil-laabayo waqtigii dhimashada.

Qodobka 342aad

Gaarsiinta amarka gudashada.

Haddii qaanuunka si kale uuna fareynin, waa in loo hormariyaa deynqabaha iyo dadka dhaxlaaya laf ahaantooda digniinta amarka gudashada, markii laga reebo xaaladda lagu sheegay qaybta labaad ee qodobka hore.

Hase yeeshee Garsooraha waxaa u bannaan inuu soo saaro amar fulin ah oo degdeg ah, sida waafaqsan qodobka 350, ayadoo la horma-rin digniinta amarka gudashada, haddii uu dib u dhacu keenaayo dhi-baato.

Waajib ma ahan digniinta amarka gudashada haddiiba si toos ah deyn—qabaha lagu billaabay fulinta khasabka, sannad gudaheeda oo laga billaabo taariikhda qoraalka heshiiska, xukunka iyo go'aannnada kale ee lagu tilmaamay xarfaha (b) iyo (t) ee qodobka 338, ama taariikhda dhicidda muddada gudashada xilalka lagu tilmaamay xarfaha (j) iyo (x) ee isla qodobkaas.

Qodobka 343aad

Habka amarka gudashada

Amarka gudashadu waa digniinta oofinta xilka ku dhigan warqadda leh xoogga fulitaanka muddo aan ka yarayn (10) beri dhexdood iyadoo lagu dhigayo in markii la oofin waayo la qaadayo tallaabooyinka waajibka u ah fulitaanka khasabka ah.

Waa in laga helaa amarka fulinta si uusan u burin magacaabidda dhinacyada, meesha ay deggan yihiin, tirada warqadda leh xoogga fulitaanka, taariikhdeeda inta ay le'eg yihiin waxaa la doonayaa in la gudo iyo taariikhda uu sugo Kaaliyuhu, Nootaayuhu ama sargaalka Guud ee awoodda leh in warqadda u suubato fulitaan.

Haddii fulitaanku ku saabsan yahay Kambiyaale ama warqadaha kale ee amaahda ee ku tilmaaman xarafka (j) ee qodobka 338, waxaa waajib ah in laga helo amarka gudashada nuqul koobaya wax allaale waxa laga helo warqadda leh xoogga fulitaanka iyo sugidda gaarsiiyaha in nuqulku waafaqsan yahay kan asalka ah si buuxda.

Waxaa kaloo waajib ah in laga helo amarka gudashada caddaynta meesha uu qofku soo warsaday gudashada dhab ahaan deggan yahay ama tag—tago ee ka mid ah soohdinta ay ku taal Maxkamadda awoodda u leh fulinta. Haddii aan laga hadlin degsiimadiisa waa in gaarsiinta loo dhigaa Xafiiska Kaaliyayaasha Maxkamadda.

Waxaa waajib ah in uu saxiixo amarka gudashada dhinaca ama Wakiilkiisa.

Qodobka 344aad

Dhicidda xoogga ee digniinta

Digniintu wey waayeysaa xooggeeda, haddii 90 beri oo ka billaabato maalinta la gaarsiiyey aan la billaabin fulinta.

Haddii digniinta laga keeno ka hortag muddada waa la joojinayaa, waxayna u socon aysaa sida waafaqsan qodobka 440.

Qodobka 345aad

Muddada digniinta

Ayadoo laga reebaayo xaalaadka lagu sheegay faqradaha labaad iyo tan saddexaad ee qodobka 342aad, lama billaabi karo fulinta khasabka ah haddii aysan dhammaan muddada lagu tilmaamay digniinta.

## MADAXA LABAAD

## LA WAREEGAA FULINTA KHASABKA EE MULKIYADDA GUUD AHAAN

Qodobka346aad

Garsooraha awoodda u leh la wareegga

Garsooraha jooga meesha laga helo xoolaha fulintu ku socoto ayaa iska leh maamulka fulinta, ama haddii waxa fulintu ku socoto yihiin amaah, meesha uu deggan yahay deynqabaha.

Go'aanka la fulinaayo, haddii uu ku dhawaaqay Garsoore Degmo, waxaa awoodda iska leh Garsooraha degmada, waxaa awoodda iska leh Garsooraha Gobolka, haddii go'aanku ku dhawaaqay Garsoore Gobol.

Haddii la wareegga mulkiyadda ee khasabka hantida ah uu ku dhisan yahay warqad ka geddisan go'aan, awoodda waxaa iska leh Garsooraha degmada ama kan Gobolka, ayadoo la fulinaayo in qiimaha warqadda fulinta xoogga leh uusan ka badneyn ama ka badan yahay Sh. SO. 3000.

Qodobka 347aad

Waqti u qabashada Fadhiga

Garsooraha naftiisa ayaa amarkiisa ku qabanaaya waqtiga fadhiga, fadhigaasoo ay ka soo qayb gelayaan deynlaha wax loo qabanaayo, deynlahayaalka soo dhexgalay, deynqabaha iyo dadka kale ee danta ku leh, sidaa haddii qaanuunku farayo ama Garsooraha ay la noqoto lagama maarmaan dhinacyada ama dadka kale ee dan ku leh, haddii ay jiraan in la dhegeysto.

Amarkaas dhinacyada waxaa gaarsiinaaya Kaaliyaha.

Haddii ay caddaato in dhinacyada midkood uusan imaanin sabab uu waxba ku lahayn awgeed, Garsooraha wuxuu qabanayaa fadhi cusub, kaasoo kaaliyaha uu gaarsiinayo dhinaca aan imaan.

Qodobka 348aad

Qaabka weydiisashada iyo jawaabta

Haddii uu qaanuunku si kale fareynin, arjiyada iyo weydiisyada waa in lagu soo gudbiyaa af ahaan, markii la soo jeediyo fadhiga dhex-diisa, ama arji la dhigaayo xafiiska Kaaliyaha mararka kale.

Qodobka 349aad

Qaabka tillaabooyinka Garsooraha

Garsooruhu tillaabooyinkiisa wuxuu ku qaadanayaa amarro oo asaga naftiisa wax ka beddeli karo ama ka noqon karo ka hor inta aan la billaabin fulinta — haddii laga reebo mararka qaanuunka si ka-le faraayo.

Waxaa lagu dabbaqayaa amarrada Garsooraha axkaanta xeerkan in-ta ay suurtoobi karayso in lagu dabbaqo.

Qodobka 350aad

Billaabidda la wareegga mulkiyadda

Haddii laga reebo xaaladda lagu sheegay qodobka 372, faqradda labaad, la wareegga khasabka ah wuxuu ku billaabanayaa qabashada.

Deynluhu rukhsadda qabashada wuxuu warsanayaa Garsooraha asagoo keenaya arji ay la socoto warqadda leh xoogga fulinta iyo dig-niinta haddii ay jirto wuxuuna dhigayaa xafiiska Kaaliyaha.

Haddii digniinta gudashada hore loo gaarsiiyey, ma bannaana in la keeno arjiga la wareegidda milkiyadda, haddii ayna dhammaan mud-bada lagu sheegay faqradda koowaad ee qodobka 343.

Garsooruhu wuxuu ku ıdmayaa qabashada amar markuu hub-sado kaddib ansaxidda qaabka tillaabooyinka ee warqadda leh xoogga fulinta iyo digniinta haddii ay jirto.

Qodobka 351aad

Galka fulinta

Markii la keeno arjiga lagu weydiisanayo qabashada kaaliyuhu waa inuu u diyaariyaa gal weydiisasha kasta oo ku saabsan fulinta, waxaana lagu ridayaa dhammaan warqadaha oo uu soo saaro Garsoo-ruhu ama Kaaliyuhu ama Gaarsiiyuhu iyo dhammaan warqadaha iyo Dokumentooyinka ay keenaan dhinacyadu iyo dadka danta ku leh haddii ay jiraan.

Qodobka 352aad

Qabashada

Qabashadu waxaa weeye amar loo jeedinayo deynqabaha in uusan ku kicin shaqo keeneysa jebinta xaqa dammaanadda ee ku saabsan xoolaha fulitaanka loo qabtay iyo mirahooda.

Qodobka 353aad

U dhiibista deynka gaarsiiyaha

Waxaa u bannaan deynqabaha in uu u dhiibo gaarsiiyaha isagoo isaga celinaya qabashada xoolihiisa lacag le'eg midda loo samaynayo fulitaanka iyo kharajka iyadoo lagu wareejinayo deynlaha, waxaa xisaabta lagu darayaa in loo celinayo deynqabaha lacagtaas haddii aan mutaysan.

Qodobka 354aad

Beddelaadda qabashada

Waxaa deynqabaha u bannaan xaalad kasta ee dacwaddu marayso gadidda ka hor in uu warsado Garsooraha in qabashada la saaray xoolihiisa laga wareejiyo oo lagu beddelo in lacag ah oo u dhigmaya kharajka iyo xuquuqda deynlaha xoolaha loo qabtay iyo deynlayaasha soo dhexgalay.

Garsooraha ayaa amar ku xaddidaya kaddib markii uu dhinacyada dhegeysto lacagta geleysa meesha xoolaha la qabtay isagoo amraya in qabashada laga qaadayo xoolaha la qabtay loona wareejinayo lacagta la keenay.

Qodobka 355aad

Dhismaha qabashada

Waxaa u bannaan Garsooraha asagoo tixgelinaaya weydiisashada deynqabaha ama iskiiba ka dib markuu dhegeysto deynlaha xoolaha loo qabtay, iyo deynlayaasha soo dhexgalay in uu amro dhimidda qabashada marka qiimaha xoolaha la qabtay ay ka badan tahay tan kharajka iyo amaahda lagu xusay qodobka hore.

## Qodobka 356aad

### Ogeysiinta deynlayaasha qoran

Waxaa waajib ku ah deynlaha xoolaha qabtay (5) shan maalmood dhexdooda laga billaabo maalinta qabashada dhammaatay, inuu gaarsiiyo deynlayaasha ku sheeganayo xoolaha la qabtay xaq leh horumarin ee lagu caddeeyey Ragistarada Guud, ogeysiin koobeysa tilmaamo ku saabsan deynlaha xoolaha loo qabtay, amaahda fulintu daraadeed ku socoto, warqadda iyo xoolaha la qabtay.

Haddii ay sugnaato in xoolaha la qabtay, horey loo qabtay dhawris ahaan waxaa waajib ah in ogeysiinta lagu sheegay qaybta hore la gaarsiiyo xataa kan dhawris ahaan u qabtay xoolaha.

Waxaa waajib ah in la dhigo asalka ogeysiinta xafiiska Kaaliyaha ee Maxkamadda 5 beri dhexdood laga billaabo maalinta ay dhammaatay Gaarsiinta. Garsooraha ma amri karo gadidda haddii aan la sugin in la helay gaarsiinta.

## Qodobka 357aad

### Soo dhexgalka deynlayaasha

Waxaa soo dhexgeli kara fulinta deynlayaasha lagu tilmaamay qodobka hore ka sokow, deynlayaasha kale xataa haddii ayna lahayn xaqa horumarinta.

Dhexgalku waxaa lagu sameynayaa weydiisashada loo geynayo Garsooraha oo koobaysa tilmaanta amaahda warqadda ay ku dhisan tahay caddaynta degmada iyo degitaanka la doortay ee ku yaal meesha Garsooraha xafiiskiisu yahay.

Waxaa waajib ah in lagu soo lifaaqo weydiisashada warqadda caddeynta amaahda.

## Qodobka 358aad

### Waxyaabaha ka dhasha soo dhexgelidda

Soo dhexgeliddu waxay siinaysaa xaq ka qayb gelidda la wareegidda mulkiyadda ama qaybinta lacagta ka soo baxda, iyo haddii soo dhexgaluhu haysto warqad leh xoogga fulinta in uu beddelo la wareegidda dhexdeeda deynlaha wax qabtay haddii kaasi shaqada wadi waayo.

## Qodobka 359aad

### Dhammaan jidadka la wareegidda

Waa u bannaan tahay deynlaha in uu ku isticmaalo dhammaan jidadka kala geddisan ee la wareegidda khasabka ah ee lagu sheegay xeerka, waase u bannaan tahay deynqabaha inuu weydiisto Garsooraha in uu xaddido jidka la wareegidda kaasoo ku soo saarayo amar aan la duri karin.

## MADAXA SADDEXAAD

## FULITNA GUURTADA EE DEYNQABAHA

### Qodobka 360aad

#### Tilmaanta Xoolaha deynqabaha

Waxaa waajib ku ah deynlaha doonaayo fulin ku saabsan guurtada inuu ku sheego weydiisashada lagu xusay qodobka 350, xataa si kooban, xoolaha deyn qabaha ee uu doonaayo in la qabto iyo meesha laga helayo.

Garsooruhu marka uu rukhsaynaayo qabashada sida uu qabo qodobka 350 wuxuu u dirayaa fulinta gaarsiiyeyaasha raacsan Xafiiskiisa, ama mid ka mid ah Sarkaal Booliska Garsoorka, haddii meesha fulinta lagu samaynaayo ay ka duwan tahay fadhiga Maxkamadda.

Kaaliyuhu nuqul ka mid ah amarka ayuu u dhiibayaa gaarsiiyaha Maxkamadda si shaqada uu u wado.

### Qodobka 361aad

#### Baaridda waxyaabaha la qabanaayo

Waa u bannaan tahay gaarsiiyaha Maxkamadda ee qaba nuqulka amarka lagu sheegay qodobka hore, inuu ka baaro waxyaabaha la qabanaayo Guriga deynqabaha, iyo meelaha kale ee uu leeyahay.

Waxaa kale oo u bannaan in deynqabaha qof ahaan uu u baaro, asagoo ku dadaalaayo in Sharaftiisana wax u dhimin.

Ugu dambeysta waxaa u bannaan in uu baaro waxyaabaha la qabanaayo ee aan laga helin meelaha uu leeyahay deynqabaha, laakiinse laga helaayo meela kale ee deynqabuhu si toos ah ugu tasarruufi karo.

Haddii gaarsiiyaha ay ka hor yimaadaan dhibaatooyin, wuxuu u tasaaruufayaa kolba sida duruufta ay tahay, asagoo warsan kara, haddii uu u baahdo kaalmada xoogga nabadgeliyada guud (forza Publica).

Waa u bannaan tahay deynlaha wax loo qabanaayo inuu ka soo qeyb galo qabashada.

### Qodobka 362aad

#### Waxyaabaha guurtada ah ee marnaba ayna bannaaneyn qabashada

Waxyaabaha sharciyada gaarka ah ay caddeeyeen inaan la qaban karin ka sokow, waxaa aan la qaban karin oo kale waxyaabaha soo socda:

b). Waxyaabaha xagga diinta qiimaha ku leh iyo waxyaabaha kale ee loogu isticmaalo Cibaadada;

t). Dharka, Dhiinsoolayaasha, Sariiraha, Maacuunka Guriga iyo Jikada oo deynqabaha iyo xubnaha reerkiisa ee asaga la nool, ayna ka maarmeyn.

j). Waxa la shito iyo waxa la cuno ee uu u baahan yahay hal bil deynqabaha iyo dadka lagu tilmaamay xarafka hore;

x). Alaabta, waxyaabaha iyo Kutubta ee deynqabaha uu ugu baahan yahay wadidda xirfadda farsamada iyo shaqada;

Kh). Hubka iyo waxyaabaha ay deynqabaha waajib ku tahay inuu dhawro si uu u guto shaqo guud;

d). Billadaha qiimeynta, kutubta, rejiistaraaa iyo guud ahaan warqadaha reerka, haddii laga reebo kuwa ka mid ah warqadaha tixan.

Ma bannaana mar kastaba in la qabto xoolaha dawladda ha ahaadeen kuwa guud ah ama kuwa gaarka ah.

### Qodobka 363aad

### Guurtada ay bannaan tahay in shuruud lagu qabto

Ma bannaana qabashada guurtada ee qofka beerta leh uu u haysto shaqada iyo falidda beerta ilaa haddii laga waayo guurto kale, hase yeeshee Garsooraha waxaa u bannaan haddii uu warsado deynqabaha ka dib marka uu dhegeysto deynlaha inuu qabashada kaga saaro ama aan la duri karin waxyaabaha kor lagu sheegay ee lagama maarmaan u ah falidda beerta, ama wuxuu oggolaan karaa isticmaalkooda xataa ayagoo la qabtay, haddii la dhiibo dammaanad ku filan dhawristooda iyo samayntooda.

### Qodobka 364aad

### Guurtada ay bannaan tahay qabashadeedu amar khaas ah

Ma bannaana qabashada miraha aan la goyn ama aan laga guran dhulka ayagoo soocan maguurtada ay ku dheggan yihiin ka hor lix toddobaad bislaashahooda caadiga ah, haddii laga reebo marka deynlaha xoolaha loo qabtay uu oggolaado kharajka dheeraadka ah ee ilaalinta.

### Qodobka 365aad

### Doorashada Xoolaha la qabanaayo

Waxaa waajib ah in qabashada lagu fuliyo waxyaabaha uu tilmaamaya deynqabaha, haddii sidaa ayna dhibaato ugu jirin deynlaha.

Markasta waxaa waajib ku ah gaarsiiyaha Maxkamadaa inuu doorto lacagta caddaanka ah, waxyaabaha qiimaha leh iyo waxyaabaha loo malaynayo inay kafaala qaadayaan gudidda deynka.

Qodobka 366aad

Qaabka qabashada

Gaarsiiyaha Maxkamadda wuxuu ka samaynayaa hawsha uu qabanaayo qoraal uu ku caddeynaayo digniinta lagu sheegay qodobka 352, waa inuu tilmaamaa waxyaabaha la qabtay, asagoo xaddidaayo qayaas ahaan qiimahooda, waa in uu ka sameeyaa qoraal amarrada uu ku soo saaray ilaalinta iyo dhawrista sida waafaqsan qodobka soo socda.

Haddii deynqabaha uusan joogin, digniinta qabashada waxaa loo dhiibayaa qof reerka ka mid ah, guriga ka shaqeeya, ama xafiiska, ama Warshadda, kaasoo loogu dhiibayo deynqabaha ogeysiiska digniinta, waxaase shardi ah qofka digniinta loo dhiibayo da'diisa inayna ka yaraan 14, si cadna Maskaxdiisa wax uga dhinayn.

Haddii dadkaas la waayo, Gaarsiiyuhu wuxuu ogeysiiska ku dhejinayaa albaabka maguurtada ee dhexdiis lagu fuliyey qabashada.

Waxaa waajib ku ah gaarsiiyaha qabashada uu sameeyey in uu dhigo xafiiska kaaliyaha ee Maxkamadda 5 beri dhexdood maalinta ay hawsha dhammaatay, qoraalka iyo amarka oggolaanshaha qabashada.

Qodobka 367aad

Ilaalinta Xoolaha Guurtada ah ee la qabtay

Waxaa waajib ku ah gaarsiiyaha inuu u dhiibo Kaaliyaha lacagta, warqadaha amaahda iyo waxyaabaha qiimaha leh ee la qabto.

Waxyaabaha kale gaarsiiyuhu wuxuu ku dhowraayaa isagoo geeya meelaha wax la dhigto oo caanka ah, ama wuxuu u dhiibayaa ilaaliye oo noqon kara xataa dhinacyada midkood, haddii qof kale la waayo dhinaca kalena is-hortaagin.

Waxaa waajib ku ah ilaaliyaha inuu dhawro guurtada la qabtay isagoo u haynaaya caddaaladda umana bannaana in uu ku isticmaalo haddii uuna ruqsayn Garsooruhu.

Qodobka 368aad

Waqtiga fulinta qabashada

Ma bannaana fulinta qabashada maalmaha qaanuun ahaan Ciidaha ah, mana bannaana fulinta qabashada ka hor 6da saac ee aroornimo iyo kaddib 6da galabnimo haddii Garsooruhu rukhseeyo mooyee. Waa bannaan tahay in la dhammeeyo fulinta qabashada ee la billaabay saacadaha uu qaanuunka rukhseynaayo.

## Qodobka 369aad

### Weydiisashada qabashada raacsiinta ah

Haddii qof loo jeediyo arjiga lagu xusay qodobka 350 ayna sugnaato in horey xoolihiisa loo qabtay si hagaagsan, Garsooruhu wuxuu ku ekeysiinayaa qabashada xoolaha kale ee deynqabaha haddii la tilmaamo.

Haddii ayna xoolo harin, weydiisashada waxaa lagu lifaaqayaa galkii loo sameeyey qabashada hore waxaana ka dhalanaayo soo dhexgelidda xagga xoolaha la qabtay.

Waxaa u bannaan deynlaha in uu warsado Garsooraha inuu u rukhseeyo Gaarsiiyaha in uu baaro una qabto xoolaha kale deynqabaha ee aan horey loo qaban.

## Qodobka 370aad

### Habka siismada iyo rukhsadda gadidda

Garsooruhu wuxuu soo saarayaa amar uu ku qabanaayo fadhiga imaanshaha deynlaha wax loo qabanaayo, deynqabaha, deynlayaasha soo dhexgalay iyo dadka kale ee danta ku leh ka dib marka la dhigo xafiiska kaaliyaha qoraalka qabashada.

Kaaliyaha wuxuu ku ogeysiinayaa Xaanshidiisa dhinacyada qabashada fadhiga.

Waxaa u bannaan dhinacyada in fadhiga ka soo jeediyaan ra'yigooda oo ku saabsan waqtiga iyo habka gadidda. Garsooraha waxaa u bannaan, haddii ay jiraan asbaab caqli gasha inuu u oggolaado deynqabaha inuu deyntu u bixiyo kis-kis, ama u qabto muddo uu deynta ku guto

Asagoo tixgelinaaya weydiisashada deynlaha wax loo qabanaayo ama deynle kale ee haysta warqad leh xoog fulitaan, Garsooruhu wuxuu farayaa gadidda naadada ah, asagoo xaddidaaya maalinta, saacadda, meesha iyo sicirka billowga ah.

Gaarsiiyaha Maxkamadda ayaa fulinaaya gadidda guurtada. haddii uu macduur noqdo Garsooruhu wuxuu wakiilan karaa Sarkaal ka mid ah Booliska «Garsooridda».

## Qodobka 371aad

### Gadidda Miraha (caliqan) laalan.

Ma bannaana in la faro gadidda miraha laalan ilaa waqtiga bislahaanshaha mooyee, ayadoo laga reebaayo waxyaabaha caadaadka maxalliga ay qabaan.

Waa u bannaan tahay Garsooraha in dib uu u dhigo gadidda waxyaabaha lagu sheegay qodobka 363 inta loo baahan yahay ee loo raalli geli karo dhibaatada Warshadda beerta ah.

### Qodobka 372aad

### Gadidda rahamka

Iyadoo laga reebaayo axkaanta gaarka ah ee xeerka Madaniga, fulinta ku saabsan waxyaabaha loo dhiibay rahan ahaan waxaa la raacayaa qodobbada xeerkaan; laakiin fulinta waa in laga hor mariyaa gaarsiinta digniinta amarka gudashada.

Gadidda waa la warsan karaa ayadoo aan laga hormarin qabashada; deynlahu waa inuu u keenaa Garsooraha dalab uu ku weydiisanayo gadidda muddada digniinta amarka gudashada ay xoogga leedahay dhexdeed.

### Qodobka 373aad

### Faafinta amarka gadidda

Kaaliyaha waa in toban beri ka hor maalinta gadidda loo qabtay ku dhejiyaa amarka gadidda oo kooban meesha xaanshiyaha lagu dhejiyo ee Maxkamadda, laguna faafiyo isla muddadaas hal wargeys dalka ku faafsan.

Garsooraha, haddii ay la habboonaato wuxuu fari karaa qaabab kale ee faafin ah.

Dhinacyada ayaa bixinaaya kharajka faafinta.

### Qodobka 374aad

### Sida loo samaynayo gadidda

Waxaa waajib ku ah qofka loo xilsaaray gadidda isagoo ka qaybgelinaayo kan ilaalinta xoolaha loo dhiibey in uu hubsado hor iyo horaan waxyaalaha ay waajibka tahay in la gado in ay yihiin isla kuwa ku qoran warqadda qabashada.

Waxaa lagu gadayaa alaabta lacagta asaasiga ah ee Garsooruhu xaddiday. hal-hal ha loo gado ama qayb-qayb hadba sidii habboon ee lagu heshiiyo.

Waxaa waajib ku ah qofka naadada lagu baariyey in uu haddiiba dhiibo Lacagta uu ballanqaaday iyo kharajka diiwaan gelinta qoraalka haddii kale waxba kama jiraan ballanqaadkiisa, waxaana la qabanayaa ballanqaadyada kan ugu weyn.

Waxaa waajib ku ah qofka loo xilsaaray gadidda in uu u sameeyo wax alllaale wixii shaqo dhammaaday qoraal, waana in la dhigaa xafiiska kaaliyaha Maxkamadda ayadoo ay la socdaan lacagta gadidda

Xilka diiwaan gelinta qoraalka wuxuu saaran yahay Kaaliyaha

Qodobka 375aad

Soo laba celinta naadada

Haddii ayna dhammaan gadidda sheyga la doonaayo in la naadiyo Kaaliyuhu wuxuu sidaas u sheegayaa garsooraha oo xaddidayo taariikh naado kale oo uu ku aqbalayo ballanqaad kasta kaddib markii uu dhegeysto dhinacyada haddii sidaas loo baahdo.

Ma bannaana in lagu gado Dahabka iyo Qalinka qiima ka yar kan u gaarka ah si kastaba arrintu ha noqotee.

Qodobka 376aad

Qaybinta lacagta ka soo baxda fulinta

Kaddib markii la keeno qoraalka gadidda iyo lacagta ka soo baxday fulitaanka ayaa Garsoorahu amar ku xaddidayaa fadhi lagu qeybinaayo lacagta laga helay fulinta.

Wuxuu kaaliyuhu gaarsiinayaa sidaas degdeg ahaan deynlaha warsaday fulinta iyo deynqabaha lagu fuliyey iyo dhinacyada kale ee soo dhexgalay.

Fadhi dhexdiisa ayaa garsooruhu amrayaa in deynlaha haddii uu yahay hal keliya in la siiyo xaqiisa.

Haddii kale waxa laga helay fulinta wuxuu u qaybiinayaa deynlayaasha iyadoo la ilaalinayo xuquuqda imtiyaaska ah.

Wixii soo hara kaddib markii la bixiyo deynta wuxuu amrayaa Garsooruhu in loo celiyo deynqabaha wax lagu fuliyey.

Haddii dhinacyadu isku qabtaan jiridda ama inta uu yahay xaqu, ama jiridda xuquuqda imtiyaaska ah Garsooruhu kaddib markii uu kala hubsado, ayuu taas xukun ku kala saarayaa si waafaqsan habka dacwadaha caadiga ah.

Waxaa u bannaan Garsooraha in uu qaybiyo lacagta ka soo baxday fulinta ee aan la isku haysan haddii ayna u muuqan in ay habboon tahay in uu joojiyo qaybinta dhammaanteed ilaa iyo intii khilaafka la dhammaynaayo.

## MADAXA AFRAAD

## FULINTA KU SAABSAN MULKIYADDA DADKA SADDEXAAD

### Qodobka 377aad

### Habka Qabashada ee dadka saddexaad

Daynlaha doonaaya inuu qabto deynta deynqabaha uu ku yeelahay dad saddexaad (kale) ama waxyaabaha deynqabaha ee dadka kale ay haayaan waa inuu ku tilmaamaa arjiga lagu xusay qodobka 350 waxyaabaha iyo lacagaha uu doonaayo in loo qabto.

Garsooruhu wuxuu ku rukhseynayaa amar qabashada waxyaabaha ama lacagaha laga helo dad kale agtooda ee arjiqoraha uu tilmaamay, wuxuuna uga digayaa qofka kale inuuna ku tasaruufin waxyaabahaas iyo lacagahaas amar la'aantiisa.

Isla Dekereetadaas, wuxuu amar ku bixin karaa inay yimaadaan hortiisa deynlaha weydiistay qabashada, deynqabaha iyo qofka saddexaad si uu u sameeyo qofka saddexaad caddaynta lagu sheegay qodobka 381 kana dood celiyo dhinacyada kale.

Kaaliyaha waa inuu gaarsiiyo deynqabaha iyo qofka saddexaad nuqulka arjiga iyo amarka ugu yaraan toban beri ka hor maalinta fadhiga loo qabtay. Isla muddadaas kaaliyaha waa inuu amarka ka siiyo ogeysiis deynlaha arjiga qortay.

### Qodobka 378aad

### Rahanka ee dammaanad u ah amaahda la qabtay

Haddii amaahda la qabtay ay leedahay dammaanad rahan, qofka rahankaas loo sameeyey Gorsooraha amar la'aantiisa sheygaas ma chiibi karo.

Haddii amaahda ay leedahay dammaan rahan maguurto ah, warqadda qabashada waa in lagu kor calaameeyaa buugagga maguurtada ah, hawlahaasna waxay saaran tahay deynlaha weydiisashada qortay.

### Qodobka 379aad

### Amaahda aan la qaban karin

Lama qaban karo amaahda ku saabsan nafaqada, haddii laga reebo dacwadda nafaqada middaasna waxay u baahan tahay amarka Garsooraha iyo inta uu qaddiro.

Ma bannaana in la qabto amaahda ku saabsan kaalmada hooyada la siiyo, jirro, iyo aasid, kaalmadaas oo bixiyaan Caymiska, Wakaaladaha «Macaahidka kheyrka».

Mushaharka, gunnadaha kale iyo jeegagga la siiyo shaqaalaha dadka gaarka ah u shaqeeya, Dawladda iyo Wakaaladaha Guud waxaa laga qaban karaa inta soo socota:

b). ilaa saddex meelood ka meel oo lagu qiyaasay caddaan, haddii qabashada ku saabsan tahay masruuf;

t) ilaa afar meelood ka meel oo lagu qiyaasay caddaan mararka kale.

Qabashada Isla marka ah ee xaaladaha kor lagu sheegay ma bannaana inay ka badato saddex meelood ka meel.

Qodobka 380aad

Waajibaadka dhinaca saddexaad

Waxaa waajib ku ah dhinaca saddexaad wax allaale wixii uu qaynuunku ku waajib yeelayo qofka loo dhiibayo ilaalinta xagga xoolaha iyo lacagta lagu mutaystay oo laga billaabo markii la gaarsiiyey amarka ku soo arooray qodobka 377.

Qodobka 381aad

Caddaynta Dhinaca Saddexaad

Waxaa waajib ku ah dhinaca saddexaad inuu fadhiga loo xaddiday ka caddeeyo isaga ama Wakiilkiisa gaarka ah lacagta lagu leeyahay iyo goorta ay waajibka tahay inuu bixiyo ama dhiibo.

Haddii arrintu ku saabsan tahay lacag lagu mutaystay dadka ama hay'adaha lagu tilmaamay qaybta saddexaad ee ka mid ah qodobka 379, waxaa waajib ku ah caddeeyaha in uu xaddido haddana inta saafida ah kaddib markii lagala haro waxyaalaha la jaro iyo lacagta uu qaadanaayo goorkasta qofka isaga raacsan shaqada daraadeed, ha u qaato si mushaar ah, ajuuro, abaal gud ama bensiyooni ahaan.

Haddana waxaa waajib ku ah dhinaca saddexaad in uu sheego qabashooyinka dhawritaanka ah ee horey loogu soo saaray, markaasna Garsooruhu wuxuu amrayaa in hortiisa haddana la keeno qofka loo sameeyey qabashada dhowrista ah.

## Qodobka 382aad

### caddeyn la'aanta dhinaca saddexaad

Haddii uusan dhinaca saddexaad imaan fadhiga loo xaddiday Garsooruhu dib buu ugu dhigayaa, Kaaliyuhuna wuxuu sidaas ogeysiinayaa dhinacyada isagoo warqad uga diraya xafiiska.

Haddii uusan dhinaca saddexaad haddana imaan fadhiga labaad ama intuu yimaabo uu diido in uu dhiibo caddayn waxaa u bannaanaayo Garsooraha in uu u qaato aamuskiisa sidii qof oggolaaday caddaynta in uuna ka qaado tillaabooyinka lagu caddeyey qodobka 386 iyo 387 isagoo ku soo saaraya go'aan la duri karin.

## Qodobka 383aad

### Isku khilaafka caddaynta dhinaca saddexaad

Haddii la isku khilaafo caddaynta dhinaca saddexaad Garsooruhu intuu go'aan ku joojiyo tallaabooyinka fulitaanka, ayuu hubsanayaa, go'aanna ka gaarayaa khilaafka ku saabsan caddaynta si waafaqsan hababka caadiga ah loogu fiiriyo dacwadda.

Haddii ay sidaas ku sugnaato in uu jiro xaq deynqabaha ku leeyahay dhinaca saddexaad Garsooruhu wuxuu go'aan ku xaddidayaa fadhi uu isugu yeerayo dhinacyada si loo wado fulitaanka.

## Qodobka 384aad

### Badnaashaha qabashooyinka

Haddii ay sugnaato in qabasho hore oo xoog fulltaan leh lagu soo saaray waxa uu isla deynqabuhu ku leeyahay dhinaca saddexaad, waxaa la raacayaa axkaanta ku qoran qodobka 369.

## Qodobka 385aad

### Soo dhexgalka

Haddii ay soo dhexgelayaan deynlayaal kale waxaa la raacayaa axkaanta qodobka 357iyo 358, waana in uusan dhexgalku ka dabamarin fadhiga loo qabtay caddaynta dhinaca saddexaad.

## Qodobka 386aad

### Gadidda wayaabaha deynqabaha uu ku leeyahay qofka saddexaad

Haddii qofka saddexaad uu caddeeyo ama la caddeeyo inuu hayo waxyaabo uu leeyahay deynqabaha, Garsooruhu wuxuu amrayaa gadidda sida waafaqsan qodobka 370 iyo kuwa la xiriira.

## Qodobka 387aad

### Qaybinta Amaahda

Haddii qofka saddexaad uu caddeeyo ama la caddeeyo inuu qabo deyn lacageed ee gudashadeedu isla markaas tahay ama muddo aan ka badnayn 90 beri ama lacag gudashadeedu bislaaneyso xilli-xilli ka dhalanayso xiriirrada lagu sheegay qodobka 379, Garsooruhu wuxuu u qaybinayaa deynlayaasha, marka laga reebo kharajka, ilaa deynta mid kasta ay la egtahay.

Mararka lagu tilmaamay qodobka 379, qofka saddexaad waa inuu isla markiiba ogeysiiyaa Garsooraha wax dhammaynaaya ama kala goynaya xiriirka shaqada ama sabab kasta ee keni karta dhammaadka ama kala go'idda bixinta u roon deynqabaha.

## Qodobka 388aad

### Rahmidda xaqa la qeybshay rahmid hayn ah

Haddii xaqa la qeybiyey uu ku xiran yahay rahmad haysasho ah Garsooruhu wuxuu amrayaa in la siiyo waxa la rahmay qofka qaybta u helay.

## Qodobka 389aad

### Rahmidda xaqa la qeybshay rahmid rasmi ah

Haddii xaqa qaybta loo helay uu ku xiran yahay rahaamid rasmi ah Garsooruhu wuxuu amrayaa in caddaynta deynluhu qaybta xaqa ugu yeeshay la geliyo tilmaan ahaan diiwaanka maguurtada.

# MADAXA SHANAAD

# KU FULINTA MAGUURTADA

## Qodobka 390aad

### Qaabka qabashada maguurtada

Haddii deynluhu doono in loo qabto xoolo maguurto ah ee deynqabaha leeyahay waa inuu si tifaftiran ugu tilmaamaa arjiga lagu sheegay qodobka 350 xoolaha maguurtada ah, dabeecadooda, meesha laga helo, lambarka diiwaanka maguurtada, haddii ay ku dhigan yihiin iyo ugu yaraan saddex jeho oo xudduudooda ah.

Arjiga waa in lagu lifaaqaa warqadda xoogga fulitaan leh, iyo warqadda digniinta gudashada iyo shahaadada ku qoran yihiin waxyaabaha ciriirinaayo, dulsaaranna maguurtada la qabanaayo.

Amarka Garsooruhu ku rukhseynaayo qabashada maguurtada waxaa deynqabaha laga siinayaa digniinta lagu sheegay qodobka 352.
Qabashada waxay sugnaaneysaa marka Kaaliyuhu gaarsiiyo deynqabaha arjiga iyo amarka qabashada.

Waxaana waajib ku ah gaarsiiyaha isla marka ay dhammaato gaarsiintu, inuu dhigo asalka warqadda Xafiiska Kaaliyaha.

### Qodobka 391aad

### Diiwaan gelinta qabashada maguurtada

Shan beri dhexdood laga billaabo maalinta la dhigay arjiga iyo amarka la gaarsiiyey sida waafaqsan qodobka hore, Kaaliyuhu waa in uu diiwaan geliyaa amarka, una diraa nuqul ka mid ah ee la rumeeyey, lana socoto tilmaamaha ku saabsan dulucda xafiiska diiwaan gelinta maguurtada ee awoodda leh.

### Qodobka 392aad

### Koobidda fulinta qabashada

Haddii deynlaha rahanka leh qabashada uu gaarsiiyo maguurto oo aan u rahmaneyn, Garsooraha waxaa u bannaan in uu dabaqo axkaanta qodobka 355, ama uu joojiyo gadidda ilaa ay ka dhammaato gadidda maguurtada rahman.

### Qodobka 393aad

### Dhawridda xoolaha la qabtay

Gaarsiinta warqadda lagu sheegay qodobka 390, deynqabaha waxaa laga dhigayaa dhowraha maguurtada la qabtay iyo dhammaan wixii la xiriira, kuma jiraan waxa maguutarda raacsan iyo miraha, umana yeelanayo xaq abaalgud.

Garsooraha fulinta, asagoo tixgelinaaya dalabka deynlaha wax loo qabanaayo ama deynlaha soo dhexgalay, kaddib markuu dhegeysto deynqabaha, waxaa u bannaan in uu magacaabo dhawre kale ee ka duwan deynqabaha.

Xaaladdan dhawruhu wuxuu xaq u leeyahay abaalgud uu Garsooruhu amar ku qoynayo,

### Qodobka 394aad

### Habka dhowrista

Deynqabaha iyo qofka saddexaad ee loo magacaabay dhawre waa inay xisaab ka bixiyaan maamulkooda sida waafaqsan qodobka 412.

Umana bannaana inay ijaaraan maguurtada la qabtay, haddii Garsooraha sidaa u rukhseynin.

Waxaa amarka Garsooraha ugu bannaan deynqabaha inuu guri ahaan u sii degganaado maguurtada la qabtay, asagoo ka gelaaya inta qol ee ku filan asaga iyo xaaskiisa.

Haddii deynqabaha uu caddeeyo inuusan qabin jidad kale uu ku noolaado Garsooraha waxaa xataa u bannaan inuu u gooyo masruuf laga bixinaayo dakhliga maguurtada inta ay la egtahay baahidiisa ilaa waqtiga gadidda xaraashka ahi.

Rukhsadda lagu sheegay qaybaha hore waxaa bixinaaya Garsooraha, kaddib markuu dhegeysto dhinacyada iyo dadka kale ee danta ku leh.

### Qodobka 395aad

### weydiisashada qabashada raacsiinta ah

Xaaladda weydiisashada raacsiinta ah ee ku saabsan maguurtada waxaa lagu dabbaqayaa axkaanta lagu xusay qaybta koowaad iyo tan labaad ee qodobka 369.

### Qodobka 396aad

### Shardiga soo dhexgalka iyo waqtiga

Waa u bannaan tahay inay soo dhexgalaan sida waafaqsan qodobka 357 dhammaan dadka amaah ku sheeganaaya deynqabaha, xataa haddii amaahdaasi tahay mid lagu xiray shardi ama waqti.

Soo dhexgalka waxba ka dhalanmaayo, haddii uu ka dambeeyo fadhiga lagu sheegay qodobka 414.

### Qodobka 397aad

### Xaddididda Fadhiga gadidda

Kaddib markii qoraalka qabashada la keeno buu Garsooruhu amar ku xaddidayaa fadhi ay isugu imaanayaan qofka wax qabsaday iyo deynqabaha iyo deynlayaasha soo dhexgalay iyo kuwa kale ee maslaxadda ku leh.

Kaaliyaha ayaa taariikhda fadhiga ku gaarsiinaya dhinacyada warqadda ka socota xafiiska Kaaliyaha.

Waxaa u bannaan dhinacyada in ay muujiyaan wax ku darkooda ku saabsan waqtiga iyo hannaanka gadidda. Waxaa u bannaan Garsoo-rahia haddii ay jiraan asbaabo la garaysan karo in uu u oggolaado deyn-qabaha in uu deynta u dhiibo si qaar-qaar ah ama in uu u xaddido waqti uu ku bixiyo.

Markii uu soo warsado deynlaha wax loo qabtay ama soo dhex-galaha wata warqad fulitaan ah Garsooruhu wuxuu amrayaa gadidda maguurtada naado ahaan si waafaqsan qodobbada soo socda.

## Qodobka 398aad

### Waxyaalaha laga helayo amarka gadidda

Garsooruhu wuxuu go'aan ka gaarayaa kaddib markii uu dhegeys-to ra'yi khabiir arrimahaan soo socda:-

b). In gadidda la sameeyo hal mar ama maraa badan.

t ) Lacagta asaaska u ah naadada.

j ). Maalinta naadada iyo saacadda.

x). Inta dammaanaddu le'eg tahay, waa in ayan ka yaraan toban meelood meel ka mid ah lacagta asaaska ah iyo ma-khaasiirta gadidda ee la qiyaasay.

kh. Muddada ay waajibka tahay in la soo dhammaystiro waxyaalaha ay tahay in la keeno.

d) Inta ugu yar lacagta lagu dari karo heerka lacagta naadada joogto

r). Muddada ay waajibka tahay in la keeno lacagta iyo hannaanka keenista oo waa in ayna ka yaraan 60 beri laga billaabo maalinta baarinta naadada.

s). Muddada ay waajibka tahay in ay u dhexeyso ku kicidda hababka faafinta iyo naadada iyo habab kale oo faafin ah oo aan ahayn caadi.

Waxaa waajib ku ah kaaliyaha in uu gaarsiiyo go'aankaas danle-yaasha liistada isku soo qoray oo aan imaan fadhiga, waana in uu ku ogeysiiyaa sida waafaqsan qaabka lagu caddeyey qodobka 397.

## Qodobka 399aad

### Wakiilashada fulinta gadidda

Haddii laga helo xoolaha la qabtay qaarkood meel Maxkamad kale awood u leedahay waxaa u bannaan Garsooraha in uu amro marka uu soo saarayo go'aanka gadidda in gadidda qaarkaas naado ahaan loogu hor gadaa Maxkamadda meesha laga helo xoolaha.

Markaas kaaliyuhu wuxuu suurad ka mid ah go'aanka u dirayaa Maxkamadda loo wakiishay fulinta gadidda.

## Qodobka 400aad

### Dadka loo oggolyahay ka qayb gelidda naadada

Waxaa u bannaan qofka aan deynqabaha ahayn in uu ka qaybgalo naadada haddii uu horey u dhiibey dammaanadda iyo kharajka gadidda la qiyaasay si waafaqsan go'aanka lagu soo xusay Qodobka 398.

Qofka ka qaybgelaya naadada waa in isaga ama wakiilkiisa gaarka ah soo bandhigaa waxa uu ku darayo naadada.

Haddii aan naadada lagu baarin qofka ka qaybgala waa loo celinayaa dammaanadda iyo kharajka la keenay kaddib markii la xiro naadada.

## Qodobka 401aad

### Habka Gadidda Xaraashka ah

Gadidda Xaraashka ah waxaa lagu samaynayaa Garsooraha hortiisa waxaana lagu qabanayaa fadhi furan oo ka dhaca qolka dacwadaha.

Bandhiggu qiimo ma laha haddii uuna ka badnayn sicirka saldhigga ah ama bandhig hore, sida lagu sheegay shuruudaha gadidda.

Bandhig kasta kaddib, Garsooruhu wuxuu samaynayaa asagoo u dhexeysiinaya hal daqiiqo, saddex yeeris dadka ka qayb gelaaya gadidda si ay wax ugu daraan bandhigga. Marka la soo dhaafo daqiiqadda yeeridda ugu dambeysa ayadoo aan la samayn bandhig ka badan, maguurtada waxaa lagu baarinayaa ninka sameeyey bandhigga.

Bandhig kasta oo lacageed wuxuu noqonayaa wax kama jiraan, haddii la helo mid ka badan xataa haddii uu yahay kan dambe mid baadil ah.

Qodobka 402aad

Caddeynta degmada ama doorashada Degmada ee qofka wax lagu baariyey

Waxaa waajib ku ah qofka lagu baariyey inuu caddeeyo degmadiisa ama meesha uu u doorto degmo ay ku taalo Maxkamadda fulineysa gadidda.

Haddii taasi la waayo, gaarsiinta iyo ogeysiinta waxaa loo dhigayaa xafiiska kaaliyaha.

Qodobka 403aad

Bandhigga ka dambeeya Xaraashka

Waa bannaan tahay haddana in la sameeyo bandhigyo gadashada ah toban maalmood dhexdood, laakin wax ka soo qaad ma laha haddii uusan sicirka la soo bandhigay ka badnayn 20 % lacagtii lagu baariyey

Bandhigaha waxaa waajib ku ah inuu keeno xafiiska Kaaliyaha caddeyn koobeysa tilmaanta sicirka, inuu bixiyo dammaanad aan ka yaraan toban meelood meel oo ka mid ah sicirka la soo bandhigay iyo inuu dhigo mablaq qiyaas ah oo kharajka gadidda oo uu xaddidaayo Kaaliyaha.

Qofka ku meel gaar ahaan wax lagu baariyey sida waafaqsan qodobka 401 waxaa lagu dabbaqayaa axkaanta qaybta ugu dambeysa ee isla qodobkaas.

Qodobka 404aad

Xaraashka Cusub

Kaddib markii ay dhammaato muddada loo gooyey in lagu keeno bandhiga badan ee lagu caddeeyey qodobka hore Garsooruhu wuxuu amar ku qabanayaa fadhi lagu sameynayo xaraashka cusub oo lagu billaabayo sicirka saldhigga ah ee ka yimid bandhigga ugu badan.

Kaaliyuhu wuxuu go'aanka ku faafinayaa qaababka faafinta ee lagu sheegay qodobka 397.

Xaraashka waxaa lagu samaynayaa qaababka lagu sheegay qodobka 401 iyo go'aanka baarinta ugu weyn sheegaya waa kama dambeys.

### Qodobka 405aad

### Bixinta Sicirka

waxaa ku waajib ah qofka lagu baariyey xaraashka in uu dhiibo sicirka iyadoo laga reebayo dammaanaddii horey uu u bixiyey, kuna dhiibo muddada iyo habka lagu sheegay go'aankii farayey amarka gadidda sida waafaqsan qodobka 398.

Haddii maguurtada lagu baariyo deynlaha rahanta rasmiga ah leh ama qof loo idmay in uu ku qaato deyn leh dammaanadda rahmi rasmiya ah waxaa u bannaan Garsooraha in uu amar ku xaddido dhiibista baaqiga sicirka.

### Qodobka 406aad

### Wareejinta Xoolaha la gaday

Garsooraha waxaa waajib ku ah in uu soo saaro kaddib markii sicirka la dhiibo amar loogu wareejinayo xoolaha la gaday qofka lagu baariyey isagoo ku soo celinaya sifooyinkii lagu sheegay go'aanka farahayey gadidda, amarka ku bixiyey tirtiridda Diiwaangelinta qabashooyinka iyo rahaamadaha rasmiga ah haddii ayna tan dambe u laabaneyn xilal uu qaaday qofka wax lagu baariyey sida waafaqsan qaybta labaad ee qodobka hore.

Haddana waa in amarka laga helaa in deynqabaha iyo ilaaliyaha ay isaga baxaan maguurtada la gaday.

Amarkuna wuxuu leeyahay xoog ah in gadidda la geliyo Diiwaanka maguurtada iyo xoog fulitaan oo ah in laga baxo.

### Qodobka 407aad

### Oofin la'aanta sicirka qofka lagu baariyey

Haddii qofka xaraashka lagu baariyey uusan ku dhiibin sicirka muddada iyo qaabka loo xaddiday wuxuu Garsooruhu amar ku bixinayaa in uu dhacay iyo lumitaanka dammaanadda ganaax ahaan, wuxuuna qabanayaa fadhi kale oo uu ku ahegeysanayo dhinacyada sida waafaqsan qodobka 397.

Kaaliyaha wuxuu gaarsiinayaa amarkaas qofka xaraashka lagu baariyey sidoo kale wuxuu ku faafinayaa hababka faafinta ee lagu sheegay qodobka 397.

Xaraashka cusubna waxaa loo samaynayaa si waafaqsan qodobka 397 iyo wixii ka dambeeya.

Haddii uu ka yaraado sicirka gadidda iyo dammaanadda lala wareegay lacagta laga helo xaraashkii hore Garsooruhu wuxuu amar ku soo saarayaa in la saaro qofka xaraashka lagu baariyey ee ka dabamaray oofinta in uu bixiyo inta u dhexaysa kaddib markii uu dhegeysto dhinacyada iyo dadka kale ee danta leh.

Amarkaasi wuxuu xoog fulitaan u leeyahay deynlayaasha aan ka faa'iideysan ka qaybgalka wixii ka soo baxay fulinta haddii la waayana waxaa iska leh deyn qabaha lagu fulinaayo.

Qodobka 408aad

Tillaabooyinka laga qaadayo ka qeybgelin la'aanta xaraashka

Haddii aan qofna u soo banbixiin gadashada maguurtada naadada loo soo bandhigay waxaa u bannaan midkasta oo ka mid ah deynleyaasha in uu ku keeno toban beri dhexdood warqad uu ku warsanayo in lagu gaar yeelo xoolaha sida waafaqsan qodobka soo socda.

Qodobka 409aad

Koobinta weydiisashada qaybinita

Weydiisashada qeybinta waa in laga helo bandhig mablaq lacageed ee aan ka yareen kharajka fulinta, lacago kale ee amaah ah; haddii ay jiraan oo leh xaq horumarin kana horreeyey kan bandhigaha iyo sicirka loo gooyey Maguurtada ee Garsooruhu ku xaddiday go'aanka faraayo gadidda.

Qodobka 410aad

Cusbooneynta xaraashka aan laga qayb gelin

Garsooraha fulinta, marka ay ka soo wareegan 10 maalmood xaraashka aan laga qayb gelin, wuxuu farayaa dhegeysiga dhinacyada iyo deynlayaasha qoran ee aan ka soo qayb gelin.

Fadhiga la qabtay, haddii uu jiro farqi u dhexeeya amaahda weydiistaha iyo sicirika loo gooyey maguurtada, Garsooruhu wuxuu u wacayaa qofka qaybta u helay maguurtada inuu bixiyo wixii u soo haray.

Garsooruhu wuxuu amar ku soo saarayaa wareejinta maguurtada mar haddii lacagta la dhiibo. Fadhiga lagu sheegay lambarka labaad haddii ayna jirin dalabaad ka qayb galka qaybinta, Garsooruhu wuxuu farayaa Maamul Garsooreed ama wuxuu amrayaa in la sameeyo xaraash cusub.

Xaaladaan dambe, garsooruhu wuxuu xaddidi karaa sicir saldhig ah oo ka hooseeya shan meelood meel midkii hore.

## Qodobka 411aad

## Magacaabidda Maamulaha Garsoorka

Maamulaha garsoorka wuxuu maamuli karaa maguurtada muddo saddex sanadood aan ka badneyn; waxaana loo dhiibayaa mid ama wax ka badan oo deynlayaasha ah. ama deynqabaha laftiisa haddii deynleyaasha dhammaantood ku raalli noqdaan. Muddadaas markii ay dhacdo, waa in la sameeyaa xaraash cusub.

Garsooruhu waa u bannaan tahay in uu dheereeyo muddada hal mar ama wax ka badan ee sidaa haddii ay warsadaan dhinacyada oo dhan, dheereyntuna isku darkeedu kama badnaan karto saddex sano.

Maamulka wuu dhacaya muddada lagu sheegay qaybta hore ka hor haddii deynlaha wax loo qabanaayo ama mid kale ee deynleyaasha ka mid ah warsado in la sameeyo xaraash cusub.

## Qodobka 412aad

## Xisaab Keenid

Maamulaha waxaa saaran waajibaadka saaran dhowraha, wuxuuna xaq u leeyahay abaalgud oo Garsooruhu ku qaddiraayo amarkiisa, haddii isagu ka tanaasulo mooyee.

Maamulaha waxaa waajib ku ah, saddex bilood kasta dhammaadkood, haddii Garsooruhu la noqon inuu qabto muddo kale, inuu keeno xafiiska kaaliyaha xisaabta maamulkiisa, dhigana waxyaabaha manfaca dhaliyo ee jira, hababka uu garsooruhu gooyo.

Waa inuu keenaa marka maamulkiisa dhammaado xisaab dhammaad ah.

Xisaabaha aan dhammaanin iyo tan dhammaadka ahba waa inuu oggolaadaa Garsooraha.

Si loo helo muraadkaas, isla marka la keeno xisaabta, Garsooruhu wuxuu qabanayaa fadhi lagu dhegeyssanayo dhinacyada, kuna saabsan dulucda xisaabta la keenay iyo xalliga khilaafaadka ka dhalan kara xisaabta.

Go'aannada Garsooraha waxay leeyihiin qaabka amarka lamana duri karo.

## Qodobka 413aad

## Qaybinta Miraha

Inta uu socdo Maamulka Garsoorka, Garsooraha amar aan la duri karin wuxuu ku fari karaa in miraha la gurubsaday loo qeybiyo deynlayaasha sida waafaqsan Qodobka 414 iyo kuwa la xiriiro.

## Qodobka 414aad

### Mashruuca qaybinta Xoolaha xaraashka ka soo gala

Ka hor intii ayna dhammaan muddo ka badan soddon beri laga billaabo markii lacagta la dhiibay Garsooruhu wuxuu dejinayaa mashruuc uu ugu qeybinayo lacagta deynlayaasha wadaaga mid kasta heerkiisa iyadoo la ilaalinayo kuwa leh xuquuqda tilmaaman, waxaa la dhigayaa xafiiska Kaaliyaha si ay u dersaan deynlayaashu iyo deynqabahu, waxaana waajib ah inay u dhexeyso ugu yaraan toban beri qabashada fadhiga iyo ogeysiinta.

## Qodobka 415aad

### Maqnaashaha.

Haddii dhinacyada qaarkood ka maqnaadaan fadhiga lagu xaddiday si waafaqsan qodobka hore ayna sugnaato ama ay muuqato in ay suurtowdo in maqnaashihiisa ay sabab u tahay waxyaalo ka baxsan awooddiisa Garsooruhu wuxuu xaddidayaa fadhi kale oo Kaaliyuhu ogeysiinayo dhinacyada maqan.

Haddiise dhinacu ka maqnaado haddana fadhiga labaad waxaa loo qaadanayaa in uu waafaqay mashruuca.

## Qodobka 416aad

### Wafaqidda Mashruuca

Haddii ay dhammaato waafaqidda mashruuca ama ay dhinacyada dhammaantood isla gaaraan heshiis waxaa taas lagu qaarayaa qoraalka wuxuuna amrayaa garsooruhu bixinta qaybaha qof qofka ah haddii kale waxaa la raacayaa axkaanta qaybta afraad iyo inta ugu dambeysa qaybta shanaad ee qodobka 376.

# MADAXA LIXAAD
# KU FULINTA XOOLAHA ANN QAYBSANEYN

## Qodobka 417aad

### Qabashada Xoolaha aan qaybsanayn

Waa bannaan tahay in la qabto xoolaha aan qaybsaneyn xataa haddii dadka wada leh dhammaantood ayna u ahayn deynlaha deynqabayaal.

Markaas oo kale Garsooruhu amarka uu ku soo saarayo qabashada ee lagu xusay qodobka 350 ayuu xaddidayaa fadhi ay isugu imaanayaan dadka danta leh si ay u dhegeystaan tillaabooyinka la qaadayo ee lagu tilmaamay qodobka soo socda. Waxaana laga reebayaa dadka

shurkada in ay u oggolaadaan deynqabaha in uu soocdo qeybtiisa uu ku leeyahay xoolaha la wadaago Maxkamadda idan la'aanted.

Kaaliyuhu waa in uu gaarsiiyo deynqabaha iyo dadka shurkada la ah nuqullo ka mid ah arjiga qabashada iyo amarka lagu sheegay qaybta hore ugu yaraan 10 beri ka hor maalinta fadhiga loo qabtay.

Isla muddadaas kaaliyuhu waa inuu deynlaha weydiistay qabashada ka siiyaa ogeysiis amarka qabashada.

Haddii fulinta ay ku saabsan tahay maguurto waxaa la dhawrayaa qaabka faafinta ee uu amraayo qodobka 397.

### Qodobka 418aad

### Tillaabooyinka Garsooraha

Fadhiga loo qabtay, Garsooruhu wuxuu go'aan ku gaarayaa soocidda dabiicad ahaan qaybta uu leeyahay deynqabaha.

Haddii soocidda ay suurtoobeyn, Garsooruhu wuxuu amrayaa gadidda qaybta ama wuxuu goynayaa in qaybinta ay ku dhacdo sida uu qabo xeerka madaniga ah; wuxuuna tillaabooyinka baarista go'aanka ku qaadanayaa qaabka caadiga ee dacwadda darajada koowaad.

xaaladdan dambaysa, fulinta waa la joojinayaa ilaa dhinacyada qaybinta heshiis ay ka gaaraan ama lagu dhawaaqo xukun dhammaad ah (sentenza passata in giudicata).

Qaybinta kaddib xoolaha deynqabaha waa la gadayaa sida waafaqsan axkaanta lagu sheegay madaxa hore, qabashadu waxay raacaysaa xoolaha deynqabaha sida kor lagu sheegay.

## MADAXA TODDOBAAD

## FULINTA LIDKA KU AH QOFKA SADDEXAAD EE DEYNQABUHU WAX KU LEEYAHAY

### Qodobka 419aad

### Habka fulinta ee dadka saddexaad

Haddii sheyga wax lagu fulinaayo uu yahay xoolo ku jira rahan qabasha ah ama mid rasmi ah, ee dammaanad deyn qofka kale lagu leeyahay ama xoolo uu gaday deynqabaha, gadidduna lagu burriyey khiyaano awgeed, waxaa lagu dabbaqayaa axkaanta Madaxda hore ilaa inta ayna ka hor imaaneyn qodobbada soo socda.

### Qodobka 420aad

### Gaarsiinta digniinta gudashada

fulinta waxaa waajib ah in laga hormariyo weligeed digniinta gudashada, taasoo xataa loo sameynayo dadka saddexaad.

Waxaa waajib ah in si cad loogu xuso warqadda digniinta gudashada xoolaha dadka saddaxaad ee la doonaayo in wax lagu fuliyo.

### Qodobka 421aad

### Axkaan gaar ah

Qabashada iyo guud ahaan warqadaha fulinta waxaa lagu sameynayaa dadka saddexaad, waxaana lagu dabbaqayaa dhammaan axkaanta ku saabsan deynqabaha, iyadoo laga reebaayo diidmada lagu sheegay qodobka 400, qaybta hore.

## BAABKA LABAAD

## FULINTA DHIIBISTA IYO KA BIXIDDA AH

### Qodobka 422aad

### Amarka diigniinta ee dhiibidda ama ka bixidda

Qofka doonayo in la qaado tillaabooyinka ku saabsan in la siiyo shey guurto ah ama looga baxo maguurto waa in uu ku gaarsiiyaa qofka xilku saaran yahay warqad wicid oo kulmineysa caddeynta lagu sheegay qodobka 343 iyo tilmaamo kooban ee xoolaha wax lagu fulinaayo.

### Qodobka 423aad

### Habka dhiibidda.

Kaddib marka ay dhammaato muddada lagu sheegay warqadda digniinta, gaarsiiyuhu asagoo wata warqadda leh xoogga fulinta iyo warqadda digniinta gudashada wuxuu aadayaa meesha laga helo xoolaha wuxuuna u baarayaa sida lagu xusay qodobka 361, markaasna wuxuu u dhiibayaa dhinaca weydiistay dhiibidda ama qof uu asaga magacaabay.

### Qodobka 424aad

### Waxyaalaha la qabtay

Haddii waxyaalaha la dhiibaayo hore loo qabtay ma bannaana dhiibiddooda, dhinaca weydiistay dhibidda waxaa waajib ku ah si uu u helo xaqiisa inuu sameeyo ka hortag sida waafaqsan qodobka 433.

### Qodobka 425aad

### Habka ka bixidda

Gaarsiiyaha Maxkamadda ugu yaraan saddax beri ka hor waa inuu ogeysiiyaa dhinaca la doonaayo inuu ka baxo maguurtada maalinta iyo saacadda uu fulinaayo ka bixidda.

Gaarsiiyaha Maxkamadda asagoo wata warqadda xoogga fulitaanka leh iyo warqadda digniinta gudashada, kuna isticmaalaayo awoodda uu siinaayo qodobka 361 wuxuu u gudbinayaa dhinaca weydiistay fulinta ama qof uu magacaabay lahaanshada asaga u dhiibaayo furayaalka amrayana dadka haysta maguurtada haddii ay jiraan inay aqoonsadaan lahaadaha cusub.

### Qodobka 426aad

### tillaabooyinka ku saabsan guurtada uuna fulitaanku ku socon

Haddii maguurtada dhexdeed laga helo guurto oo uu leeyahay dhinaca ay waajib ku tahay ka bixidda waajibna ayna ahayn dhiibistooda, gaasiiyaha Maxkamadda, haddii dhinaca leh uusan ka fuqsan markiiba, waxaa u bannaan inuu faro dhawrista isla meesha ayadoo dhawristaas uu sameynaayo xataa dhinaca weydiistay haddii raalli uu ka yahay, ama in loo qaado meel kale.

Haddii waxyaabaha ay yihiin wax la qabtay, Gaarsiiyaha Maxkamadda wuxuu ogeysiis ka siinayaa ka bixidda deynlaha weydiistay, kaasoo qabashada loo sameeyey iyo Garsooraha awoodda leh, haddii loo baahdo beddelaadda dhawraha.

### Qodobka 427aad

### Tillaabooyin ku meel gaar ah

Haddii fulinta dhexdeed ay ka dhashaan dhibaatooyin aan dib loogu dhici karin arrinta, dhinac kasta wuxuu warsan karaa, xataa af ahaan, Garsooraha jooga meesha laga helo waxyaabaha la dhiibaayo ama xoolaha laga baxaya, tillaabooyin ku meel gaarka ah ee loo baahan yahay.

Garsooruhu wuxuu ku soo saarayaa amar tillaabooyinka lagu xusay qaybta hore.

### Qodobka 428aad

### Kharajka Fulinta

Gaarsiiyaha marka uu ku kacayo dhigidda qoraalka waa in uu sheegaa dhammaan kharajka ka baxay dhinaca doonaayo fulinta si tifaftiran.

Garsooruhu wuxuu kharajka ku goynayaa amar leh xoog fulitaan.

## MADAXA KOOWAAD

## FULINTA XILKA GUDASHADA AMA KA HARIDDA SHAQO SI KHASAB AH

### Qodobka 429aad

### Samaynta fulitaanka khasabka ah

Qofka doonaya in loo fuliyo xukun leh fulitaan khasab ah oo lagu khilaafay xil gudasho ama ka haritaan shaqo waxaa waajib ku ah in uu ku soo warsado warqad Garsooraha jooga meesha ay waajib tahay in lagu guto xilka isagoo xaddidaya Qaababka fulinta.

Garsooruhu wuxuu soo saarayaa amar kaddib markii uu dhegeysto dhinaca xilku saaran yahay, wuxuuna sheegayaa gaarsiiyaha ay waajib ku tahay in uu wado fulinta iyo dadka ay waajibka tahay in ay ku kacaan shaqada aan la fulin ama ka noqoshada shaqada lagu kacay.

### Qodobka 430aad

### Dhibaatooyinka ka dhasha fulitaanka

Waxaa u bannaan gaarsiiyaha in uu kaalmeysto xoogga nabadda guud, waxaana ku waajib ah in uu weydiisto Garsooraha qaadashada tallaabooyinka habboon si looga hortago dhibaatooyinka soo banbaxa fulitaanka dhexdiisa. Wuxuuna Garsooraha sidaas ku soo saarayaa amar (Decreto).

### Qodobka 431aad

### Celinta Kharajka

Kaddib markii fulitaanka dhammaado ama dhexdiisa ayuu dhinacyada soo warsaday fulitaanka u qori karaa garsooraha warqad uu ku sheegayo kharajka uu horey u baxshay oo uu calaamadeeyey Kaaliyuhu iyadoo la soo raacinayo arjiga lagu warsanaayo amarka bixinta.

Haddii uu arko Garsooraha in kharajka la doonayaa macquul yahay wuxuu soo saarayaa amar leh xoog fulitaan (Decreto).

## BAABKA SADDEXAAD

## KA HORTAGGA.

### Qodobka 432aad

### Ka hortagga Fulinta

Marka khilaaf uu ku jiro xaqa dhinaca weydiistay fulinta xoogga ah. Ka hortagga waxaa lagu samaynayaa weydiisasho loo gudbinayo Garsooraha awoodda leh, sida waafaqsan qodobka 346, 327 iyo 429.

Ka hortagga ku saabsan ansaxidda warqadda xoogga fulitaanka leh iyo digniinta gudashada. iyo kuwa kale ee ku saabsan gaarsiinta iyo dhammeynta mid-midka ee warqadaha fulinta, kuwaasoo ay ku jiraan suurtoobidda qabashada xoolaha waxaa lagu samaynayaa sida waafaqsan qaybta koowaad

Garsooruhu wuxuu ku xaddidayaa amar imaanshaha dhinacyada imaanaya hortiisa. Gaarsiinta weydiisashada iyo amarka waxaa sameynaya kaaliyaha.

Baarista iyo go'aanka dacwadda waxaa loo raacayaa qaabka caadiga ah ee dacwadda darajada koowaad.

Qodobka 433aad

Ka hortagga dadka saddexaad

Qofka saddexaad ee sheeganaya lahaansho ama xaq kale ee ku xiran maguurtada oo dul saaran xoolaha la qabtay waxaa u bannaan inuu weydiisasho oo ka hor tag ah u geeyo Garsooraha ka hor amarka gadidda xoolahaas.

Garsooruhu wuxuu soo saarayaa amar uu ku xaddidayo fadhi uu isugu yeero hortiisa dhinacyada; Kaaliyuhu wuxuu ogeysiinayaa dhinacyada weydiisashada iyo amarka.

Haddii dhinacyada fadhiga dhexdiisa heshiis ku gaari waayaan, Garsooruhu wuxuu qaadayaa tallaabo baaridda iyo go'aanka dacwadda sida waafaqsan habka caadiga ah ee dacwadda darajada koowaad.

Qodobka 434aad

Ka hortagga lala-daahay

Haddii Garsooruhu uuna joogin gadidda xoolaha guurtada ayadoo la sameeyey ka hortag ama la sameeyey ka hortag kaddib gadidda, xuquuqda dadka saddexaad waxaa lagu yeelanayaa mablaqa lacagta ee laga helay gadidda.

Qodobka 435aad

Xadka Sugidda ee Maragta

Uma bannaana qofka saddexaad ee sameynaaya ka hortagga inuu ku caddeeyo marag xaqa uu ku leeyahay xoolaha lagu qabtay guriga ama Kambaniga deynqabaha, haddii uuna jiritaanka xaqaas ku xirneyn xirfadda ama Ganacsiga uu sameeyo qofka saddexaad ama deynqabaha.

Qodobka 436aad

Ka hortagga afada deynqabaha

Uma bannaana afada deynqabaha ee la nool inay oogto ka hortag ku saabsan xoolaha guurtada ah ee lagu qabtay gurigiisa, haddii laga reebo xoolaha ku saabsan Meherka ama xoolaha ay ku caddeyso qoraal leh taariikh sugan in ay lahaatay guurka ka hor ama ay ku heshay hibo ama dhaxal sababtiisu tahay dhimasho.

## BAABKA AFARAAD

## JOOJINTA TILLAABOOYINKA FULINTA IYO DHICIDDOODA

Qodobka 437aad

Xaddidaada Joojinta

Ma bannaana joojinta fulitaanka khasabka ah Garsooraha amar la'aantii haddii uusan qaynuunka sheegin si taas khilaafsan.

Qodobka 438aad

Joojinta fulinta ka hortag daraadeed

Haddii la keeno ka hortagga fulitaanka si waafaqsan qodobka 432 iyo wixii ka dambeeya, lana helo asbaab xoog leh, Garsooraha waxaa u bannaan in uu joojiyo tillaabooyinka markii uu soo warsado dhinacyada midkood isagoo dammaan wata ama la'aanteed.

Garsooruhu wuu joojinayaa qaybinta waxa ka soo baxa fulinta dhammaantood ama qaarkood haddii ay dhacdo dood ka mid ah ku wa lagu sheegay Qodobka 376.

Garsooruhu go'aan buu ka soo saarayaa doodda kaddib markii uu dhinacyada dhegeysto.

Waxaa u bannaan garsooraha xaaladaha degdegga ah in uu soo saaro amar uu ku joojinayo tallaabooyinka isagoo u xaddidaya fadhi ay isugu imaanayaan dhinacyadu, uuna go'aan ku gaaro fadhiga.

Qodobka 439aad

Waxyaabaha ka dhalanaya joojinta

Haddii la joojiyo tallaabooyinka ma bannaana in lagu kaco tallaabo kasta oo fulitaan ah haddii aan Garsooruhu amrin sidaas si ka duwan.

Qodobka 440aad

Dhaqaajinta Dacwadda

Dacwadda waa in lagu dhaqaajiyaa arji muddada go'an ee uu qab-tay Garsooraha, ayadoo ka dambeynaysa mar kastaba lix bilood laga billaabo maalinta xukunka darajada koowaad uu noqday dhammaad; iyo ogeysiinta xukunka racfaanka ee diidaya ka hortagga.

Qodobka 441aad

Ka noqoshada

Dacwadda fulinta way dhaceysaa, haddii ka hor baarinta gadidda xaraashka ah ,deynlaha xoolaha loo qabtay ama deynlayaasha soo dhexgalay ee qaba warqadda leh xoogga fulinta, ay ka noqdaan warqadaha fulinta.

Kaddib gadidda, dacwadda fulinta wey dhacaysaa haddii dham-maan deynlayaasha ka qeybgalay ay ka noqdaan warqadaha fulinta.

Qodobka 442aad

Dacdarrada Dhinacyada

Xaaladaha lagu caddeeyey qaanuunka ka sokow, dacwadda fulinta wey dhaceysaa marka dhinacyada ayna dhaqaajin ama ayna hore ugu wadin muddada go'an ee uu xaddiday qaanuunka ama Garsooraha.

Dhicidda waa mid qaanuuni ah, waxaana ku caddeynaya go'aan Garsooraha xataa haddii aan la weydiisan.

Qodobka 443aad

Ka maqnaashaha fadhiga

Haddii dacwadda fulinta dhexdeeda dhammaan dhinacyadu ka maqnaadaan fadhiga, Garsooruhu wuxuu qabanayaa fadhi kale, Kaali-yuhuna wuxuu ogeysiinayaa dhinacyada.

Haddii dhinacyadu imaan waayaan fadhiga cusub, Garsooruhu wuxuu go'aan ku caddeynayaa dhicidda dacwadda fulinta.

Qodobka 444aad

Waxyaabaha ka dhalanaya dhicidda dacwadda

Haddii dacwaddu ay dhacdo ka hor baarinta gadidda xaraashka ah, wax alla wixii tallaabo oo la qaaday waxay noqonayaan wax kama jiraan; haddiise dhiciddu timaado kaddib baarinta gadidda xaraashka ah, lacagta ka soo baxda gadidda waxaa loo dhiibayaa deynqabaha.

Haddii fulintu ku saabsan tahay maguurto, Garsooruhu go'aanka uu ku caddeynaayo dhicidda, ayuu ku amrayaa tirtiridda diiwaangelin-ta qabashada. Amrakaasna wuxuu leeyahay xoog fulitaan xaggga tirtirid-da.

Marka ay dhacdo dacwadda, Xeer Ilaaliyuhu wuxuu u keenayaa deynqabaha xisaabta, ayadoo lagala doodayo laguna xiraayo garsooraha hortiisa.

Kharajka dacwadda dhacday wuxuu saaran yahay dhinaca hore u dhiibay.

# TUSMO KOOBAN

## BUUGGA KOOWAAD

Qoocbbada Guud . . . . . . . . . . . . . . Bogga 781

Baabka 1aad

Hay'aadka Garsooridda . . . . . . . . . . . . . » 781

Madaxa 1aad

Gorsooraha . . . . . . . . . . . . . . . . . . » 781

Qaybta 1aad

W'laayadda Garsoorka iyo Awoodda . . . . . . . . » 781

Qaybta 2aad

Awoodda xagga mawduuca, qiimaha iyo dalka . . . . » 782

Qaybta 3aad

Awoodda xagga dalka . . . . . . . . . . . . . » 784

Qaybta 4aad

Beddelaadda awoodda . . . . . . . . . . . . . » 875

Qaybta 5aad

Maqnaashaha wilaayadda Garsooridda iyo awoodda . » 786

Qaybta 6aad

Habka wilaayadda Garsooridda iyo awoodda . . . . » 787

Qaybta 7aad

Ka joogsashada duridda iyo mas'uuliyadda Garsoorayaasha » 788

Madaxa 2aad

Kaaliyayaasha iyo Gaarsiiyayaasha . . . . . . . . » 789

Madaxa 3aad

Khabiirka Teknikada ah iyo Ilaaliyaha 'yo Kaaliyayaasha Garsooraha . . . . . . . . . . . . . . . . . » 790

Baabka 2aad

Xeer Ilaalinta Guud . . . . . . . . . . . . . . » 791

Baadka 3aad

Madaxa 1aad

Dhinacyada iyo wakiillada . . . . . . . . . . . » 792

Madaxa 2aad

Qareennada . . . . . . . . . . . . . . » 793

Madaxa 3aad

Waajibaadka dhinacyada iyo Qareenka . . . . . . » 794

Madaxa 4aad

Kharajka dacwadda iyo mas'uuliyadda dhibaatooyinka ka dhasha . . . . . . . . . . . . . . . . . » 795

Baabka 4aad

Oogidda dacwadda . . . . . . . . . . . . . » 796

Baabka 5aad

Awoodaha Garsooraha . . . . . . . . . . . » 798

Baabka 6aad

Madaxa 1aad

Tallaabooyinka Dacwadda . . . . . . . . . . » 799

Qaybta 1aad

Qaabka tallaabooyinka . . . . . . . . . . . » 799

Qaybta 2aad

Fadhiga . . . . . . . . . . . . . . . . » 800

Qaybta 3aad

Xukunka . . . . . . . . . . . . . . . . » 800

Qaybta 4aad

Gaarsiin . . . . . . . . . . . . . . . . . » 801

Madaxa 2aad

Muddooyinka . . . . . . . . . . . . . . . » 804

Madaxa 3aad

Burrinta tillaabooyinka . . . . . . . . . . . » 805

Buugga 2aad

Oogidda dacwadda . . . . . . . . . . . . » 807

Baabka 1aad

Qaadista dacwadaha darajada koowaad . . . . . » 807

Madaxa 1aad
Oogidda dacwadda . . . . . . . . . . . . . » 807
Qaybta 1aad
Arjiga dacwadda iyo u yeeridda . . . . . . . . » 807
Madaxa 2aad
Diyaarinta dacwadda . . . . . . . . . . . . » 810
Qaybta 1aad
Awoodda Garsooraha . . . . . . . . . . . . » 810
Qaybta 2aad
Qaadista dacwadda . . . . . . . . . . . . . » 811
Qaybta 3aad
Diyaarinta ku saabsan sugidda . . . . . . . . » 812
Qaybta 4aad
Soo dhexgalka ahinaca saddexaad iyo midaynta Dacwadda . . . . . . . . . . . . . . . . » 822
Madaxa 3aad
Dhamaynta dacwadda . . . . . . . . . . . . » 824
Madaxa 4aad
Fulinta xukumada iyo gaarsiintooda . . . . . . . » 825
Madaxa 6aad
Saxidda xukunnada iyo amarada . . . . . . . . » 826
Madaxa 7aad
Joojinta dacwadda kala go'idda iyo dhiciddeeda . . . » 828
Qaybta 1aad
Joojinta dacwadda . . . . . . . . . . . . . » 828
Qaybta 2aad
Kala go'idda qaad'sta dacwadda . . . . . . . . » 829
Qaybta 3aad
Dhigidda dacwadda . . . . . . . . . . . . . » 830
Baabka 2aad
Duridda . . . . . . . . . . . . . . . . . » 831
Madaxa 1aad
Jidadka Duridda . . . . . . . . . . . . . . » 831
Madaxa 2aad
Racfaanka . . . . . . . . . . . . . . . » 833

Madaxa 3aad

U cabashada Maxkamadda Sare . . . . . . . . . » 836

Buugga 3aad

Hababka gaarka ah . . . . . . . . . . . . . » 843

Baabka 1aad

Dacwooyinka Gaaban . . . . . . . . . . . » 843

Madaxa 1aad

Dacwooyinka lagu fulinaayo amarka . . . . . . » 843

Madaxa 2aad

Bannaanshaha ka saaridda . . . . . . . . . . » 846

Madaxa 3aad

Hababka dhowrista . . . . . . . . . . . . » 847

Qaybta 1aad

Qabasha . . . . . . . . . . . . . . . . » 847

Qaybta 2aad

Baaritaanka ilaaliska ah . . . . . . . . . . » 849

Qaybta 3aad

Hababka degdegga ah iyo lahaanshaha . . . . . . » 849

Madaxa 4aad

Ka reebidda iyo ka qaadidda tasarufka . . . . . . » 850

Madaxa 5aad

Kan la waayay iyo kan la xukumay dhimashadoodu
maqnaasha iyo malayn dhimasho . . . . . . . . » 851

Baabka 2aad

Xoogga xukunnada dalalka shisheeyaha ah . . . . . » 852

Madaxa 1aad

Aqoonsi . . . . . . . . . . . . . . . . » 852

Baabka 3aad

Dhexdhexaadinta . . . . . . . . . . . . . » 853

Baabka 4aad

Habka qolka tashiga . . . . . . . . . . . » 858

Buugga 4aad

Habka fulinta . . . . . . . . . . . . . . » 859

Baabka 1aad

Madaxa 1aad

Waxyaalaha la fulin karo . . . . . . . . . . » 859

Madaxa 2aad

Wareegga fulinta khasabka ee mulkiyadda guud ahaan . » 862

Qaybta 3aad
Fulinta guurtada ee Deynqabaha . . . . . . . . . » 866

Madaxa 4aad
Ful'nta ku saabsan mulkiyadda dadka saddexaad . . . » 872

Madaxa 5aad
Ku fulinta maguurtada . . . . . . . . . . . . » 875

Madaxa 6aad
Ku fulinta xoolaha aan qaybsanayn . . . . . . . . » 884

Madaxa 7aad
Fulinta lidka ku ah qofka saddexaad ee deynqabuhu
wax ku leeyahay . . . . . . . . . . . . . . » 885

Baabka 2aad
Fulinta dhiibista iyo ka bixidda ah . . . . . . . » 886

Madaxa 1aad
Ful'nta xilka gudashada ama ka haridda shaqo si khasab ah » 888

Baabka 3aad
Ka hortagga . . . . . . . . . . . . . . . . . » 888

Baadka 4aad
Joojinta tillaabooyinka fulinta iyo dhiciddooda . . . » 890